Faafinta Kitaabka Xaqiiqada

QIRASHADII JAAJUUSKA INGIRIISKA

Iyo

Cadawtinimada Ingiriiska ee Islaamka u hayo

Waxaa tarjumay Kitaabkan

M. Siddiq Gumush

Daabacaada Afaraad

Hakîkat Kitâbevi
Darüşşefeka Cad. No: 53 P.K.: 35 **34083**
Fâtih-İSTANBUL/TÜRKİYE
Tel: 0212 523 45 56-532 58 43 Fax: 0212 523 36 93
http://www.hakikatkitabevi.com.tr
e-mail: bilgi@hakikatkitabevi.com.tr
2016

BARAARUG

Baadariyaasha, kirishtaanka iyo yahuuda waxay faafiyaan waxa loo yaqaano Talmutu, halka Istanbul Xaqiiqda Kitaabka ay ka faafiyaan Islaamka meesha baadirayaasha aysan heysan wax diin ah waxayna u shaqeeyaan dantooda.

Iyada oo la isticmaalaayo caqli, cilmi, iyo naxariis gaalada waan u isticmaali karnaa si aan wax ugu sheegno.

Si'aan u caawino faafinta, dadka aduunka oo dhan iyo aakhiro waa in aan ka shaqeynaa arintaas oo sabab u noqoneyso in ay ku soo biiraan muslimmiinta.

Dadka faa'ido iyo qiimo maleh haddii ay aysan caawinin dadka kale.

Gaalada iyo Yahuuda waxay gacmahooda ku badeleen kitaabyadii loo soo dire ee kala ah Towraat iyo Injiil waxayna ku faanaan in ay ayaga badeleen.

Quraanka kariimkana waa sida uu Ilaah tacaalaa u soo dejiyey.Baadariyaasha iyo naagahooda Kitaabka Xaqiiqada wuxuu noo sheegayaa in aan ka diktoonaano waxa ay qalaan iyo si naxariis leh in aan u akhrino waxa aan Fahmina fahamkooda waa qasab.

Ilaah waxa uu xarimey dulmiga iyo isticmaalka hudasiga. Qof walba waxa uu sameeyo ayaa lagu abaal marinaa.

Baski: İhlâs Gazetecilik A.Ş.
Merkez Mah. 29 Ekim Cad. İhlâs Plaza No: 11 A/41
34197 Yenibosna-İSTANBUL Tel: 0.212.454 30 00

HORDHAC

Cadawga Islaamka waxaa ugu wayn Yahuuda iyo mushrikiinta sida Allahu Tacaalaa qur'anka kariimka noogu cadeeyay Allahu Tacaalaa waxaa uu kitaabkiisa quraanka kusheegay sidatan:nin layiraahdo Cabdulaahi Binu Saba ee Yahuudiga ahaa ee reer Yamaneedka ahaa waxaa uu ahaa (Mushrikiinta Iyo Yahuuda Ayaa Ugu Cadaawad Badan Mu'miniinta) Maa'ida Aayada/82, Islaamka burburintiisa dhanka gudaha waxaa u istaagay ninkaan waana ninkii ugu horeeyey ee Islaamka fidno ka dhex abuura waxaana uu aas aasay firqada layiraahdo Shiicada taas oo uu ku weeraraayay caaqiidada saxda ah ee (Ahlusunnah wal jamacah).

Firqadani waa ay soo xoogaysanaysay xiliba xiliga kasii danbeeyo waxana hoogaaminayay niman Yahuud ah oo isu ekaysiinayo in ay yihiin culumada Shiicada nimankaa Yahuuda ah dhibaatooyinka ay muslimiinta u gaysteen waxaad uga bogan kartaa kitaabka layiraahdo (**Qiyaanada Yahuda**) ee ay baahisay maktabada lagu magacaabo maktabatul Saxaabatul Islamiyah, ee kutaala wadanka Kuwait iyo kitaabka layiraahdo (Al Rajul Al Sanam) ee ay baahisay maktabada layirahdo; (Maktabatu Al Bayrud), kadib markii lakor yeelay Nabi Ciise *Calayhi Salaam* waxaa wax laga badalay kitaabkii Injiil Masiixiyiinta badankoodu waxay noqdeen (Mushrikiin) qaybo kalana waxa ay noqdeen (Kaafiriin) maxaa yeelay waxa ay beeniyeen risaaladii Nabi Muxamed *Calayhi salaatu Wassalaam*.

Qaybta Mushrikiinta noqotay iyo qaybta Kaafiriinta noqotay waxaa la'isku yiraahdaa **Ahlu Kitab**, markii uu Islaamku soo shaacbaxay waxaa gilgishay oo dumay awooddii baadiriyiinta qarniyadii dhexe, si Islamka loo

burburiyo waxa ay aas aaseen ururo lamagac baxay Mubashirin, waqtigaasi Ingiriisku waxaa uu ahaa dawladii ugu horeysay ee aas aasta wasaarad loogu magacdaro (Wasaarada Gumaysiga), waxa ay Islamka ku weerareen hagar daamooyin Yahuudnima ah, awood siyaasadeed iyo mid milatari oo aan laqiyaasi karin mid ka mid ah kumanaan jaajuusiin ah kuwaas oo loo diray wadamadii Islamka oo ay soo dirtay (Wasaradii Gumaysiga) ee dalka Ingiriiska oo la oranjiray Hamfari kaasoo bilaabay Muxamed Cabdi Wahab ee reer Najdiga ahaa kaas oo kunoolaa magalada Basra sanadkii 1125 Hijiryada oo kubeegan 1713 Miiladiga.

Hagar daamooyinkiisii waxa ay ku qaadatay sanadyo badan waxaa uu aas aasay firqada layiraahdo (Al Wahabiyah), Hanfari waxaa uu ahaa jaajuus Ingiriis ah waxaa uu ku qasbay wasaradii gumaysiga ee dalka Ingiriiska tilaabooyin jaajuusnimo ah oo ku wajahan wadamada islamka sida Masar, Ciraq, Xijaaz, Iran iyo Istanbul, oo ahayd xaruntii khilaafada Islaamka.

Burburinta Islaamka iyo u adeegidda masiixiiyinta cadawga Islaamku si walba oo ay isugu dayaan tirtirida Isalaamka awood uma aysan yeelan in ay damiyaan nuurka Allahu Tacaalaa gabi ahaanba maxaa yeelay illaahay baa quraankiisa ku cadeeyay in uu diinkiisa ilaalinayo sidaas darteed gaaladu ma awoodaan inay badalaan quraanka karimka ama ay damiyaan nuurkiisa,

waligood muslimiintuna afar iyo toban qarni waxay kusocdeen wadadii quraanka kariimka ah ee nuurka lahayd waxayna ku hormareen dhanka siyaasadda, ganacsiga, warshadaha, cilmiga iyo dhaqanka wanaagsan waxayna samaysteen dowlad wayn kadib afganbigii faransiiska sanadkii 1204 hijiryada oo kubeegan sanadka 1789 miiladiga, markii ay arkeen dhalinyadara reer yurub waxay kala kulmeen

hoogamiyashooda kanisadaha been abuur dulmi iyo fasaad ayna arkeen diintii Masiixiyada inaysan ahayn mid sax ah wayna isaga baxeen diintii Masiixiga waxayna qaateen diinta Islamka mar walbo oo ay Masiixiyada kafogaadaana waxay ku hormaraayeen aqoonta iyo tignolijiyada caalamiga ah, maxaa yeelay Masiixiyadu waxay car qaladaynaysay wadada horumarka ee musliminta.

Muslimiintii baratay kutubtii khaldanayd ee Masiixiyida lahayd ee ay qoreen baadirinitii reer yurub ee ay ku kadsomay dacaayadii Ingiriisku uu Islaamka kasameeyay waxay noqdeen kuwa diinta kabaxay oo kajaahil ah diinta Islaamka, mar walba oo Islaamka kafogaadan waxay kadib dhacayeen aqoonta maxaa yeelay Islaamku waxaa uu amrayaa horumar iyo shaqo, go'aanka siyaasadeed ee dawlada Ingiriska waxa uu ahaa inay isku balaariyaan caalamka oo dhan si uu ula baxo khayradkooda dabiiciga ah gaar ahaan Hindiya, Afrika iyo in ay dadka kunool wadamadaas ugu shaqaystaan sida xoolaha hantida dadkasna ay ula wareegan oo ay u dhoofsadaan wadankooda, dhanka kale muslimiintu waxay dadka ugu yeerayeen cadaalad, isjacayl iyo iskaashi waxayna is hortaagayeen dulimiga iyo cadaaladarida iyo dacaayada beenta ah ee Ingiriiska, hadaba kitaabkeenaan waxaan u diyaarinay saddex qaybod:

Qaybta Koowaad: Qaybtan waxay noo cadaynaysaa shirqooladii iyo dacaayadihii liitay ee ay diyaarisay Yahuuda uuna dhaqan galiyay Ingiriiska si ay Islaamka uga takhalusaan waxayna ka koban tahay todobada qeybood.

Qaybta Labaad: Qorshayaashii ay ka dhaqan galinayeen wadamada Islaamka ayna ku burburinayeen labadii quwadood ee Islaamka ee kala ahaa Khilaafadii Cusmaaniyiinta iyo

dawladii wadanka Hindiya, taariikhdaasna waxaad si faahfaahsan uga bogan kartaan kitaabka layiraahdo (Xaqiiqatul Yahuud) ee ay faafisay maktabatul Asxaabatul Islamiyah ee dalka Kuwait oo ciwankedu yahay Bopox 22821 Waxana qoray kitaabkaas nin layiraahdo Fu'aad Sayid Cabdiraxman Alrufaciyah kitaabkaasna waxaa uu kusaabsan yahay weeraradii ay Yahuudu kuhayeen diimaha muddo dhan 2000 sano iyo sida ay Islaamku udumiyeen waxaana kitaabkaan kusoo bandhigi doonaa cadaymo qoraal ah kuwaasoo ka badbaadinaayo dadka wax magaratada ah ee ku dhacay shirqool kii wahaabiyada.

Qaybta Sadexaad: Qaybtaan waa warkii oo kooban waxayna sugaysaa diinta Islaamka in ay tahay diinta xaqqa ah.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA KOOWAAD

Hamfari waxaa uu yiri dawlada Ingiriiska waxaa ay ahayd dawlad wayn oo ay calankeedu qoraxdu ka dhicin, hase ahaatee dawladeenu marka loo eego dawladaha ay gumaysanayso waxaa ay lamid noqonaysaa mid yar sida dawladihii Hindiya Shiinaha iyo Bariga Dhexe si kastaba ha ahaatee wadamada aan gumaysanayno siyaasad ahaan baan ku haysanaa waxa ayna gacanta ugu jiraan dadkii lahaa oona maamulaya sidaa darteed waxaa lagama maarmaan inoo ah inaan ka fakirno laba arimood oo waa wayn:

1. Wadamada gacanta inoogu jira in aysan gacanteena kabixin.

2. Intii aan ku jirin gacanteena inaan soogalino gacanteena, waxayna dhistay wasaradii gumaysiga iyo hay'ad ugaar ah muhiimadaas ama shaqadaas. Aniguna Hamfari ahaan waxaan ahaa nin ay aad wasaaradu ugu kalsoontahay waxayna madax iiga dhigtay shirkad loodiray bariga Hindiya, shirkadaas oo u muuqata shirkad ganacsi hase ahaatee xaqiiqadeedu ay tahay sidaan ku gaari lahayn qabsashada dhulal ka Hindiya ee fog, xukuumada Biriten waxay ku kalsoonayd in ay u sahlan tahay qabsashada dalka Hindiya sababtoo ah waxaa ku dhaqan qoomiyado kala duwan waxayna kala haystaan diimo kala duwan waxayna ku kala hadlaan luuqado kala duwan dadkaas oo aan isku dan ahayn sidoo kale waxay ku kalsoonayd xukumadeenu qabsashada wadanka Shiinaha sababtoo ah labada diimood ee laga haysto dalka Shiinaha ee kala ah (diinta Buudiga iyo Konfushiyusiyah), ma ahayn laba diimood oo awood badan leh hase ahaatee waxaa mudan in maskaxda lagu hayo suuro galnimada kacdoon wadaniyadeed inay sameeyaan dadka kunool dalkaas, sidaa darteed wax cabsi ah kama aysan qabin

dawlada Biriten labadaasi wadan mana aynan ilowsanayn inay horumar gaari karaan mustaqbal ka sidaas daraateed waxaan kudadaalnay sidaan u kala qaybin lahayn uguna baahin lahayn jahli, faqri iyo cudurada faafa wadamadooda, waxaanu ahayn kuwa aan kala kulmin wax caqabad ah meel marinta hadafyadeena anagoo isku ekaysiinayno inaan gacan siinayno wadamada Islamka.

Waxaan heshiis lagalnay ninka xanuunsan[1] inagoo karaadinayno faa'iido waxaana kula heshiinay inuu furo macaahid hoostagta wasaarada gumaysiga, xubnaha aqoonyahanada ee wasaarada gumaysiga waxaa ay soo saaren in ninkan xanuunsan awoodiisa iyo barnaamijkiisu ay burburayso wax kayar hal qarni waxaa kale oo aan heshiis hoose aan lagalnay dawlada Iran inay noo furto dugsiyo wax barasho oo hoostago wasaarada gumaysiga waxaa kale oo aan beernay rag dawli ah oo aan kadhignay rag jaajuusiin ah laalushka, maamul xumada iyo mashquulka madaxdii Islaamka ayaa waxay noqotey mid nusqaamisey horumarinta culuumta Islaamka, madaxdii waxay ku mashquuleen lacayaarida gabdho qurux badan waxay hilmaameen shaqooyinkoodii, arintaasi waxay horseeday burbur jiritaankii laba wadan (Hindiya iyo Shiinaha), laakiin anagu maanan ahayn kuwa ku kalsoon natiijadaas dhawr arimood dartood:

1- Awooda Islaamka oo ku dhex jirta quluubta caruurtooda, maxaa yeelay ninka ah hoogaamiyaha muslimka waxuu awood uleeyahay inuu soo jiito dadka muslimiinta ah, maxaa yeelay Islaamku waxaa uu muslimiinta ujoogaa booska ay Masiixiyadu ujoogto baadariyaashu.

Muslimiinta shiicada ee wadanka Iran waxay ahaayeen kuwa qatar badan leh sababtoo ah waxay u arkayeen qofkaan shiici ahayn inuu yahay gaal mushrik ah waxaa la waydiiyay

[1] Waxaa laga wadaa Imbaraadooriyaddii Cusmaaniyadda

mid ayaga kamid ah maxaad kasugayseen Masiixiyada? waxaa uu kujawaabay nabiga Islaamku waxaa uu ahaa mid xigmad badan waxaa uu doonay inuu uqoorgaliyo gaal walbo wareeg cadaadis ah xaga akhlaaqda si uu u dareemo cariiri, si ay umuuqato sabab uu ugu hanuuno wadada Alle iyo diinta saxiixa ah. Waxaa lawaydiyay najaasada uu kusheegay qofka aan shiiciga ahayn waxa ay tahay waxa u yiri najaasadu waa mid qarsoon ee ma ahan mid muuqato najaasadu waxay kulminaysaa (Suniga Iyo Gaalka) waxaa lawaydiiyay maxaa kadhigay Suniga iyo Masiixiga najaaso iyagoo rumaysan Allaah iyo Maalinta Akhiro?

Waxaa uu yiri laba arin midka ugu horeeya waxay beeninaysaa Nabi Maxamed[2] Arinka labaaadna waxay masiixiga utirinayaan anbiyadii Allahu Tacaalaa wax aan u qalmin sida ay kusheegeen nabi Ciise inuu ahaa mid cabbo qamriga iyo inuu ahaa mid lanacladay maxaa yeelay waxaa lasuray tiir, waxaana uu yiri si layaab leh masiixiyiintu ma aaminsana waxa aad leedahay, waxaa uu yiri adiga ma ogid in kitaabkan muqadas uu yahay aktooda ka dibna wuu aamusay anigana waxaan ku kalsoonaa ninkaan inuu ka been sheegaayay arinta danbe haba kabeensheegee midda hore mana doonayn inaan hadalka kudheereeyo ninka maxaa yeelay waxaan kabaqayay inuu kacararo aktayda maxaa yeelay aniga waxaan u qaab ekaa nin muslim ah mar walbo

[2] Dadka Nabigeena (calayhi salaatu wassalaam) ku tuhmaya beenta waa Shiicada & Kirishtanka, caqiidadooda & erayadooda & Ficiladooda Foosha xunna waxaa lagu cadeeya looguna jawaabay kutubta culimada Ahlusunna, sida. kitaabka (Sawaaciqul Muxraqa) waxaa alifay Axmed Ibnu Xajar oo ku dhintay maka sanadkii (974h) (1566m). kitaabka (Tuxfatu Ithnaa cashariyah) waxaa alifay Cabdilcasiis oo ku dhintay dalhi sanadii 1239h (1824m). kitaabka (Alnaahiya) waxaa alifay Cabdulcasiis Alfarhaarwi oo dhintay sanadkii (1239h) (1824m). kitaabka (Ta'yiidu Ahli Sunna) waxaa alifay Al'imaan Alrabaani Axmed Al-faaruuqi oo ku dhintay magaalada Sarhanda oo kamid ah Hindi sanadkii (1034h) (1624m) . kitaabka (Asxaab Alkiraam) waxaa alifay Cabdalxakiim Al-aarwaasi oo ku dhintay Ankara sanadkii (1362h)(1943m). kitaabka (Alxujaj Alqadciyah) waxaa alifay Cabdullaahi Alsuwaydi oo ku dhintay Baqdaad sandkii (1174h) (1760m). kitaabka (Almilal Wannixal) waxaa alifay Muxamed Alshahristaani oo ku dhintay Baqdaad sanadkii (548h)(1154m) .

waxaan kadheeraanayay meelaha qatarta ah.

2- Islaamku waxaa uu soomaray waqti awood iyo kala danbayn uulahaa muslimiintuna ay ahaayeen madax waxaa adkaanaysay inaad kutiraahdo dadkaas madaxda Islaamka ah waxaad tihiin adoomo noomana suura galaynin inaan kabeensheegno taariikhda Islaamka si aanan u dareensinin muslimiinta madaxtinimadoodii inay gashay meel adag iyo inay u wareegsatay meel aysan kasoo noqon Karin.

3- Waxaana ahayn kuwa aad uga walaacsan dowlada Cusmaaniyiinta iyo Iran inay soo celiyaan awoodoodii sidaa darteed ay naga fashilanto qorshaheenii ku wajahnaa qabsashada laba daasi waddan, labadaas xukumadoodna waxay ahaayeen kuwa aad u taagdaran.

4- Waxaanu ahayn kuwa aad uga walwalsan culimada Islaamka gaar ahaan culumada Istanbuul, Azhar, Ciraq iyo Shaam waxay ahaayeen kuwa naga hortaagan ujeedoyinkena waxay culimadaasi shacabka ku hogaaminaayeen wadada xaqqa ah ee uu qur'aanku sheegay in janada lagu gaarayo waxa ay oga digayeen dhal dhalaalka aduunyada ee dhamaanaysa, waxa ay sheegeen in ay yihin kuwa aan ka gaabinayn ujeedooyinkooda diimeed hal tin wax u dhigma oo kale, shacabkuna waxa uu ahaa kuwa raacsan culimadooda xitaa madaxwaynuhu waxaa uu ahaa mid kadanbeeyo culumada. Hadaba muslimiintu waxay u qaybsameen laba qaybood oo kala ah Sunni iyo Shiica, sunigu inta badan kama madax dhigan jirin culimadooda maxaa yeelay culimadooda waxay ku mashquulsanayen darasaaynta diinta Islamka sidaa darteed madaxtinimada waxay kadhaxaysay madaxweynaha iyo muftiga islaamka, shiicaduna waxay kamadax dhigan jireen culimadooda oo kaliya madax weynahooduna waxaa uu ahaa mid magac uyeel ah, dhab ahaantii waxaanu qabanay shirar fara badan hasa ahaatee mar waliba kuma aanan guulaysan

ujeedooyinkeena, waxaa ay ahayd war bixinta nooga imaanayso sirdoonkeena iyo shaqalaheena mid aanan nafarax galin shirkasto oo aan qabano wax natiijo ah kama anan gaaraynin hase ahaatee kama aanan quusan in aan ku adkaysanayno hadafkeena sidii aan u meel marin lahayn, waxan qabanay shir ey kasoo qayb galeen wasiirada iyo baadariyaasha kuwooda ugu waawayn waxaa kaloo kasoo qayb galay aqoon yahaniin waxana ka koobnayn labaatan qof, shirkaasi waxaa uu nagu qaatay muddo kabadan saddex sacadood waxaana soo gabagabaynay anagoo wax guul ah oo lataaban karo aanan kagaarin, hase ahaate baadariyiintii baadari kamid ah ayaa waxa uu yiri ha walwalina! Masiixiyadu xukunka waxa ay lawareegi doontaa saddex boqol oo sano kadib, saddex boqol ee sano gudahooda waxaa dhici doono barakac boob iyo dilal markaas waxaa laga yaabaa in Ciise uu soo eego oo uu noogu deeqo baabi'inta gaalada {Muslimka} oo kasifeeyo xarumahooda.

Saddex boqol oo sano kadib Allaha kadhigee waxaa waajib inagu ah in aan isku hubayno iimaan qote dheer iyo dulqaad waa inaan adeegsanaa dhamaan wadooyinka lagu gaari karo lawareegista maamulka iyo fidinta Masiixiyada ummada Islaamka dhexdooda haba nagu qaadato qarniyaal fara badan maxaa yeelay aabo yaashu waxa ay beeraan wiilal waxaa shir lagu qabtay xarunta wasaarada gumaysiga waxaa kasoo qayb galay wakiilo ka kala socda Faransiiska, Ruushka iyo Ingiriiska sidoo kale waxaa kasoo qayb galay diblumaasiyiin iyo baadariyasha diinta, shirkaas waxaa lagu soo bandhigay dhibaatooyinka Islaamka dhexyaalo waxa kale oo lagu soo bandhigay qorshayaalkii lagu burburin lahaa Islaamka iyo sida looga siibi lahaa caqiidadooda islaamiga ah loogana celin lahaa horumarka iimaaniga ah si uu uga laabto wadanka Isbayn islaanimada qarniyal kadib markay muslimiinta qabsadeen hase ahaate guulihii shirkaas kasoo

baxay ma gaarsiisanayn heerkii larabay anigana waxaan qoraayay had iyo jeer qodobadii shirka lagu falan qaynaayay waxaana ku qoraayay kitaabka layiraahdo (Malakuutul Masiix).

Si kastaba ha ahaatee waxaa aad u adkayd in si dhaqso leh xididada an uga siibno geed wayn oo ay xididadiisu u dhadhaceen dhulka hoostiisa hase yeeshee Islaamka waxaa waajib ku ah inuu dhibaatooyinka u dhabar adeego maxaa yeelay Masiixiyadu uma imaanin ilaa inay fiddo mooyee taasina waa mid uu ugu yaboohay Ciise, Muxamedna Calayhi Salaam waxaa taageeraayey mar xalad adag oo kajirtay bariga iyo galbeedka marxaladdaa adag hadii ay dhamaato waxaa raacaya oo ku dhamaanaya halaaga (halaaguna waxa uu uga jeedaa Islaamka), nasiib wanaag arintii waxa ay noqotay mid isbadeshay, iskudaygeeduna waxa uu noqdey mid guulaystey waxaana hoos u dhacay muslimiinta waxaana kor u kacay awoodii Masiixiyada waqtigiina waa uu soo dhawaaday waxaana ku faraxsanahay in aan soo ceshano wixii aan waysaneen qarniyo aad ufara badan taas oo ah in aan aas aasno dowlad aad u xoog badan dowladaas oo ah dawlad Ingiriiska oo ay hoggaanka u hayaan halgamayaasha wasaarada gumaysiga.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA LABAAD

Wasaarda gumaysigu ayaa waxa ay iidirtay sanadkii Hijriga marka uu ahaa 1122 Hijriga oo ku beegan 1710 Miilaadiga wadamada Masar, ciraaq, Xijaas iyo Istanbuul si'aan uga soo uruuriyo xog dhamaystiran oo ku saabsan sidii loo burburin lahaa muslimiinta sidoo kale wasaarada waxa ay igu dartay sagaal qof oo firfircoon si ay ula wareegaan xukuumada qeybaheeda kala duwan iyo dhulka muslimiinta,wasaaradu waxay noogu deeqdey hanti nagu filan, warbixin laga maarmaan ah, khariirado, magacyada madaxweenayaasha, culimada iyo kaaba qabiilada, mana aanan hilmaamin xoghayihii wasaarada markii uu nagu sagootiyay isaga oo ku hadlaya afka Masiix waxa uu yiri (guushiinu waxa ay u soo noqonaysaa mustaqbalka wadamadiina sidaa daraateed ku dadaala in aad guul ka gaartaan qorshihiina).

Badda ayaan ku safray aniga oo u sii jeeda xarumihii Islaamka ujeedadeeydu waxa ay ahayd in aan barto luuqada Turkiga oo aan ugu hadlo si wanaagsan, horay waxa aan usoo bartay inta aan ku sugnaa magaalda Londan sedex luuqadood oo kala ah (Turkiga, Carabiga iyo luuqada Faarisiga) hasa ahaatee waxa muhiim ah qofku in uu ku hadlikaro wadanka uu ku noolyahay luuqada looga hadlo sidaa darteed waxa aan isku taxalujiyay in aan u barto luuqadaha si qoto dheer si'aan la iga shakin inkasta oo dhankaas aanan ka qabin waxa walaac ah, maxaa yeelay musliimiintu waxay ahaayeen kuwo saamixitaan badan oo qalbigoodu yahay nadiif malahooduna uu yahay mid wanaagsan sida uu nabigoodu Calayhi Salaam uu baray akhlaaqda wanaagsan shakigoodu ma'ahan shakigeena oo kale, dhanka kale xukuumada Turkigu ma aysan ahayn mid hanata ururada si ay u ogaato sirdoonadeena iyo shaqaalaheena.

Safar dheer kadib waxa aan gaaray magaalada Istaanbuul waxaan bilaabay in aan aado masaajidka oo ah meesha ay muslimiinta ku kulmaan kuna cibaadaystaan waxa aan layaabay qaab dhismeedyada nadaafadooda iyo cibaadadooda waxa aan kula sheekeystay maxaan ula dagaalamaynaa dadkaan maxaan uga shaqeyneynaa burburintooda iyo dabargoynta barwaaqada ay ku jiraan? Arrintaan ma waxa na amray Masiix? Hase yeeshee si degdeg ah ayaan ugu laabtay fikirkaan iyo isla sheekeysiga sheydhaanka waxaan qaatay go'aankii aan ku socday halkaas waxa aan kula kulmay caalim da'wayn oo magaciisu yahay Axmed Afandi waxa uu ahaa nin aad uwanaagsan oo qalbi furan oo khayrka jecel mana arag nin lamid ah ragga diinta sheegta ee baadariyaasha ninkaas waxa uu ahaa mid isku ekeysiiya nabi Muxamed *Calayhi Salaatu Wassalaam* aad buu uwayneyn jiray markasta oo uu igu soo hadalqaado ama uu iga sheekeenaya nabi Muxamed indhihiisa ayaa ilmo ka shubmi jireen, balse nasiib wanaag ima uusan waydiin jiriin qofka aan ahay iyo meesha aan kasoo jeedo mar kasta wuxuu iiga jawaabi jiray wixii aan waydiiyo maxaa yeelay aad ayuu ii ixtiraamayay waayo waxa uu ogaaday in aan ahay marti uyimid wadankooda in aan kashaqaysto wadankooda waxaana doortay in aan lanoolaado shiikhaan matalaya nabi Muxamad *Calayhi Salaatu Wassalaam.*

Tani waxaay xujo u ahayd in aan siijoogo magaalada Istanbuul shiikha ayaan waxaan ku iri waxaan ahay nin dhalin yaro ah aabahay iyo hooyadayna waa ay dhinteen wax walaalo ahna malihi wax hanti ahna igama tagin waxaan go'aansaday in aan shaqaysto qur'aanka iyo culuumta Islaamkana barto waxaan imid xarunta Islaamka si'aan uxasiliyo diinta, shiikhii ayaa si'aad ah iisoo dhaweeyay waxa uuna yiri: waxaa nagu waajib ah inaan ku ixtiraamno dhoowr qodob dartood

1- Waxaad tahay nin muslima muslimiintuna waa walaalo.

2- Waxaad tahay nin marti ah rasuulkuna waxa uu yiri: (Martida Karaameeya) oo macnaheedu yahay martida karaameeya.

3- Waxaa tahay nin arday ah oo cilmi doon ah Islaamkuna waxa uu doonayaa in la karaameeyo qofka diinta baranaya.

4- Waxaa tahay nin doonaya shaqo xadiis ayaa wuxuu oranayaa (Qofka Shaqeysta Allahu Tacaalaa Waa Jecelyahay), waxa aan aad ula yaabay qodobadaan uu shiikhu ii sheegay waxaan naftayda ku iri war shalaytadaydee diinta Masiixiyaddu may lahaato xikmadan oo kale waxaanse aad uga xumaaday diinta Masiixiyaddu inaysan lahayn xikmadaan oo kale hase ahaatee waxaa aan aad ula yaabay wanaaga iyo sharafta uu leeyahay Islaamku iyo sida uu u dayacmay gacmo dad jaahiliin ah shiikhii baa waxa aan ku iri: waxa aan doonayaa inaad ibartid qur'aanka shiikhii aad buu u soo dhaweeyay arinkaa waxa uu ii bilaabay suuratul Faatixa mar waliba marka uu qur'aanka ibarayo waa uu soo weeso qaadanjiray anigana waxa uu I amri jiray in aan soo weeso qaato waxa aanu ujeesan jirnay dhanka qiblada waxa uu ii fasirijiray qur'aanka macnihiisa mar marka qaarkood waxaa igu adkaan jirtay ku dhawaaqidda erayo ka mida qur'aanka sikastaba ha ahaatee qur'aankii waxa aan ku dhameeyey laba sano, waxaa xusuus mudan in laga sheekeyo muslimiintu sida ay u wayso qaatan waxa ay dhaqaan xubnaha qayb kamida mar ka hore waxaay dhaqaan wajiga marka labaadna waxay dhaqaan gacanta midigta ah laga bilaabo faraha ilaa iyo xusulka marka sadexaad waxa ay dhaqaan gacan bidix laga bilaabo faraha ilaa suxulka marka afaraad waxa ay masaxaan madaxa iyo dhagaha marka shanaad waxa ay dhaqaan lugaha.

Waxaan aad uga walwalay muslimiintu sida ay u isticmaalaan cadayga, cadayguna waa laan yar oo ay ku

nadiifiyaan afkooda iyo ilkahooda,mar marka qaarna afka ayey dhiig ka keentaa waxaana ku qasbanaaday inan istic maalo cadayga maxaa yeelay waxay aamin sanyihiin suno adag nabigooda Muxamadna *Calayhi Salaatu Wassalaam* amray, waxa ayna ku sheegaan fadli wayn, dhab ahaantii markaan ku cadaysadaba ilkahaa idhiiga lakiin wax yar kadib wuu i joogsadaa afkaygan wax qurun ah kuma harin balse waxaa aad usoo ura Ingiriiska afkooda.

Mudadii aan joogay Istanbuul waxaan la joogay ama lanoolaa qaadimka masjidka layiraahdo (Masjidul Liqaa) wuxuu ahaa nin dabeecad wanaagsan magaciisana waxaa la yiraahaa Marwaan Afandi wuxuu la magac yahay saxaabadii rasuulka *Calayhi salaatu wassalaam*, wuxuuna ahaa mid kamida magacyada barakaysan waxaa uuna idhihi jiray haddii wiil laguu dhalo waxaad ku magacawdaa Marwaan maxaa yeelay Marwaan waxa uu ka mid ahaa raggii diinta Islaamka usoo halgamay waxaan ahaa mid ku nool khaadimka agtiisa waxa uuna ahaa mid ii soo diyaariya cuntada gaar ahaan maalinta jimcada(ciidda muslimiinta), ma aanan aadayn shaqada maalinka jimcada, maalmaha kalena waxaan aadi jiray shaqada oo ahayd farayaamiiste waxaana shaqayn jiray subixii waxaana uu isiinjiray intaan shaqaystay hal meelood barkii markii loo eego shaqaalahiisa.

Waxa uuna ahaa magaciisu Khaalid waxa uuna ahaa mid akhrista qisooyinka Khaalid Binu Waliid xilliyada uu firaaqada haysto, Khaalid waxa uu ahaa halyaygii muslimiinta xilligii saxaabada, waxaa murjin jirtay xilkaqaadistii Cumar Binu Khadaab uu ku sameeyay Khaalid[3] waxa uu ahaa mid dabeecad xun wuxuuna ahaa mid igu kalsoon maxaa yeelay kama horimaan jirin amaradiisa waxa uu ahaa mid yimaada salaada Jimcada maalmaha

[3] In guulo Badan uu gaaro Abuu Cubayda Binu Jarraax oo lagu badalay Khaalid Binu-Waliid waxay tusaalo u tahay in sababta guushu aysan ahayn khaalid ee ay tahay kaalmaha Allahu Tacaalaa oo kaliya.

kalane run ahaantii ma hubo inuu tukan jirin, waxaan ahaa mid ka cuna tukaankiisa cuntada ka dibna waxaan ahaa mid aada masaajidka, waxaan joogi jiray masaajidka ilaa waqtiga salaada casar kadib kadibna waxa aan aadi jiray guriga Sheekh Axmed waxaan la joogi jiray mudo laba saacadood ah kana baranjiray qur'aanka, luuqada Turkiga iyo Carabiga maalin kasta oo Jimca ah waxaan siin jiray lacag maxaa yeelay waxa uu ibari jiray waxbarashada tan ugu fiican waxa uuna ahaa mid aan ka gaabin dadaalkiisa barida uu ibaraayo qur'aanka iyo diinta.

Waxaa kaloo si'aad ah iibari jiray labada luuqadood Carabiga iyo Turkiga markuu ogaaday Sheekh Axmed in aan ahay guur doon waxa uu iga dalbaday inuu igu daro gabdhihiisa mid ka mid ah hasa ahaatee waan ka diiday arintaa maxaa yeelay ma'anan haysanin waxa ay ragu haystaan mana ahayn mid u muujiyay Sheekha arintaas waxa ay ku dhawaatay in uu xiriirkeenu go'o waxuuna Sheekhu yiri guurku waa sunno rasuul, rasuulku waxa uu yiri "Sunadeyda Qofkii Kataga Umadeyda Kama Mid Aha" markaas ayaan Sheekha u sheegay cudurkii (beenta ahaa) wuuna ku qancay Sheekha arinaas waxaana soo laabtay xiriirkii naga dhexeeyay aniga iyo Sheekha.

Markay ii dhamaystirantay laba sanadood joogistii aan joogay Istanbuul waxa aan ka codsaday Sheekh Axmed in aan ku laabto wadankeygii hase ahaatee Sheekha iima uusan idmin aritaas maxaad ulaabanaysaa? maxaa yeelay Istanbuul waxa aad ka helaysaa waxay naftu jeceshahay indhahuhuna ay ku macaan sadaan, Allahu Tacaalaana waxa uu Istanbuul iskugu daray diin iyo aduunyaba, magaalda Istanbuul waxa uuna raaciyay Sheekha soo ma aadan oran aabahay iyo hooyaday waa ay dhinteen walaalna malihi ee ka dhigo wadankaaga halkan (Istanbuul) waxa uuna ahaa Sheekha mid igu qasba in aan jooga Istanbuul

waajibka isaarnaa ayaa ahaa mid igu qasba in aan ku laabto wadankayga si'aan ugudbiyo warar ku saabsan caasimada Khilaafada muslimiinta iyo si'aan usoo qaato amarro cusub oo ku saabsan shaqadayda waxa ay noqotay in aan ku nagaado Istanbuul wakhti dheer bilkastana waxaan ugudbin jiray warbixino ku saabsan xaaladayda, horumarkayga wasaarada gumaysiga, waxa aan xusuustaa maalin aan ugudbiyay su'aal ahayd inuu iga dalbaday saaxiib aan isku meel kashaqayn jirnay (Ragga oo Dabada Loga Tago) oo macnaheedu yahay inay ay isku tagaan laba rag waxa ay wasaaradu iigu soo jawaabtay in aan sameeyo arintaa hadii ay igaarsiinayso danta aan leeyahay maalintii uu isagootinayay Sheekhii ayuu ooyay oo waxaana uu yiri Illaahaybaa kula jira wiilkaygiyaw hadad ku soo laabatid Istanbuul aniga oo dhintay oo aad isoo xasuusato qabrigayga waxaad ku aqrisaa suurada (Faatixada) waxaan ku kulmidoonaa maalinta khiyamaha nabiga aktiisa laakiin aniga dhab ahaantii waa isaamaysay waxay iisaamaysay saameen aad uwayn waxaana iga qubatay ilmo farabadan, waajibka iga saarnaa wadan kayga ayaa ka wayn wax kasta.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA SADEXAAD

Sagaalkii nin iyo anigaba wasaarada ayaa waxa ay amar nagu siisay in aan dib ugu soo laabano magaalada Landan hasa ahaa tee waxaa soo laabtay lix qofood oo kaliya afartii kalena mid ayaa islaamay waxana uu dagay wadanka Masar sida uu noogu war bixiyo xog hayihii, hase ahaatee waxa uu ka muu jiyay wanaag maxaa yeelay ma uusan fashilin sirtii.

Wasaaradda ayaa inoo yeertay afarta nin si nalooga dhagaysto warbixinno ku saabsan shaqadii naloo diray, waxaa kasoo qaybgalay shirka dhammaan xubnaha wasaaradda iyo dadwayne fara badan, saaxiibaday waxa ay soo gudbiyeen warbixintoodi, anigu waxaan soo gudbiyay warbixintii aan hayay, warbixintayda waxaa aad ula dhacay dadwaynihii kasoo qayb galay shirka hase ahaatee waxaan galay kaalinta saddexaad, waxaa kaalimaha kowaad iyo labaad ka galay (Jorge Balkuud Iyo Henry Fanas) shirkii dhab ahaantii wax aan ku guulaystay barashada luuqadda Carabiga, Turkiga kitaabka qur'aanka iyo shareecada Islaamka, hase yeeshee kama dhawrsan in aan soo gudbiyo warbixino ku saabsan taag darrida ka jirta dawladda Cusmaaniyiinta kadib markii uusoo gaba gaboobay shirka oo qaatay muddo lix saacadood ah ayaa waxa aan dib u eegay taag darrida Cusmaaniyiinta, xoghayaha ayaan waxa aan ku iri ujeeda daydu waxa ay ahayd barashada luuqada qur'aanka iyo shareecada sidaas darteed waqti badan kuma bixin wax kale,balse safarka soo socda ayaan warbixin aad ku qanacdaan idin siindoonaa, xoghayah ayaa waxa uu yiri waxan shaki kajirin in aad guulaysanaysid.

Waxaan kuu rajaynayaa guul waxaad awooda saartaa labo waxyaalood:

1- İn aad heshid meelaha ay muslimiintu ka liitaan si'aan udhexgalno una kala daadino awoodooda waana qodobka

kaliya ee aan kaga guulaysankarno cadowgeena.

2- Waa in aad ka shaqaysaa arintaas si toos ah markaad heshana waa in aad awooda saartaa waa in aad muslimiinta dhexdooda cadaawad iyo is nacayb ka dhex abuurtaa markaa ayaan ku kalsoonaan doonaa in aad tahay ninka ugu sareeya shaqaalaheena waxa mudan doontaa billada wasaarada, waxa aad ku soo noqondoontaa magaalada Landan ee aad joogi jirtay lix bil kadib waxa aad guursan doontaa ina adeertay (Mariya Shawaa) waqtigaa waxa aan ahaa 22 jir gabadhuna waxa ay jirtay 23 sano waxa ay ahayd gabar caqli badan, qurux badan, aqoonteedu waxa ay ahayd mid dhexdhexaad ah.

Nolasheedu waxa ay ugu macaan badnayd mudadii gaabneyd ee aan lanoolaa gabadhaas, waa ay uuraysatay, dhab ahaantii waxa aan sugayay martinimo cusub sababtoo ah waxa aan filayay in la idiri doona islamarkiiba wasaarada ayaa waxa ay amar igu siisay in aan aado wadanka Ciraaq dhab ahaantii waan ka xumaaday awaamirtaas waayo waxa aan sugayay in aan arko ilmo aan dhalay hasa ahaatee uma jixin jixin sababta oo ah waxa aan mudnaanta siinayay jiritaanka dalkeyga.

Waxa aan jeclaa inaan ka dhexmuuqdo saaxiibaday kana sareeyo sidaa darteed wax hadal ah kama soo celin amaradii la'isiiyay iyada oo ay jirto jacaylka aan u hayo xaaskeyga iyo aniga oo quudareynayo in aan arko ilmo aan dhalay.

Maalintii aan katagayay waan ooyay iyaduna waa ay ooyday waxa ay igu tiri hakadaalin in aad waraaqaha iisoo dirto anigana sidoo kale ayaan kuugu soodiri doonaa kii noloshaydii ahaayoow oraahdaan ayaa qalbigayga aad udhalaalisay kalimadaa darteed marbaan waxaan ku fikiray in aan iska joogo hasa ahaatee waxaan hantiyey naftayda waxaan qaatay go'aan waayo wax walba waxaa igala qaalisanaa badbaadinta dalkayga waxa aan aadey wasaarada

si’aan u ogaado waxa ay iigu yeertay iyo meelaha la’iidiri doono, wasaaraddu waxa ay amara igu siisay inaan aado wadanka Ciraaq si kastaba ha ahaatee lix bilood kadib waxa aan aaday wadanka Ciraaq waxa aan tagay magaalada Basra waayo waxaa daganaa qaraabadayda waxaa kale oo deganaa muslimiin isugu jirta Sunni iyo Shiico oo ka kooban Carab iyo Iiraaniyiin waxaa kale oo dagan qayb yar oo Kirishtaan ah waana markii ugu horaysay oo aan la kulmo Shiico iyo dad Faarisiin ah, haddii aan ka hadlo farqiga u dhexeeya Shiicada iyo Sunniga, shiicadu waxa ay sheeganaysaa in ay ku abtirsato **Cali Binu Abii Dhaalib** radiyallaahu canhu Cali waxa uu xidid la’ahaa (nabi Muxamed *Calayhi Salaatu Wassalaam* waxa uu qabay **Faadumo Bintu Rasuul** radiyallaahu canhaa, dhanka kale waa nabiga ina adeerkiis,rasuulkooda Muxamed ah Calayhi Salaam ayaa sheegay in uu khaliif noqondoono markii uu dhinto kadib waxa uu yiri: (Cali iyo wiilashiisu kow iyo tobanka ah ninba ninka ka danbeeya ayaa khaliifada la wareegi doona), sidaa darteed waxa aan umalaynayaa xaqqu in uu la jiro Shiicada maadaama ay madax kadhigteen **Cali** iyo labadiisa wiil oo kala ah **Xasan** iyo **Xuseen**.

Taariikhda Islaamku waxa ay cadaynaysaa inta aan ka ognahay, Cali in uu ahaa nin leh tilmaamo aad u sareeya oo uu qaali ah oo ku mutaystay madaxtinimada,lamana fududeysan karo nabi Muxamed in uu yiri: (Xasan iyo Xuseen waa laba imaam) arintaasna ahlu sunnuhu ma diidana hase ahaatee waxa aan ka shakiyay hadalkii nabi Muxamed ee ahaa wiilasha uu dhalay Xuseen ee 9ka ah Islaamka ay madax u noqon doonaan waa yaabe sidee buu u ogaaday Muxamed waxyaabo mustaqbal ah oo aan la gaarin maxaa yeelay Muxamed waxa uu dhintay Xuseen oo ah ilmo yar sidee buu ku ogaaday in uu Xuseen dhalidoono 9 wiil waa laga yaabaa in uu ogaado haddii uu ahaan lahaa nabi oo

Allahu Tacaalaa ayaa u warami lahaa sida Masiix oo kale balse waxa aan ka shakisanahay nabinimadiisa maxaa yeelay anigu waxa aan ahay kirishtaan.

Muslimiintu waxa ay leeyihiin astaamaha lagu garanayo Muxamed *Calayhi Salaam* in uu nabi yahay waxa ay u badan yihiin waxaa ka mid ah qur'aanka kariimka ah hase ahaatee anigu waxaan akhriyay qur'aanka wax nabinimadiisa itusinayana kama helin, balse waxa uusan shakki ku jirin in uu qur'aanku yahay mid wanaagsan waana mid ka sareeya Towraad iyo Injiil waxaa ku qoran dastuur, maamul, dhaqamo aad u wanaagsan iyo waxyaabo kale.

Anigu waxa aan aad ugu wareersanahay xaaladda Muxamed ruux aan wax akhrin waxna qorin sideebuu ula imaan karaa kitaabkaan oo kale dhab ahaantii waa nin aad u dhaqan wanaagsan aad u caqli badan taariikhdana laguma sheegin labadaan sifo nin kulansaday,balse maku filantahay arrintaan in ay calaamad u noqoto nabinimadiisa?

Dhab ahaantii waxa aan baaritaan ku sameeyay arrintaan si aan u ogaado xaqiiqadeeda maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa aan su'aal ka waydiiyay arrintaan mid ka mida baadariyada ku nool magaalada Landan jawaab aan ku qancana ima siin waxa uu ku hadlay hadal qabyaalad iyo dafiraad ay ku jirto, sidoo kale waxa aan su'aalo ka waydiiyay shiikh Axmed Afandi mudadii aan joogay wadanka Turkiga jawaab aan ku qancana iima sheegin hase ahaatee awood uma aanan lahayn in aan shiikha si qayaxan wax uga waydiiyo arrintaan maxaa yeelay waxa aan ka cabsanayay in uu ogaado arrintayda ama uu iga shakkiyo,sikastaba ha ahaatee anigu waan qadarinayaa Muxamed shakina kuma jiro in uu ka mid yahay nabiyada Allahu Tacaalaa ee kutubta lagu sheegay, hase ahaatee anigu waxaan ahay Kiristaan sidaa darteed kuma qanacsani nabinimadiisa.

Sikastaba ha ahaatee waxaa dhab ah in nabi Muxammed Calayhi Salaam ka sareeyo nin kasta oo caqli iyo garaadba leh Ahlu sunnuhu waxa ay leeyihiin: muslimiintu waxaa ay maslaxad u arkeen in khilaafada uu qabto **Abuu Bakar** kadibna **Cumar** kadibna **Cusmaan** kadibna **Calina** uu noqdo ninka 4aad, sidaa darteed ahlu sunnuhu waxa ay jabiyeen amarkii rasuulka maxaa yeelay waxa ay madax ka dhigteen Abuu Bakar, Cumar iyo Cusmaan Cali oo jooga, sidaas ayay isku khilaafsanyihiin Shiicada iyo Sunnigu, balse khilaafku waa mid dabiici ah oo dhex yaala dhammaan diimaha Kirishtaankuna sidaan oo kale ayuu isku khilaafsan yahay.

Cali waa dhintay Cumarna waa uu dhintay sidaa darteed muslimiinta waxaa waajib ku ah in ay ka tashadaan aayahooda kana gudbaan khilaafaadka oo ay midoobaan[4] mar ayaa waxa aan u sheegay madaxdayda wasaaradda qayb ka mid ah khilaafka u dhexeeya Sunniga iyo Shiicada waxa aan ku iri: hadii ay fahmi lahaayeen hor marka nolasha iyo midnimadu wanaaga ay lee dahay waxa ay tahay wa ay ka tanaasuli lahaayeen dhammaan khilaafaadka u dhexeeya madaxdii wasaaradda ayaa iyiri jooji erayadaas.

Waxaa waajib kugu ah in aad kordhisid khilaafkooda ee ma'ahan in aad isku daydid midaynta muslimiinta, munaasabada tan qudheeda ayaa xoghayuhu waxaa uu yiri:

---

[4] In laga hadlo arinta khilaafada waxay ka mid tahay usuusha Shiicada, marka wax dan ah kamalaha suniyiintu. wiilka Ingiriisku wuxuu isku khalday cilmiga diinta iyo kan dunawiga,Muslimiintuna sida uu asaguba yiri waxay ogaadeen waxyaabo badan ayagoo raacaya caqliga iyo tijaabooyinka dhanka sayniska iyo tignoolajiyada iyo xisaabta, dismaha & caafimaadka waxayna ka sameeyeen horumar dhan walba ah. kirishtankuse waxay yiraahdeen in caqliga iyo tijaabooyinka loo cuskado dhanka sayniska iyo cilmi barista waa danbi diini ah. tusaala ahana caalimkii falaga ee talyaaniga ahaa lana oran jiray Giliilyoo markii uu kaqaatay culimadi islaamka in dhulku yahay sida kubada uuna wareego, wuxuu isku dayay in uu ugudbiyo kirishtaanka waxay baadariyaashii ku qaadeen weerar adag waana laxiray ilaa uu ka laabtay aragtidii, sidaas awged waxay marwalba badaleen Masiixigu diintii si ay ula jaanqaado caqligooda. laakiin muslimku wuu kalasaaray wixii aduun ah waxaa aasaas u ah caqliga iyo tijaabooyinka cilmiga wixii diin ahna waxaan saldhig u ah qur'aanka kariimka iyo axaadiista nabigeena (Calayhi Salaatu Wassalaam). oo wax saamayn ah iskuma yeelanayaan.

kulamadii aan la qaatay mid ka mida Hanfariyoow waxa aad ogaataa doodaha iyo khilaafaadka in uu yahay mid dabiici ah binu aadamka dhexdiisa laga soo bilaabo markii uu Allahu Tacaalaa abuuray **Haabiil** iyo **Qaabiil** waana uu baaqi ahaandoonaa inta uu Masiix ka soo laabanayo xagga cirka waxa uu khilaafku ka dhex jiraa xagga midabka,qabiilada, gobolada iyo diimaha.

Ujeedooyinka socdaalkaagu waxa weeye sidii aad usoo ogaan lahayd khilaafyada u dhexeeya muslimiinta.

Wasaaraddu waxa ay ii xilsaartay sidii aan uheli lahaa xogta rasmiga ah ee ku saabsan khilaafaadka muslimiinta, hadii ay kuu suurta gasho in aad ka abuurto muslimiinta dhexdooda khilaaf waxaad noqondoontaa ninka ugu sarreeya ee u shaqeeya wadanka Biritan.

Inagu waxa aynu nahay dad Ingiriis ah mana noo suurtoobayso in aan ku noo laano nolol barwaaqo ah in aan dawladaha caalamka iyo gumaystayaasha kale qalalaase iyo khilaaf ka dhex abuurno mooyaane, sidoo kale manoo suurta galayso in aan bur burino dawlada Cusmaaniyiinta in aan madaxdooda iska horkeeno mooyaane hadii kale sideebay ugu suura galaysaa ummad yari in ay qabsato ummad badan sidaa darteed waa in aad ku dadaashid sidii aad u heli lahayd godkii aad ka gali lahayd arrinta khilaaf abuuridda waxa aad ogaataa labada maamul ee kala ah Cusmaaniyiinta iyo Faarisiinta in ay awoodoodii wiiqantay, waa in aad abaabushaa kacdoonno ka dhan ah madaxda labaad maamul haddii aad khilaaf ka abuurto awoodoodan aad kala furfurto waxaa noo suura galaysa in aan u tirtirno si fudud.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA AFARAAD

Markii aan gaaray magaalada Basra waxaan tagay mid ka mida masaajidada magaalada Basra waxaa masaajidka imaam ka ahaa shiikh sunni ah oo magiciisa la yiraahdo Sheekh Cumar,asal ahaana kasoo jeeda carab, waa aan is baranay waana isku bihin bihiyay balse waa uu iga shakiyey markii ugu horaysayba waxa uu bilaabay in uu ogaado meesha aan kasoo jeedo iyo dhammaan ujeedooyinkayga, waxa aan u malaynayaa shakiga waxa dhaliyay in ay tahay laba waxyaabood oo kala ah lahjadda aan ku hadlayay iyo midabkayga hase ahaatee waa ii suurta gashay in aan ka fakado khatartaan oo waxaan sheegtay in aan ka soo jeedo degmada Igdiir ee wadanka Turkiga maxaa yeelay waxa aan ka mid ahaa ardadii shiikh Amed Afandi ee magaalada Istanbuul.

Waxa aan ahaa farsamo yaqaan u shaqeeya nin layiraahdo Khaalid, waxa aan shiikha kula hadli jiray dhawr kalimo oo ah luuqadda Turkiga shiikha ayaan ku baraarujiyay in uu waydiiyo dad meesha joogay mid ka mida luuqadda Turkiga ee aan ku hadlayo in ay tahay mid sax ah iyo in kale waxa uu ugu jawaabay waa mid sax ah waa aan ku farxay maxaa yeelay waxaan soo jiitay shiikha qalbigiisa hase ahaatee malahaygu waxa uu noqday dhaan daba gaalle maxaa yeelay waxaan ogaaday dhowr maalmood kadib in uu iiga shakisanaa inaan ahay sirdoon loo soo diray isaga oo ka socda waaliga Basra maxaa yeelay waaliga iyo shiikha waxaa ka dhexeeyay khilaaf, sikastaba ha ahaatee dantu waxa ay igu khasabtay in aan ka guuro masaajidka Sheekh Cumar oo aan u guuro magaalo leh meel la jiifto oo hoy u ah dadka socotada ah, waxa aan ka kiraystay qol ninkii aan qolka ka kiraystay waxa uu ahaa nin doqon ah waxaa uu ii diiday in aan raaxaysto subax waliba xilliga addinka hore uu dhacayo ayuu Albaabka igusoo gar garaaci jiray si'aan u

tukado salaada subax waxaa dhib igu ahayd in aan iraaho iga daa albaabka aad igu soo garaacaysid ma tukanayee sidaa darteed waxaa khasab igu noqotay in aan tukado salaada.

Waxaa kale oo igu amray markii aan salaadda tukado in aan qur'aan akhriyo inta ay qorraxdu kasoo baxayso wax aan ku iri: qur'aanka in la akhriyo waajib ma ahane maxaad iigu khasbaysaa waxa uu igu jawaabay ruuxii seexda ka hor inta aysan qorraxdu soo bixin waxa uu dadka reer Khaan u soo jiidayaa baahi iyo macaluul, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan noqotay in aan qaato amarkiisa maxaa yeelay waxa uu iigu goodiyaya hadii aan amarkiisa qaadan waayo in aan guriga uga baxo, sidaa darteed waxaa khasab igu noqtay in aan kaco adinka hore salaadana aan tukado salaadda ka dibna aan qur'aanka akhriyo inta qoraxdu kasoo baxayso.

Subaxyada qaarkood muddo hal saac ka badan ayaan qur'aanka akhrinjiray, maalin maalmaha kamida ayaa waxa uu i yiri: ninka la yiraaho (Murshid) oo ah ninka aan guriga ka kiraystay laga bilaabo maalintii aad guriga iga kiraysay waxaan la kulmay dhibaatooyin waxaana u sababaynayaa dhibaatooyinkaa doobnimadaada, doobnimaduna waxa ay kamid tahay wax yaabaha la baasaysto ee ninyohow 2 waxyaalood mid yeel in aad guursatid iyo in aad guriga ii ga baxdo waxa aan ku iri ma haysto hanti aan ku guursado hadii aan oran lahaa waxa aan ahay ciniin ama bohon waxa aan ka cabsaday in uu i yiraahdo waa lagu tijaabinayaa in aad ciniin tahay iyo in kale sidaa darteed waxa aan ku cududaartay hanti la'aan Murshid waxa uu iigu jawaabay war waxyahow iimaanka yar miyaadan akhrin Allahu Tacaalaa quraankiisa (Hadey Faqiiro Yihiina Allaah Baa Fadligiisa Ku Deeqaya) Surada:Nisa/32, dhab ahaantii arintaas aad ayay ii wareerisay waxaan ku iri sidee baan u guursadaa maal la'aan iyo hanti la'aan adigu diyaar ma u tahay inaad isiidid maal igu filan mise ma ii heli kartaa gabar aan meher iwaydiinayn Murshid

Afandi intuu inyar fakaray buu yiri war ninyahow ma fahmin hadaladaada balse labo arimood mid soo gal bisha Rajab awalkeeda inaad guursatid iyo in aad ka baxdid magaalada oo aad raadsatid meel la seexdo inta aan la gaarin labaatan iyo shan bisha Rajab. Munaasab ahaan Bilaha Islaamku sidaan bay iskugu xigaan Muxaram, Safar, Rabiicul awal, rabiicul aakhir, Jamaddul awal, Jamadul aakhir, Rajab, Shacbaan, Ramadaan, Shawaal, Dulqacda, Dulxijah, waxayna ka xisaabiyaan xiliyada ay arkaan bisha kama siyaado sodon beri kamana yaraato labaatan iyo sagaal beri, ugu dambayntii waxaan u hogaansamay amaradii Murshid Afandi waxaana shaqo ka helay nin farsamo yaqaan ah waxaana kula heshiiyay in aan ugu shaqeeyo qiimo yar uuna iga qaabilo jiifka iyo cunnada.

Bishii Rajab inta aysan dhamaan ayaan waxa u wareegay ninkii aan shaqada ka helay dukaankiisa, ninkaasi waxa uu ahaa nin wanaagsan waxuuna iiladhaqmi jiray sida ilmihiisa oo kale magaciisa waxa la oranjiray Cabdi Ridaa waxana uu ahaa nin Shiici ah oo asalkiisu yahay Faarisi oo kasoo jeeda Horasaan, mudadii aan ninkaas la joogay waxan fursad u helay in aan barto luuqada Faarisiyida waxaa isugu imaan jiray galab walba Shiicada cajamiga ah iyaga oo ka wada hadlaya arrimahooda siyaasadeed iyo mida dhaqaale waxa ay si' aad ah ugu kacsanaayeen madaxdooda sidoo kale waxa ay kasoo horjeedeen maamulkii Istanbuul, hadii uu u yimaada qof aysan garaneen si deg deg ah ayey u joojin jireen sheekada ay hayaan waxa ayna guda gali jireen hadale kale, aniga magaranayo waxa ay iigu kalsoonaadeen hase ahaatee waxa aan ogaaday in ay iimaleeyeen in aan ahay nin reer Azerbijaanah maadama aan kula hadlayey luuqada Turkiga ah, waxaana meeshaa isku baranay nin dhalinyara ah oo marwaliba dalkaan imaan jiray ninkaas dhalinyarada waxa uu ku hadlijiray sadex luuqadood oo kala ah: Carabiga,

Turkiga iyo Faarisiga waxa uu u qaab ekaa arday baranaya diinta Islaamka magaciisa waxa la oran jiray Muxamed Cabdi Wahaab waxa uuna ahaa nin aad ujecel in uu meel sare gaaro oo xanaaq badan, waxa uu durijiray kana soo horjeeday dawladii Cusmaaniyiinta, xukuumada Iraan waxaba kama sheegi jirin waxa ayna saxiibo ahaayeen Cabdi Ridaa oo ah ninka iska leh dukaanka aan ka sheqeeyo waxa ayna ku saxiibeen labadooda waxa ay ka soo horjeedeen waxna ay ka sheegi jireen dawlada Cusmaaniyiinta.

Magarankaro meesha uu ka soo bartay luuqada Faarisiga iyo sida uu u la saaxiibay Cabdi Ridaa oo ah nin Shiici ah isaga oo sheeganayo in uu yahay Ahlu Sunna balse labadaas arimood waxa lalayaabo ma ahayn maxaa yeelay magaalada Basra waxaa wada daganaa Sunni iyo Shiico, markii uu ninka Sunniga ah uu ka horyimaado nika shiicada ah waxaad moodaa in ay walaalo yihiin, mid kale magaalada dadka dagan waxa ay ku hadli jireen luuqada Carabiga iyo Farisiga in badan oo ka mid ahna waxa ay yaqaaneen luuqada Turkiga, Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu ahaa nin dhalinyara ah aadna uga fiirsada eray walba macnaha uu leeyahay waxba kama sheegi jirin mad-habka Shiicada sida ay inbadan oo ahlu Sunna ah wax uga sheegaan mad-habka Shiicada, culimada ahlu sunnada qeyb kamida waxa ay gaalaysiiyaan Shiicada waxa ayna dhahaan Shiicadu muslim ma'ahan sidoo kale Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu oran jiray afarta madhab oo ahlusunnadu kala raacsanyihiin, Allahu Tacaalaa wax daliil ah uma soo dajin wax daliil ah in mad-hab laraaco waxa uu is hilmaamsiin jiray in badan oo kamida ayaadka qur'aanka kariimka maadaama aysan jirin axaadiis Nabiga ka hadleysa in laraaco madaahiibtaas, qisada kusaabsan madaahiibta afarta ah waxa ay tahay, ahlu sunuhu hal qarni wax ka badan lagana soo bilaabo geeridii nabigooda waxaa dhexdooda kasoo baxay afar culumo

ookala ah **Abuu Xaniifa, Axmed Binu Xambal, Maalik Binu Anas iyo Muxamed Binu Idriis** ee **Shaaficiga,** madaxdooda qayb kamid ah ayaa waxa ay ku waajib yeeleen in ay garba qabsadaan afartaa mid ka mid ah shiikh kale oo ku ijtihaadi kara qur'aanka iyo sunnada ma jiro dhab ahaantii taa waxa ay noqotay mid walaac ku abuurtay fahamkooda xarrimida ijtihaadka waxa uu awood siinayaa dib u dhaca muslimiinta waxa ka faa'idaystay erayada ahlu sunnada ee khaladka ah si ay ufaafiyaan mad habkooda Shiicada maxaa yeelay markii hore waxa aad ufara badnaa dadka Sunniga ah hadana waa ay is le'egyihiin.

Ijtihaadku waxa uu hormariyaa fiqiga Islaamka waxa uu cusboonaysiiyaa fahmida sunnada iyo quraanka hadba zamanka lajoogo Fiqigu waa hub hadii aan si gaar ah loo xadidin, hubkana marba marka kadanbeeyo waa ka casri sanyahay, Fiqiga horana waxa uu ka dhigan yahay hub duugoobay markasta oo ijtihaadka la cusboonaysiiyana waxa hormara Islaamka, dhab ahaantii hadii aad adiguna leedahay hub duug ah cadowgaaguna uu leeyahay hub casri ah waxaa hubaal ah goor ay noqotaba in uu kaa adkaanayo.

Waxan filayaa ahlu sunnuhu waqti dhaw in ay baraarugi doonaan oo ay furi doonaa albaabkii ijtihaadka hadii aan taa lahelin muda yar kadib waxa yaraandona Ahlu sunnaha waxana aad u badnaandoona shiicada[5] [A'imada afarta ah caqiidadoodu waa mid xagga cibaadadana iskuma khilaafsana taasi waxa ay fududaynaysaa muslimiintu in ay midoobaan balse

[5] Culimada kala soo baxa mas'alooyinka qarsoon Xugunkooda Qur'aanka iyo Axaadiista Waxaa layiraahdaa (**Mujtahidiin**) waxayna leeyihiin shuruudo lagu faahfaahiyay kutubta waawayn. (**Se'adet-i ebediye**) iyo (**Warbixin fa'ido leh**) kitaabyadaas oo la qoray waqti hore. wixii afar boqol oo hijriah ka danbeeyay ma soo bixin nin caalim ah oo buxin kara shuruudaha mujtahidka, waxayse ka shaqaynayaan cadawka islaamku in ay abuuraan dad sheegta mujtahidnimo oo islaamka ka dumiya dhanka gudaha. culimadii mujtahidiinta ahaa ayaa horay way ugu dadaaleen in aya waxkasta oo xukun sharci ah ay ka soo saaraan quraanka iyo xadiiska ilaa qiyaamaha laga gaaraya waxayna ku qoreen kutubta ahlusunna waljamaaca.

Shiicadu waxa ay isku khilaafeen caqiidada waxa ay u kala baxeen laba iyo toban firqo waxa ay noqdeen hubduug ah macluumaadkan waxa kaga bogan kartaa kitaabka layirahdo **(Al Milal Wanixal)**] waxa uu ahaa ninkii hanka waynaa ee la oran jiray **Muxamed Cabdi Wahaab Al Najdi** waxa uu ahaa mid raaraca macnaha qur'anka kariimka iyo sunnada waxa uu ahaa mid iska horkeena ra'yiga culimadii hore, madaahibta afarta ah iyo ra'yiga asxaabta hadii uu umaleeyo inay aayada qur'aanka si khaldan ay ufahmeen ra'yigooda waxa uu katuuri jiray gadaal waxa uu dhihi jira Rasuulku waxa uu yiri (Waxaan Dhexdiina Uga Tegey Laba Culculus Oo Ah Kitaabka Quraanka Iyo Sunadeyda) mana uu san oran "Waxan idinkaga tagay kitaabka, sunnada, saxaabada iyo a'imada afarta ah"[6] sidaa darted waxa waajib ah in laraaco kitaabka iyo sunnada haba khilaafsanaadee ra'yiga madaahibta, saxaabada iyo culimada.[7] Waxa su'aalo isdhaafsaday isaga iyo sheekh caalim ah oo Shiica ah oo magaciisa layirahdo Sheekh Jawadoo ka soo jeedo magaalo layiraahdo Kumi,waxa uu yiri hadii aad aaminsantahay Cali in uu yahay mujtahid maxaa uraaci wayday sida Shiicada oo kale?

Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu yiri Cali waa Cumar oo kale iyo saxaabada, hadalkiisuna xujo manoqonayo ee xujadu waa kitaabka iyo sunnada inkasta oo saxaabada

[6] Muxamed ka Najdi wuxuu oraahdaan ku inkirayaa xaadiista sheegeysa in laraaco asxaabta nabiga.

[7] Manta jaahiliinta iyo khaa ininta ee ku nool dhamaan dalalka islaamka waxay xiran yihiin dharka lagu yaqaan culumaa udiinka markasay waxay weerarayaan culumada ahlusuna waxayna amaanayaan wahaabiyada waayo hanti aad u badan ayeey waxay kaqataan boqortooyada sucuudiga meel kastana waxay ka dhiganayaan hub iyo marmarsiiyo erayada muxamed binu cabdil wahaab ee la qurqurxiyey iyagoo ka tagaya aqwaashii asxaabta rasuulka iyo culumadii ahlusuna, dhabtuse waxay tahay erayada asxaabtiyo tan culumada afarta mad'hab in aysan khilaafsanen quraanka kariimka ah iyo axaadiista sharafta leh waxna kuma aysan darin ee iyada ayey fasireen, wahaabiyada sida ingiriiska o kale ayey muslimiinta ku dhagrayaan been abuur ay samaysteen.

hadalkooduna uu yahay xujo Nabiguna uu amray in aan raacno kii aan doono[8]

Sheekh Jawad—waxa uu yiri Rasuulku miyuusan Dhihin anigu Waxa Aan Ahay Magaaladii Cilmiga Calina Albaabkii Laga Soo Galayay?

hadaba farqi baa u dhexeeya?

Muxamed waxa uu yiri — Cali hadalkiisu hadii uu xujo yahay muxuu nabiga u oran waayay kitaabka Allahu Tacaalaa, sunnada iyo — Sheekh Jawad waxa uu yiri — haa Nabigu sidaa waa yiri- laakiin Nabigu waxa uu yiri waxan dhexdiina kaga tagay labada culculus oo kala ah Kitaabka iyo Ahlu beytka Calina ahlu beytka ayuu madax uyahay .

— Muxamed waa uu inkiray xadiiskaas hase ahaatee Sheekh Alqeymi ayaa xujadii ka helay waxa uuna ku soo oogay adillo lagu qanco.

Muxamed waa aamusay wax jawaab ahna waa uu waayay cabbaar marka uu aamusnaa waxa uu soo aruuriyay bushin (Diidmooyin) waxa uu yiri haduu rasuulku yiri kitaabka Allahu Tacaalaa iyo Ahlu beytka aaway sunnadii rasuulka?

Sheekh Jawad waxa uu yiri sunnada rasuulku waxa ay sharaxa u tahay kitaabka Allahu Tacaalaa rasuulkuna markuu yiri (Kitaabka Allahu Tacaalaa Iyo Aala Beydkeyga),waxa uu ula jeedaa kitaabka Allahu Tacaalaa iyo tafsiirkiisa oo sunnada aha Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu yiri ahlu beytka hadalkiisu miyuusan kitaabka tafsiir u ahayn maxay tahay baahida loo qaba in xadiiska lagu fasiro qur'anka kariimka?

Sheekh Jawad waxa uu yiri markii uu geeriyooday rasuulku Calayhi Salaam ayey umadii u baahatay in loo fasiro qur'aanka tafsiir ku haboon xilliga lagu jiro hadba, sidaa darteed ayaa nabiga waxa uu amray in ay ummaddu u

---

[8] Qofka muslimka ah ee arkay wajiga nabiga (Calayhi Salaatu Wassalaam) ee sharafta leh waxaa la yiraahdaa saxaabi markay badan yihiin waxaa layiraahdaa asxaab.

noqoto kitaabka iyo ahlu beydka oo ku fasirayo kitaabka hadba wacyiga jira.

Waxa aan aad ula yaabay su'aalaha ay is dhaafsadeen Shiikha iyo Muxamed Cabdi Wahaab! Waxa aan arkay Muxamed in uu noqday shimbir gacanta lagu qabtay oo kale, baadidii aan raadinayay waxa aan ka dhex helay Muxamed Cabdi Wahaab waayo waxa aan ogaaday in uu iskala weyn yahay culimadii joogtay xilligiisa ra'yigiisuna in uu ka madax banaan yahay afartii khulufo iyo madaahibta afarta ah wixii ay qur'aanka iyo sunnada ka fahmeeen.

Waxa uu aad uxaqiri jiray Saxaabada iyo culimada intaba qodobkaa isaga waxa uu ahaa qodobka kaliya ee iisuurta galiyay in aan gacanta ku dhigo ama aan ugu soo gabado naftiisa.

Waxa aan layaabay ninkaan dhalinyarada ee lagu kadiyay iyo ninkii Turkiga ahaa ee qur'aanka isoo baray kala duwananshaha u dhexeeyo, Shiikhaasi waxa uu ahaa nin aad umatala asxaabtii rasuulka Calayhi Salaam, waxa uu ahaa buur oo kale oo aysan cidna dhaafi karin.

Waxa uu heystay mad habka xanafiga ah markii uu doono in uu ka sheekeeyo Shiikhiisa **Abuu Xaniifa** ah waa uu soo waysaysan jiray, sidoo kale marka uu doono in uu qaado kitaabka **(Bukhaariga)** ah waa uu soo weyseysan jiray, kitaabkiisana waa mid ay ahlu sunnuhu aad u qadariyaan hase ahaatee Muxamed Cabdiwahaab waxa uu ahaa mid iska wayneysiiya (Abuu Xaniifa) oo waxa uu oran jiray Abuu Xaniifa aniga ayaa ka fahan badan,[9] waxa kale oo uu oran jiray kitaabka (**Bukhaariga)** ah kalabar waa baadil.[10] Waxa loo baahday cadeymahan markii laturjumayay qirashadii [Hamfari oo loo badalayay luuqada Turkiga, waxa aan ahaa bare wax ka dhiga dugsiyada sare mid kamid ah waxaa su'aal

[9] hada jaahiliinta aan mad habka lahayn wxay oranayaan sidaas oo kale
[10] oraahdiisa waxay tusaale u tahay in uusan khibrad u lahayn cilmiga xadiiska

iwaydiiyay arday waxa uu yiri macalinow qofkii dagaal lagu dilo mashahiid baa? waxaan iri haa, waxa uu yiri nabiga miyuu inoo sheegay arintaas waxan iri haa waxa uu yiri ruuxii badda ku dhinta ma shahiid baa? waxaan dhahay haa ajarkiisuna waa uu badan yahay waxa uu yiri hadii ay diyaaradi soo dhacdo ruuxii ku dhintaa ma shahiidbaa?

Waxan iri haa waxa uu yiri arintaas nabigeenu ma inoo sheegay waxan iri haa waa uu inoo sheegay waxa uu ardaygii ku yiri si ciyaari ku jirto isaga oo qoslaya macalinow xilligii nabigu noolaa ma diyaarad baa jirtay waxa aan iri wiilkeygiyow nabigeena waxa uu leeyahy 99 magac magac kasta oo ka mid ah magacyadaas waxa uu ku tusinayaa tilmaamaha nabiga ee wanaagsan mid kamid aha magacyadiisana waxa ka mid ah **jawaamicul kalim** maxaa yeelay hal erey ayaa waxa uu kuu cadeenayaa waxyaalo badan waxa kamid ah hadaladaasi, (**ruuxii meel sare kasoo dhaca waa shahiid**).

Dhab ahaantii waa uu ku qancay ardaygii, sidoo kale qur'aaka iyo axadiista nabiga waxaa laga helayaa ereyo aad ufara badan oo xambaarsan micnayaal fara badan, waxa layiraahdaa ruuxii aayaadkaas iyo axaadiistaa macna kala soo bixi karin ma jiro nin aad u cilmi badan mooyaane sidaa daraateed ahlu sunnaha waxaa ay **ijtihaadka** udiideen jaahiliina iyo dadka caamada ah, tanna loogama jeedo in la joojiyo ijtihaadka si guud ee waxa la waayay caalim oofsaday shuruudii mujtahidka, muddo afar qarni ah laga soo bilaaaba hijiradii nabiga markaas ayaa waxa la xiray albaabkii ijtihaadka si toos ah markii uu qiyaamahu soo dhawaado waxaa soo degi doono Nabi Ciise C*alayhi Salaam* waxaa soo bixi doono (Mahdigii) markaas ayey ijtihaadi doonaan, Nabiguna (Calayhi Salaatu Wassalam) waxa uu yiri (umadaydu gadaashaydu waxa ay ukala bixi doontaa todobaatan iyo saddex kooxood dhamaantoodna waa ahlunaar

hal mid ah mooyee" waxaa layiri rasuul allaw noo sheeg midaas waxa uu yiri waa "mida kudulsugan waxa aan ku dulsugannahay aniga iyo asxaabteyda) xadiis kale ayaa waxa uu ahaa sidan (asxaabteedu waa xidigaha oo kale koodii aad ku dayataan waad ku hanuunaysaan) ninkii la oran jiray Cabdulaahi Binu Saba ee Yahuudiga ahaa ayaa waxa uu ka dhex abuuray muslimiinta cadaawad asxaabta rasuulka qeyb kamid ah ayaa waxa uu ku tilmaamay gaalo ra'yigaas waxa ku kadsoomay oo qaatay Shiicada balse ahlu sunnadu waa ay ku diidaydeen oo ay jeclaadeen asxaabta rasuulka iyo sunnada nabiga *Calayhi salaatu wassalaam* waxa aan ku heshiinay], aniga iyo Muxamed Cabdi Wahaab in aan sameyno xiriir badan waxa aan mar waliba ku oran jiray oo aan u cadayn jiray in uu ka fadli badanyahay Cumar iyo Cali hadii uu rasuulku joogi lahaana adiga ayuu khilaafada kuu dooran lahaa iyaga oo jooga waxan ku oran jiray waxaan kaa codsanyaa in aad cusboonaysid Islaamka maxaa yeelay waxa aad tahay caalimka kaliya ee Islaamka gaarsiin kara caalamka waxa aan go'aansaday in aan kala hadlo sidii qur'aanka loogu fasiri lahaa afkaarteena khaaska ah oo laga leexin lahaa fasirka saxaabada,madaahibta iyo mashaa'ikhda.

Qur'aanka ayaa aayad aayad usoo qaadan lahayn waxaan ku dadaalayay sidii aan fahan wareer ugu ridi lahaa isagana waxa uu ahaa mid qaata oraahdeyda waxaa uu ku dadaali jiray sidii uu kalsoonidayda usoo jiidan lahaa, maalin maalmaha kamid ah ayaan waxaa ku iri jihaadku waajib ma'ahan,waxa uu yiri sideebuusan u ahayn waajib illaahay soo ma oran [Gaalada Lajihaada] Suratul Towba waxaan ku iri hadaba maxaa uu nabigu ula jihaadi waayay munaafiqiinta ayadoo Allahu Tacaalaa yiri (Nebi Muxamadow Ladagaalan Gaalada Iyo Munaafiqiinta) Suuratu Tawba/73, mida kale kitaabka la yirahdo [**Al Mawaahib Alladuniyah** waxa ku qoran

nabigu in uu gaalada la jihaaday labaatan iyo todoba jeer waxaan tusay seefihii uu kud dagaalami jiray oo yaala madxafka Istanbuul munaafiqiintu waxa ay ahaayeen kuwa isu tusiya in ay yihiin muslimiin nabiga (*Calayhi salaatu wassalaam*) ayey la tukan jireen maalintii nabigu waa uu garanayey mana uu san oran mid kamid ah munaafaq baa tahay hadii uu ladagaalami lahaa waxaa la oran lahaa] Muxamed Calayhi Salaam waxaa uu laayaa dadka mu'miniinta ah sidaa darteed ayuu carabka kula jihaaday, jihaadka faralka ah waxa uu ku taam noqonkaraa in naf iyo maalba lagu bixiyo.

Aayadii aan soo marnay waxa ay oranaysaa in lala jihaado gaalada iyo munaafiqiinta lama cadaynin qaabka uu jihaadku yahay, jihaadka gaalada lalagalaa waa dagaal, jihaadka munaafiqiinta lalagalaana waa wacdi iyo nasteexeeyn] Muxamed Cabdi Wahaab — waxa uu yiri nabigu carrabka ayuu kala jihaaday munaafiqiinta. — Waxaan ku iri hadaba in carrabka laga dagaalamo ayaa faral ah ee dagaalka tooska ahi faral ma'ahan waxa uu yiri — Nabigu gaalada waa uu ladagaalamay, waxaan ku iri waxa ku kalifay nabiga naftiisa ayuu difaacayey markii ay gaaladu damceen in ay dilaan, Muxamed Cabdi Wahaab madaxa ayuu ruxay oo waxa uu garowsaday hadalkeygii mar baan waxa aan ku iri — ku raaxaysiga dumarka (Mutcada) waa ay banaan tahay[11] waxa uu yiri — maya ma banaana waxan iri Allahu Tacaalaa waxa uu yiri (Naagaha Hadaad Kuraaxaysataan Siiya Uujuuradooda) Suuratu Nisaa/24, Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu yiri — raaxaysiga waxaa xarimay **Cumar Binu Khadaab** waxa uuna yiri waxa uu ku yiri mawaxaad leedahay aniga ayaa ka cilmi badan Cumar? Mida kale — Sayid Cumar waa

[11] Nikaaxa mutcadu wuxuu shabahaa ama u eg yahay xirirada saaxiibtinimo ee raga iyo dumarka aduunka ka dhexeeya ee aan sharciga ku dhisnayn wuxuu ku banan yahay shicada mad habkooda

xarimay rasuulkuna waa xalaaleeyay[12] maxaad uga tagaysaa ra'yiga qur'aanka iyo ra'yiga rasuulka oo aad uqaadanaysaa ra'yiga Cumar waa uu aamusay.

Markii aan arkay in aamusitaankiisu ay daliil utahay qancitaan, waxa aan kiciyay shahwadiisa maxaa yeelay waxa uu ahaa doob, waxa aan ku iri ma uraaxaynaa nafteena ama naag ma meher xadnaa madaxa ayuu ruxay arrintaa ayaan kaga fa'iidaystay ballan ayaan u qabtay si' aan ugu keeno gabar uu ku raaxaysto waxa aan ku ballanay arinntaas in aysan ogaan cid aan labadeyna ahayn magaciisa aanan usheegi doonin naagta aan u keeni doono. Waan baxay si degdeg ah waxa aan u tagay naago Kiristaan ah oo kasocda wasaarada gumaysiga loona soo diray in dhalinyarda muslimiinta ah ay fasahaadiyaan waxa aan ugu sheekeeyay sheekadii nadhexmartay aniga iyo Muxamed Cabdu Wahaab waxa aan u bixiyay gabadhii Safiyo waa aan balamiyay maalintii aan ballanay ayaa waxa aan ka xeeyay Muxamed Cabdi Wahaab waxa aan geeyay gurigii ay gabadhu joogtay waxa aan ugu tagnay iyada oo kaligeed ah waxa aan ku dhawaaqnay inaga iyo Muxamed siiqadii guurka oo ku kooban todobo bari, gabadhaa meherkeedu waxa uu ahaa lacag dahaba ah anigu banaanka ayaan ubaxay Safiyana gudaha ayey ku hartay waxa aan isku dayeynaa sidii aan u khiyaani lahayn Muxamed Cabdi Wahaab, kadib marki ay hanatay Muxamed Cabdi Wahaab oo ay dhadhan siisay macaanka shahwada si khilaafsan shareecda Islaamka oo aan aragnay in uu ra'yigiisu ka madax banaan yahay ra'yiga Islaamka waxa aan uqabtay sheeko dheer si'aan uga dhaadhiciyo khamradu in aysan xaaram ahayn markasta oo u

[12] warkaas oo kale lagama soo warin sayid cumar, jaajuuska ingiriiskuse wuu ka been abuurayaa cadawada uu u qabo awgeed. Waxaa ku qoran kitaabka layiraahdo (**alxujajalqadciyah**) wuxuu yiri sayid cumar "raliya lahu canhu" "nabigu wuu xarimay nikaaxa mutcada ruqsadna ma siinayo wax uu nabigu manciyey" asxaaabtuna way ku tageereen waxayna ku garab istageen oraahdii khaliifka rasuulka waxaana kamid ahaa asxaabtaas Sayidinaa Cali iyagoo dhan alle haka raali noqdee.

soo daliilsado aayada ama xadiis waxa aan uleexinaay dhankale ugu danbeyntii waxa aan ku iri khamriga waxaa cabi jiray Yazid Binu Mucaawiya iyo khilaafadii Umawiyiinta iyo Cabaasiyiinta suuragal ma tahay kuwaas dhamaantood in ay baadi ku sugan yihiin adiguna aad xaq ku sugan tahay waxa aan shaki ku jirin inay ahaayeen kuwa aad u fahansan kitaabka Allahu Tacaalaa iyo sunnada sidaa darteed khamriga waxa ay ka fahansanaayeen in ay tahay karaahiyo kitaabada Yahuuda iyo Nasaarada waxaa ku qoran in khamradu ay xalaaltahay hadaba suuragal matahay khamrada in ay diina ay xalaaleyso diina xaarameyso diimaha dhamaantood ay alle xagiisa ay ka ahaadeen.

Kuwa sheegaya in Cumar uu cabbi jiray khamriga ilaa ay kasoo dagtay (**Khamrada Miyeydan Kareebtoomeyn?**), khamradu hadii ay ahaanlahayd xaaraan Rasuulku Cumar waa uu ciqaabilahaa maa daama aan la ciqaabin Cumar khamrigu waa xalaal, [Si kastaba ha ahaatee Cumar waxaa uu ahaa mid khamriga cabba intaan la xariminin khamriga, markii la xarrimayna dib danbe ma uusan u cabbin waxaase khamriga cabbijiray qayb kamid ah madaxda Umawiyiinta iyo Cabaasiyiinta waxa ayna ahaayeen kuwa faasiqiin ah oo ku xad gubay sharciga Islaamka aayada uu sheegay jaajuusku iyo aayado kale iyo axaadiisba waxa ay cadaynayaan khamriga in uu yahay xaaraam kitaabka (**Riyaadu Naasixiin**) waxaa lagu sheegay khamrigu inuusan banaanyn bilowgii Islaamka, waxa cabbi jiray sayid Cumar, Sacad Binu Abii Waqaas iyo qayb asxaabta ka mid ah kadib waxaa soo degtay aayada 219 ee ka mida suuradda Albaqra aayadaan waxa ay cadaynaysaa khamriga oo la cabaa in ay tahay danbi wayn muddo kadib waxaa soo dagtay aayada **(Hau Dhawaanina Salaada Idinkoo Sakhraansan) Suratu Nisaa/42**, ugu danbayntii khamrada waxaa lagu xarrimay aayadda 93 ee ka mida suurtu (Al maa'ida) iyo

xadiiskii nabigeena (Calayhi Salaatu Wassaalm) oo ahaa:(Qofkii cabaa khamriga hala fariisanina haku tukanina hadii uudhinto hana u guurinina)(Qofkii khamriga caba waxa uu lamidyahay qofka caabudaya sanamka), (Ilahay Ha Nacado Khamrada Iyo Kan Caba Kan Waraabiya Kangada Kan Gata Kan Sameeya Kan Loosameeya Kan Xamaala Iyo Kan Looxamaalo Iyo Kan Lacagteeda Cunaba) (Khamrada Qofkii Caba Waxaa Uu Lamid Yahay Qof Caabuda Sanamka] [Khamradu Waxay Kamidtahay Denbiyada Waaweyn Kuwa Ugu Waaweeyn Waana Hooyada Xumaanta)(Shayga Kiisa Badan Lagu Sakhraamayo Kiisa Yarna Waa Xaaraan)].

Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu yiri Cumar binu Khadaab waxa uu isku dari jiray khamri iyo biyo kadibna waa uu cabi jiray waxa uuna dhihi jiray hadii aysan kuwaalineyn xaraan ma'ahan hadalkiisii buu sii watay waxa uu yiri Cumar waxa uu ahaa mid kusaxan arintaa maxaayeelay qur'aanka kariimka ah waxa uu leeyahay:

(Shaydaanku Waxaa Uu Doonayaa Inuu Dhexdiina Rido Cadaawad Iyo Caro Markaad Khamrada Cabtaan Ama Aad Khamaartaan Waxaa Uu Idinka Jeedinayaa Xuska Alle Iyo Salaadda) Suuratu Maa'ida/91, marka khamradu xaaraam ma'aha hadii aysan ku maan doorinayn[13], Safiyo waxa ay u sheegtay wixii dhacay waxay sugtay inuu cabay khamro adag waa ayna saameysay ka dibna waxay usheegtay in uu cabey khamri badan iyo in uu ugalmooday sidaa baa kula wareegnay inaga iyo Safiyo sheekhii.

Maxaa ka wanaag badnaa kalimadii dahabiga ahayd ee uu yiri xoghayihii (waxa aan uga soo ceshanay Isbayn gaaladii oo uu la jeedo muslimiinta khamri, zinno iyo xumaan) aan isku dayno sidii aan uga soo ceshan lahayn wadamada kale anaga oo u isticmaalayno khamriga iyo zinada. Markaa waxa aan kala

[13] Arintu waxay tahay in uu nabigu yiri (wax kasta oo manka dooriya waa xaaran wixii badnaantoodu ay maanka doorisaa yaraantoodu waa xaaran)

hadlay arimaha soonka waxaan ku iri qur'aanka waxa uu leeyahay (Inaad Soontaanbaa Idiinkhayr Badan) Baqar/184, mana dhihin soonku wajib buu idinkku yahay sidaa darteed soonku waa sunne ee waajib ma'ahan laakiin fikradii waa uu kasoo horjeestay shiikhii waxaana uu yiri (mawaxaad doonaysaa in aad iga saarto diintayda) waxan ku iri wahaabiyaw diintu waxa ay tahay in uu qalbiga saafi yahay iyo naf wanaagsan iyo dadka kale inaan lagu xadgudbin miyuusan nabigu dhihin (Diintu Waa Jacayl) Miyuusan Allahu Tacaalaa qur'aankiisa ku dhihin (Rabigaa Caabud Inta Aad Yaqiin Kaheleyso) Suuratulxijri/99[14]

Markale waxa aan ku iri salaadu waajib ma'ahan waxa uu yiri sideebaa u dheheysaa miyuusan illaahay oran (salaada u ooga xuska eebe awgiis) Dhaha/14 in Allahu Tacaalaa la xuso marka waxa ku haboon in aad Allahu Tacaalaa xusto adiga oo ku badal qaadanaaya tukashada salaada waxa uu yiri wahaabigu dadka qaarkood waxa ay ahaayeen kuwa Allahu Tacaalaa xuso waqtiyada salaada iyaga oo ku badalanaaya tukashada salaada[15] waan ku farxay hadalkiisa, waxa aan guda galay ra'yigiisa in aan ku celcelinayo ilaa aan ka hantay qalbigiisa, intaa ka dib waxa aan ogaaday in uu noqday mid aan daneyn salaada waxa uu ahaa mid tukada salaada marna ma tukanayn gaar ahaan salaada subax ma ahayn mid tukada inta badadan markaa oo aan ahaa mid lasoojeeda inta badan xilliyada habeenkii ilaa saqda dhexe waxa uu ahaa mid aan ukici karin salaada subax markaa waxa aan guda galay in aan ka soo saaro si fudud iimaanka marbaan waxa aan doonay in aan kala doodo arrimaha ku saabsan Nabiga (Calayhi Salaatu Wassalaam) waxa uu igu yiri hadii aad ka hadasho arinkaa waxa go'aya xiriirka inoo dhexeeya waxa aan ka baqay in uu

[14] Kutubta islaamka oo dhan waxay oranaysaa yaqiinta ay ayadu sheegaysaa waa geerida macnuhuna wuxuu noqonayaa rabbi caabud ilaa aad ka dhimatid)

[15] Nabigeena (calayhi salaatu wassalaam) wuxuu yiri (salaadu waa tiirka diinta qofkii oogaa dhab ahaantii dintuu ogay, qofkii ka tagaana wuxuu dumiyey diinta) (utukada sida aad aragtaan anigoo u tukanaaya) salaada oo aan loo ogin qaabka nabiga waa dambi wayn, in loo oogaana waxay calamad u tahay daahirnimada qalbiga.

burburo xiriirkii aan soo dhisayay ka dibna waan iska xiray hadalka ku saabsan nabiga, kadibna waxa aan guda galay si maskaxeysan in uu yahay nafsad ahaantiisa mid noqon karo dariiqo sadexaad aanan ahayn **Sunni** iyo **Shiico**, waxa uu ahaa mid iga ajiiba arrrinkaa maxaa yeelay waxa ka buuxa jeceylka uu qabay Safiya maxaa yeelay Safiya waxa ay ahayd shiikha qalbigiisa maalin baa waxan ku iri Shiikha ku iri marunbaa in uu nabigu ka dhigay saxaabadiisa kuwa karaama badan oo uu walaaleeyay qaarkood waxaa uu yiri haa waxaan ku iri sharciyayda Islaamka ma mid waqtiyeesanbaa mise waa mid joogta ah waxa uu yiri waa mid joogta ah maxaa yeelay nabiga ayaa waxa uu yiri: (Wixii Nebigu Xalaalteeyo Waa Xalaal Ilaa Yoomal Qiyamo, Wixii Xaarantimeeyana Waa Xaaraan Ilaa Qiyaamaha).

Waxaan aan ku iri aan walaalowna aniga iyo adiga, waan walaalownay waxa aan ahaa mid rajaynaya in timado geedkii aan abuuray miraheeda, mirahaasoo aan ku bixiyay xilligii dhalin yaranimadeyda oo dhan waxa aan bilwaliba u gudbin jiray wasaarad warbixinta iyo hadba meesha ay xaaladu marayso laga soo bilaaba markii aan kasoo baxay landan wasaaradana waa ay iisoo jawaabi jirtay iyada oo igu dhiira galinaysa howlaha aan wado Muxamed Cabdi Wahaaba waxa uu ahaa mid ku socda wadadii aan ku jeexay ujeedadeyada waxa ay ahayd in aan ku barbaariyo xoriyad iyo madax banaani iyo jawi shaki ku dhisan marwaliba waxa aan ugu bishaarayn jiray mustaqbal wanaagsan waxa aan ku aamini jiray baraarugsanaan iyo kalsooni marmarka qaarkood waxa aan u sheegi jiray riyo been ah waxa aan ku iri waxa aan xalay riyo ku arkay: (Rasuulka illaahay isaga oo kursi ku fadhiya dad culima ah ayaa hareerihiisa fadhiyay balse ruux kama garanayn kadib adiga ayaa soo galay nabiga ayaa kuu istaagay asagoo ku waynaynaya labada indhood dhexdooda ayuu kaa dhunkaday waxa uu kugu yiri adiga isku magac ayaan nahay jismigayga ayaa dhex gashay

booskeyga ayaa taagantahay xagga maamulka,arrimaha diinta iyo aduunyada waxa aad tiri Allahu Tacaalaa rasuul kiisiyaw waxa aan kaa codsanayaa in ay dadku qaataan cilmigaaga rasuulku waxa uu kugu yiri habaqin), adiga ayaa cidwaliba kasareeya ma waxaad ii sheegaysid aniguna waxa aan ugu jawaabay haa waa run ee habeensan warkeyga ilaa ay arintaas ka dhaadhacday waxa aan umalaynayaa in uu go'aansaday laga bilaabo maalintaas ayada ah in uu is muujiiyo oo dhidabada utaago mad'hab cusub iyo firqo cusub[16]

---

[16] dhab ahaantiin waxaa lagu dabacay madbacada "ofesti" kitaabka la yiraahdo (**alfajru alsaadiq**) oo horayna loogu dabacay Masar (1323 hijri) (1905 miladi) oo uu alifay (pro. Jamiil sidqii azahaawi ee ka soo jeeda Baqdaad) ee u dhashay ciraaq markuu ka dhigi jiray caqiidooyinka daarulul funuun ee ku talay istanbuul oo dhintay sanadkii (1354 hijri) (1936 miiladi) wuxuuna oranayaa (waxaa kenay fikrada khaldan ee wahaabiyada maxamed cabdi wahaab sannadkii 1150 hijriga 1737 miiladiga wuxuuna ku aas asay mandiqada najdi, wuxuuna dhashay (1111 hijri) (1699 miilaadi) wuxuuna dhintay sannadka (1207 hijri) (1792 miladi) waxaana faafiyey wahaabiyada maxamed binu sucuud oo ahaa amiirkii magaalada "dirciya " kadib markii uu daadiyey dhiig muslin oo badan waxayna u bixiyeen musliminta aaan wahaabiyada ahayn "mushrikiin"

Wahaabiyiinta, Muslimiinta waa dad nacas ah oo aan diin lahayn oo dhibaato badan, **(Kiyamet iyo Aakiret)** ayaa waqti hore lagu qoray. waxayna yiraahdeen waxay gaalo ahayeen lix boqol oo sano wayna dileen qofkasta oo aan aqbalin diinta wahaabiyada waxayna dhaceen hantidoodii I yagoo ka dhiganayaa qaniimo, nabi muxamedna waxay ku yiraahdeen erayo fool xun oo aan ku habonayn nabigeena (calayhi salaatu wassaalam), waxayna gubeen kutubtii fiqiga iyo axaadiista iyo tafaasiirta, quraankana waxay ku fariseen sida ay la noqoto aragtidooda khaldan, si ay muslimiinta u kadiyaana waxay sheegteen inay haystaan mad'habka xanbaliga, arintuse waxay tahay culumada xanbaliyada in badan oo kamid ah way radiyeen wahaabiyada waxayna ku sheggen fasaadkooda kutubtooda dhexdooda waxayna qireen inay ku gaaloobeen xaaraanta ay xalaalsadeen iyo liidida ay lidayaan nabiyada iyo awliyada Allahu Tacaalaa. diinta wahaabiyada waxaa aas aas u ah tobban qodob **1-** In jiritaanka Allahu tacaalaa uu yahay mid maadi ah oo gacmo iyo waji iyo jihooyin leh [caqidadaas waxay ka shabahaan caqidada masiixiga (Aabe, Wiil iyo Ruxul qudus ayey rumeysanyihiin sida wahaabiyiinta oo kale). **2-** Qur'aanka waxay ku fasiraan sida ay la noqoto aragtidooda gaarka ah ee khaldan **3-** In ay inkiraan asxaabtu waxay sheegeen **4-** Inay inkiraan waxay culumadu cadeeyeen **5-** In la gaalaysiiyo qofkii haystaa afarta mad hab midkood **6-** In la galaysiiyo qof kasta oo aan wahaabi ahayn **7-** Shegashada ay sheegteen qof kasta oo nabiga ku tawasula ama owliyada markuu ducaysanayo inuu gaal yahay **8-** Xarimida siyarada qabriga nabiga (Calayhi Salaatu Wassalaam) iyo qabuurta awliyada **9-** Waxay sheegteen in qofkii alle qayrkiis ku dhaarta inuu gaal yahay **10-** Waxay oranayaan qofkii ku u sharda ilahay qayrkiis ama xoolo u qala sadaqa awliyada waa gaal kitaabkaygaan baana ku cadayn doona inay caqidadoodu baadil tahay). Hadii la fiiriyo aas aaskaan tobanka ah ee diinta waahabiyada waxaa ladareemayaa inay yihiin culumadii uu u meeriyey "Hanfari" maxamed cabdi wahaab ingiriiskuna wuxuu u faahiyey qirishooyinka hanfari siduu xayeysiin ugu sameeyo kirishtanka culuumta islaankana uu u qoro qaab khaldan si uu u marin habaabaiyo dhalin yarada msulimiinta ah, anaguse waxaan u faafinaynaa kitaabkaan si aanu u saxno beenaha ay faafiyeen si loogu badbaadiyo hagar damada Ingiriiska.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA SHANAAD

Isla maalmahaas ayaa amaro waxa ay iga imaadeen magaalada landan in aan aado magaalada (**Karbala**) iyo (**Najaf**) oo ahaa xarumaha muslimiinta shiicada ah waxa aan ahaa mid ku qasban in aan kala tagno aniga iyo Muxamed Cabdi Wahaab iyo in aan fara galiyo magaalada **Basra** in kasto oo aad ugu faraxsanaa sida aan ugu guulaysto ninkii dhaqanka xumaa oo jaahilka ahaa in uu aasaaso mustaqbalka firqo oo burburiso Islaamka iyadoo huwan shaarka Islaamka waxa aan u diyaariyay firqadaan caqiidooyin khaldan oo aan sal iyo raad midna ku lahayn Islaamka hadii aan ka hadalno magaalada (**Kufa**) waxa bilaabatay maalintii la'aasay Cali Binu Abii Dhaalib oo ahaa khaliifkii afaraad sida ay aamisan yihiin ahlu sunaha balse Shiicadu waxaay aaminsantahay in uu yahay khaliifkii kowaad ee muslimiinta, waxa uu ninka lugeeynayaa uu ukala socdaa halsaac.

Magaalada Kufa oo xarun u aheed Khilaafadii Cali, markii ladilay Cali waxaa aasay labadiisii wiil Xasan iyo Xuseen waxa ay ku aaseen duleedka magaalada Kufa oo hada loo yaqaano Najaf, xiligaa ayaa waxaa bilaawday in lamagaaleeyo waxaana burburtay magaaladii Kufa kadibna waxaa la isugu soo ururay magaalda Najaf waxa isugu yimid culimo badan waxa laga dhisay guryo, suuqaq iyo malcaamado waxa lageen jiray ismaamulka Istanbul in ay taageeraan waxa keenay dhowr waxyaalood:

1- Xukuumada shiicada ah ee ka dhisan Faaris waxa ay taageeri jirtay shiicada degan magaalda Najaf maamulka Khaliifadii Cusmaniyiinta hadii uu soo fara gashado waxa xumaan jiray xiriirka ka dhexeeya labada maamul mararka qaarkood waxa dhex mari jiray dagaalo.

2- Beelaha degan hareeraha magaalda Najaf badankoodu waxa ay taageeri jireen ayna ahaayeen beelo hubeesan in

kasto oo aysan uhubeysneyn si heersara ah maamul iyo kala dadnbeyn malahayn is abaabul beeleed mooyee hase ahaatee beelaha iyo Khilaafada waxa dhexmaray dagaalo ba'an oo lagu hoobtay.

3- Shiicada degan Najaf waxa ay saldhig u ahaa yeen dhamaan muslimiinta Shiicada ee ku kala sugan daafaha caalmka sida Shiicada degan Hindiya iyo qaarada Afrika hadii ay xukuumadu fara galiso Shiicada Najaf waxa ka banaan bixi jiray dhamaan Shiicada kala degan dhamaan daafaha caalamka, hadii aan ka hadalno magaalada Karbala waxa ay bilaabatay xilligii uu ku shahiiday Xuseen Binu Cali (Radiyallahu Canhu) oo ahaa Faaduma Binta Rasuulilaah (Calayhi Salaatu Wassalaam), wiilkeeda waxa u yeeray Xuseen Binu Cali(Radiyallahu Canhu) reer Ciraaq in uu kasoo kaco Madiina si ay uga dhiktaan madaxwayne markii uu soo gaaray asaga iyo shiikhiisii Karbala waxa ballantii ka baxay reer Ciraaq **Yaziid Binu Mucaawiya** oo ahaa khaliifkii mu'miniinta oo daganaa wadanka Shaam ayaa waxa uu amar ku bixiyay in lasoo qabto Xuseen Binu Cali, Xuseen Binu Cali waa dagaalamay asaga iyo ehliyadiisii waxa uu la dagaalamay ciidankii Umawiyiinta ee faraha badnaa Xuseen Binu Cali iyo ehelkiisii waa lalaayay goobtiina waalaga qabsaday waxa dagaalkii ku gacan sareeyay ciidankii Umawiyiinta laga soo bilaaba waqtigaa iyada Shiicadu waxa ay xarun ruuxi ka sameysteen meeshii lagu dilay Xuseen Binu Cali waxa ay sanad kasta uga yimaadan daafaha caalamka waxa ay sameeyeen sanad guurooyin aad uwaaween magaalada Karbala waa magaalo Shiici ah iyada iyo Najaf, waana laba magaalo oo isku tiirsan, markii amar la 'igu siiyay in aan aado labadaasi magaalo waxa aan ka baxay magaalda Basra waxa aan tagay magaalada Baqdaad, Baqdaad ayaan ka baxay waxa aan tagay Al Xulawaana magalo ku taala wabiga Furaat

qarkiisa, Furaat iyo laba wabi oo waaweyn oo kala ah Dijla iyo Furaat waxa ay ka yimaadaan wadaka Turkiga waxa ayna ka soo faafaan wadanka Ciraaq waxa ayna ku shubmaan gacanka Basra waxaana ka faa'iidaysta reer Ciraaq.

Labadaas wabi ayey ku waraabsadaan beereaha, dhab ahaantii waxa aan hindisay markii aan ku laabtay Landan in aan wasaarada kula taliyo in ay labadaa wabi ay gooyso si ay ugu suuro gasho in ay Ciraaq si degdeg ah isugu soo dhiibto wasaarada maxaa yeelay hadii lagooyo biyaha labada wabi waxa laga maarmaan ah ay reer Ciraaq in ay wasaarada codsiyaal usoo gudbinayaan si loogu fasaxo biyaha, waxa aan ka tagay magaalada Xilal wax aan tagay magaalada Najaf aniga oo iska dhigaya nin ganacsada ah oo ka mid ah ganacsatada Azerbijaan waxa aan ku biiray wadaado Shiicada, waxa aan qaatay wardigooda waxaan xaadiray kulankooda iyo daruustooda waxa aana ogaaday inaysan ku dadaalayn barashada diinta Islaamka si ay sunniyiintu ugu dadaalaan oo kale ma ahan dad dhaqan wanaagsan qalbigoodana uusan lamid ahayn sida suniyiinta oo kale waxaay ahaayeen dad aad uneceb Cusmaaniyiinta maxaa yeelay waxey ahaayeen Shiico.

1- Cusmaaniyiintu waxaay ahaayeen Suni, Shiicadu dadka suniga ahina waxey ku magacaabaan gaalo.

2- Waxaay ahaayeen culumada shiicadu kuwo ku koobay naftooda culuumta diiniga ah sida baaderiyaasheenna, waqtigii casrigii adkaa waxa ay ka tageen culuumtii aduunyada wax yar oo aan ku filnayn mooyaane.

3- Waxa aan ogaaday culimada Shiicada in aysan aqoon dhab ah u lahayn Islaamka hormarka xirfado iyo hormar aqooneed, naftayda ayaan waxa aan kula sheekaystay Shiicadu waa masaakiin, hurudo ayey isaga jiraan aduunyaduna waa ay soo jeedaa mar dhawna daad ayaa qaadidoona.

Waxa aan isku dayey in aan kiciyo si ay ula dagaalamaan khilafada balse dhag jalaq iima aysan siin qaar ka mid ahi waa ay igu jees jeeseen waxaad moodaa in aan ku iri adduunkoo dhan dumiya maxaa yeelay khilaafada waxa ay ka aamin sanaayeen awood aan la jiirikarin Mahdigii in uu soo baxo ma ahane.

Mahdiga waxa ay ka aamin sanyihiin iimaamkoodii laba iyo tobnaad in uu yahay awoodii Rasuulka (*Calayhi Salaatu Wassalaam*) waxa uu ka maqan yahay muddo 255 sano Hijriga ah waa uu noolyahay hadda waxa uu soo bixidoonaa adduunka oo tacadiyo fara badan ka jiraan waxa uu soo celindoonaa maamul iyo kala danbayn.

Waxa aan aad ula yaabay quraafaadka ay aaminsantahay Shiicadu waxay la mid tahay wax yaabaha ay aaminsanyihiin Kiristaanka oo ah in uu soo laaban doono Ciise si uu adduunka uga buuxsho nidaam iyo kala danbayn waxa aan ku iri mid ka mid ah Shiicada miyaysan waajib ahayn in la tirtiro oo la baabi'iyo dulmiga iyo gar darada sida uu Rasuulku Islaamka uga tirtiray.

Waxa uu iigu jawaabay Rasuulka waxaa taageeray Allahu Tacaalaa sidaa ayayna ugu suura gashay in uu baa bi,iyo dulmiga.

Waxa aan ku iri Allahu Tacaalaa waxa uu leeyahay

(Hadaad Allahu Tacaalaa Gargaar Weydiisataan Wuu Idiin Gargaarayaa) Suuratu Muxamad Aayada: 7 aad[17] sidaa darteed hadii aad la dagaashaan dulmiga iyo gar darrada Allahu Tacaalaa baa idin taageeraya.

Waxa uu igu yiri:adigu waxa aad tahay nin ganacsade ah arrintaanna waa mid u baahan cilmi iyo aqoon waxaad fahmi kartana ma'ahan.

Hadii aan ka hadalno qabriga sayid Cali waa qabri aad

[17] Macnaha u gargarida diinta ilahay waa racida sharecada iyo kashaqaynta fidinteda, kahor imaanshaha dowlada iyo maamulkaba waa diin dumin

loo qurxiyay waxa uu leeyahay xayndaab waxaana ka dul dhisan kubad dahab ah aad u wayn iyo laba minaaradood oo dahab ah.

Shiicadu waxa ay maalin kasta booqdaan qabriga Sayid Cali iyagoo koox koox ah oo qaadaya qasiidooyin iyo nabi amaanno aad u heer sareeya waxay dhunkadaan qabriga mid waliba waxa uu foorariyaa madixiisa isagoo dhunkanaya kadibna waxa uu salaamaa imaam Cali wuxuu leeyahay qabrigu darbi wayn waxaa ka dhisan qolol aad u farabadan waxaa daga culimada iyo dadka soo siyaaranaya sidoo kale magaalada Karbala waxaa ku aasan Xuseen Binu Cali iyo Cabbaas Binu Cali (Radiyallahu Canhumaa).

Sidaas oo kale Shiicadu waxa ay siyaartaan labadaan qabri aadna waa loo qurxiyay sida qabriga Cali (Radiyallahu Canhu), Karbala iyo Najaf waxaa cimilo wanaagsan Karbala waxaa ku hareeraysan bero waxaa dhex mara wabiyaal markii aan tagay Ciraaq waxa aan helay wax la'igu laab qabawsado dhab ahaantii guud ahaan shacabka reer Ciraaq ayaa waxa ay aad u danaynayeen in xukunka Cusmaaniga ah bur burto.

Waxa ay dheheen ninka haysta xukuumadda Istanbuul waa nin jaahil ah oo kaligii taliye ah wax alaale iyo waxa uudoono ayuu shacabka ku xukumayaa shacabkuna ma taageersana.

Xukuumaddu waxa ay aad u cadaadin jirtay shacabka Ahlu sunnaha ah wax mudnaan ahna ma aysan siinjirin shiicaduna waxa ay iska waynaynayeen oo ay kafaani jireen in uu xukumo nin Turki ah iyagoo heli kara Ahlubaytkii Rasuulka waxa ayna oran jireen Ahlu baytka ayaa maamulka ka mudan nin aan carab ahyn oo Turki ah.

Shiicadu waxa ay ahaayeen dad aad u liita oo ku nool nadaafad darro iyo bur bur, wadooyinkoodu waxa ay ahaayeen kuwo aan aamin ahayn, waxaa jid gooyo dhigan

jiray kuwo tuugo ah oo waxa ay arkaan furanaya hadaysan gaadiidka ay isticmaalayaan aysan lasoco kuwo boolis ah sidaa darteed gaadiidku ma dhaq dhaqaai jirin in xukuumaddu boolis hubaysan ku darto mooyaane, waxaa ay dagaallo ka dhexeeyay qabaa'ilka Shiicada ah maalin kastaa waxaa dhici jiray iska hor imaad u dhexeeya laba beelood waxaa ka dhexeeyay labada beelood isdil, dhac iyo boob, waxa aan xusuustaa qaabkii ay ahaayeen Shiicada maal mihii ay kaniisadu qabsatay qaaradda yurub.

Markii laga reebo culimada ku nool Karbala iyo Najaf iyo dad yar oo ku xiran culimada Shiicada waxa ay ahaayeen kuwo aan waxba qorin waxna akhrin, dhaqaaluhuna aad ayuu u bur buray dadkuna waxa ay ku noolaayeen nolol ciriiri ah iyo baahi Shiicadu waxa ay khiyaami jiraty dawladda waxaa meel walba saameeyay fawdo, xukuumaduna indhaha ayey ka fiirsanaysay shacabkana qofba qofka kale ayuu ka shakisanaa oo uu iska eegayay sidaa darteed wax iskaashi ah kama dhaxayn dawladda iyo shacabka culimada Shiicaduna waxa ay heshiis ka dhex wadeen dadka waxay kajeesteen barashada diinta Islaamka iyo maadigaba mudo afar bilood ah ayaa waxaan joogay Karbala iyo Najaf waxaan aad ugu xanuusaday magaalada Najaf mudo saddex isbuuc ah waxaan aaday dhaqtar wuxuu iitilmaamay daawo markii aan cabaynah waxaan dareemay caafimaad xiliguna waxaa uu ahaa diraac aad ukulul, mudadii aan xanuusnaa waxaan kujiray meel dhulka hoostiisa oo lagu magacaabo Sardaab, ninka aan qolka ka kireeystay waxa uu sitoos ah iigu diyaarin jiray daawada iyo cuntada waxaa uuna aaminsanaa in khidmeyntayda uu ugu dhawaanayo ajarka sababtoo ah waxaa uu imooday in aan ahay nin soo siyaartay iimaanka Cali maalmihii hore waxaa uu iikeni jiray maraq digaag dhaqtarka ayaa waxa uu ifasaxay in aan cuno hilibka digaaga.

Isbuucii sadexaad wuxuu ii ogolaaday in aan isku cuno bariis iyo hilib digaag markii aan kabuskooday waxaan booqday Baqdaad waxaana halkaa kudiyaariyey warbixin faahfaahsan wixii aan kusoo arkay magaalooyinka Najaf, Xulle iyo Baqdaad wax yaalihii aan lakulmay intaan ukalasocnaayey waxaan kuqoray warbixinta boqol bog waxaan udhiibay waraaqadihii wakiilka wasaarada ee kusugnaa Baqdaad waxaan sii joogay magaalada Baqdaad anigoo wasaarada kasugaya awaamir ah in aan kusugnaado Ciraaq iyo in aan ulaabto Landan, dhab ahaan tii waxaan aad urabay in aan kulaabto Landan maxaa yelay in aan lakulmo xaaskeygii iyo wiilkeygii Raasbutin oo ahaa indhaheyga nuurkooda waraaqadihii aan sii dhiibay ayaan waxaan wasaarada ugu siiqoray in ay ii ogalaato in aan soo laabto mudo gaabanba ha ahaatee si'aan sirtooda uga warbixiyo iyo sidaan usoo nasan lahaa dhab ahaantii waxa igu dheeraaday safarkii aan u safrayey Ciraaq waxa uuna igu qaatay muddo sadex sano ah.

Waxa uu iguyiri wakilkii wasaarada ee ku sugnaa magalada Baqdaad waxa uu yiri ninyahow wax hadal ah ha igu soo celin, waxaad qol ka kiraysataa guryahay ku teedsan wabiga Dijle, si'aan waxa shaki ah aan iigalin waxa uu yiri mumatilkii kolay waa uu kuu warami doonaa markii ay war bixin ugatimaato magaalda Landan.

Waxa aan arkay maalmihii aan joogay in uu khilaaf wayn u dhexeeyo xarunta xukuumada ee Istanbuul iyo Baqdaad run ahaantii waxa aad uga walwalay maalmihii aan ka soo tagayay Basra oo aan soo aadayay Karbala iyo Najaf Muxamed Cabdi Wahaab xaaladiisa, waayo waxa aan islahaa si dhab ah ugama aad leexin wadadii xaqa ahayd wadadii aad u jideysayna ma uu qaadi doona maxaa yeelay waxa uu ahaa nin is bed bedel badan oo qabyaaladaysta ah.

Waxa aan aad uga cabsanayay hidi diilihii aan ka lahaa

ninkaa markii aan kasoo tagayay waxa uu jeclaa in uu aado Istanbuul balse waan u diiday oo waxa aan ku iri war ninyahaw waxa aan ka baqayaa in aad aragto shay khalad ah balse ayagu ay wanaag u arkaan in aad ka heshid kadibna ay ku dhahaan gaal baad tahay oo ay ku dilaan, waxaan kale oo kacabsanayay hadii uu halkaa tago in uu lakulmo culimo markaasna ay ka toosiyaan waxyaabaha khaldka ah oo ay uceliyaan wadadii toosnayd ee ahlu sunnaha markaasna ay burburaan dhamaan u jeedooyinkeygii aan ninkaan ka lahaa maxaa yeelay Istanbuul waxa yaalay aqoon aad ufara badan iyo dhaqanka Islaamka ee aadka u wanaagsan.

Markii aan arkay in uu san doonayn in uu ku sii nagaado magaalda Basra waxa aan kula taliyay in uu aado magaalooyinka Isfahaan iyo Shiiraas, labadaasi magaalo waa laba magaalo oo aad uqurux badan, waxaa daganaa Shiico sidaa darteed waxa aan suurta gal ahayn in Shiicadu wax saameyn ah ay ku yeelato Muxamed Cabdi Wahaab waayo Shiicadu wax cilmi iyo dhaqan wanaagsan ah ma hayaan waxaan dhibaato iyo qabyaalad ahayn kuma fikiraan dhab ahaantii waxa aan aaminsanaa haduu magaalooyinkaa tago wadadii aan rabay in uu ku sugnaan doono.

Markii aan kala taliyay ayaan waxaan ku iri ma aamin santahay waxa la yirahdo isqarxinta waxa uu yiri haa waxaa isqarxiyay mid kamid ah asxaabta rasuulka Calayhi Salaam, waxa aan u maleynayaa in uu yiri saxaabigaas waxa uu kamid ahaa asxaabta markii ay jir dileen mushrikiintu oo ay dileen aabihiis iyo hooyadiis ayuu wuxuu muujistay shirkinimo arrintaa waxaa usugay rasuulka.

Waxa aan ku iri hadaba iska qari Shiicada hana u malaynin in aad kamid tahay ahlu sunnaha si aysan kuu dhibaateen dhulkaagana aad ugu raaxaysatid una soo baratid dhaqamadooda iyo madaahibtooda maxaa yeelay waa dad jaahiliin ah oo madax adag markii aan ka soo tagayay waxa

aan ku sagootiyay xoolo aan ku magacaabay Zako, sakadu waa canshuur islaami ah oo Islaamku iska qaadaan dhexdooda waxa ayna ku bixiyaan danahooda guud.

Waxaan kale oo aan usoo gaday gaadiid si uu ufuulo waana u hadiyeeyay waan ka tagay laga bilaabo xilligii aan kasoo tagay.

Magaranayo xaaladiisa meel ay ku dan beeysay waxa aan aad uga walaacay ninkaa xaaladiisa, waxa aan ku balamay in aan dhamaanteen isugu nimaano magaalada Basra hadii midkeenii soo laabta uusan saxiib kiis helin in uu waraaq u dhiibo Cabdi Ridaa

---

BAHALNIMADII INGIRIISKA

1- War bixin ay soo saartay gabar saxaafiyad ah oo na turkiyada ah oo muslim ah bishii lixaad sanadkii 1995m in ay koox ingiriis ah ay isku taagtay xatooyada caruurta da'yarta.
Waxa ay ka soo xadeen dhamaan caalamka gaar ahaan wadamada faqiirka ah kooxdaasi waxa ay ka ganacsan jirtay xubnaha dadka, waxaa warbixn hoose lagahelay wadanka Baraasiil warbixintuna waa sida tan.
Hay'ada dhoofinta xubnaha bin aadamka ee caalamiga ah waxa ay xaqiijisay tirada ciyaalka lasoo xaday, waxa kale oo ay sheegtay isbitaalda ingiriiska qeyb kamid ah in ay aad u daneynayaan in ay ka faa'iidaystaan dhoofinta xubnaha caruurta la soo xaday.

2- Waxa lagu sheegay wargeys kasoo baxa Turkiga afartii bishii lixaad sanadkii 1995m in ay u safreen arday 60 ka badan oo muslimiin ah wadanka ingriiska ujeedadooduna waxa ay ahayd in ay kasoo qaataan shahaadada digtoornimada maadada kimistariga waxa ay xarun ka dhikteen magaalada Newcastle oo ahayd meel ay degaan socotada iyo dadka aan hantida lahayn.
Waxaa magaalda u baxay arday ka mid ah ardaydii oo magaciisu aha Mustafa Arsanoğlu, waxaa ku soo baxday koox

ingriis ah oo ka soo baxday kaniisad ardaygii ayey qabteen waana ay jirdileen waxa ay la dhaceen ulo iyo dhagaxyo waa uu miir dabool may waxa ay ku shubeen baasiin si ay u gubaan inta uu miir daboolan yahay balse nasiib wanaag waxa u huri wayday liifadii gaaska waxa ka war bixisay gabar ka soo daawaneysay dhacdadaas guri dabaq ah.
Markiiba waxa ku soo baxay bolis kadibna waa ay carareen waxa ay galeen kaniisada.

3- Isla joornaalkii ayaa waxaa lagu soo qorey in **Bosniya** ay ka jirto dhaawac, kaajo malin kasta boqolaal muslimiin ah in ay ku dhintaan, waxaa jirey kuwo gaajada la suuxsan iyo kuwo gaajo la ooynaayo iyo kuwo la'aamusan gaajada. Si,aan loo maqlin hooyooyinka iyo aabayaasha wadooyinka ayey ku cararayaan. Dadka ka imaanaayo wadamada Islaamka ayaa waxa ay u keeni jireen wax ay cunaan Serbiyiinta.Ciidamada Ingiriiska oo ka tirsan qaramada midoobey Serbiyiinta ayey jaajuusi jireen. Ciidamadan iyo dalxiisayaasha gaalada, waxa ay cabi jireen dhiiga muslimminta, kuwa ka yimid yurub waa cadawga muslimiinta, waxa ay dhihijireen marka ay wax cabayaan in ay ku jees jeesaan. Bosniyiinta xun xun waxa ay la jireen Ingiriiska. 1988dii **Kosova** ayaa dawlad noqotay. Milisivik ayaa waxa uu u isticmaali jirey sida dabqaadka oo kale.Ingiriiska ayaa waxa uu ku yiri Serbiyiinta ha baqina anaga ayaa gadaal idinka taagan.

QAYBTA KOOWAAD
FASALKA LIXAAD

Muddo dheer markii aan ku noolaa magaalda Baqdaad wasaaradu waaxa ay amar igu siisay in'aan imaado, magaalada Landan xageed ayaan usoo kici timay waxa aan kulama la qaatay xoghayaha iyo xubno ka mid ah wasaarada.

Waxaan uga warbixiyay wax yaabihii aan soo arkay iyo wixii aan soo qabtay intii aan ku jiray safarkii dheeraa waxa ay si'aad ah ugu farxeen warbixinadii aan kasiiyay wadanka Ciraaq aad ayeyna ii gu mahad celiyeen.

Horay ayaa waxa aan ugu soo diray warqado aan ku faahfaahinayey mudadii aan safarka ku jiray.

Waxaa kale oo aan dib ka ogaaday gabadhii la oran jiray Safiyo ee uu la tuman jiray Muxamed Cabdi Wahaab in ay soo dirtay warbixin la mid ah warbixntaan, waxaan kaloo ii cadaatay xoghayaasha wasaardu in ay iga qoreen war bixin wanaagsan ayna rumaysteen warbixinnadii aan soo siiyay.

Xoghaya ayaa si gaar ah iila balamay in aan la kulmo markii aan ku booqday xafiiskiisa si aad ah ayuu ii soo dhaweeyay, waxa uu iisoo dhaweeyay soo dheween ka sareeysa markii aan ka imid magaalada Istanbuul, waxaa kaloo ii cadaatay in aan qalbigiisa ku mashquuliyay meel ku haboon wasiirka.

Waxa uu ii muujiyay farxad aad u wayn sida aan u marin habaabiyay Muxamed Cabdi Wahaab waa baadidii ay doonaysay wasaarada Ingiriiska, waxaa uu yiri hawlgalkaaga hadii uu ku gaabnaan lahaa Muxamed Cabdi Wahaab ayada ayaa waxa walba kufilan waxaan umuujiyey in aan ka walaacsanaahay waxaa uu gadaashay noqondoono wasiirku waxaa uu yiri waxaan ku kalsoonahay Muxamed in uusan iska badalin sidii aad uga soo tagtay shaqada wasaarada ayaa lala xiriiriyay magalaalada Isfahaan waxa ayna wasaarada

uga warbixiyeen in uusan Muxamed sidii iska badalin hase ahaate waxan is iri sideebay u ogaadeen Muxamed xaaladiisa waxaan su'aalo ka waydiiyay wasiirka arrimihiisa waxa uuna ii cadeeyay ninka mid ah shaqaalaha oo isku magacaabay Cabdi Kariim asaga oo doonaya in uu ogaado sirtiisa hoose waxa uu awood u yeeshay in uu helo sirtiisa kadib marka uu lasheekeystay Muxamed Cabdi Wahaab waxa uu yiri gabadhii Safiya waxa ay igadaba timid magaalda Isfahaan laba bilood ayaan la joogay Cabdi Kariim waxa uu ahaa saxiibkiisa oo dagan magaalada Shiraas waxa uu ii diyaariyaya gabar layirahdo Aasiya oo aad uga qurux badan Safiya Muxamed Cabddi Wahaab waxa uu gabadhaasi la noolaa noloshiisii midii ugu wanaagsanayd waxa kaloo oo ii cadaatay magaca kale ee Cabdi Kariim in uu yahay magac lasoo caariyaystay oo la dulsaaray mid kamid ah Kiristaanka dagan meesha la yidhahdo Jelfaa oo u dhaw magaalda Isfahaan ninkaasi waxa uu ka mid ahaa shaqaalaha wasaarada Aasiyana waxa ay ahayd Yahuudiyad dagan Shiraas sidoo kale waxa ay kamid ahayd shaqalaha wasaarada hadaba Muxamed Cabdi Wahaab baadi yeentiisii waxa aan ku ahayn afar qof oo kala ah aniga oo ah Hamfari ninkii labaxay Cabdi Kariim iyo labadii gabdhood oo Safiyo iyo Aasiyo.

Waxa aan ka rajaynaaa Muxamed Cabdi Wahaab in aan kahelno ujeedooyinkeena mustaqbalka markii aan u warbixiyay wasiirka iyo xoghaya iyo laba xubnood oo ka midah balse aan igaranayn markaa ka hor waxa uu yiri wasiirku waxa aad mutaysatay billada ugu saraysa ee wasaarada maxaa yeelay waxa aad gaartay jaranjartii ugu sareeysay shaqaalaha xoghayihii waxa uu intaa sii raaciyay waxa lagu siin doonaa sirta dowlada qeyb kamid ah oo ku anfici doonta.

Waxa ay abaalmarin iisiiyeen toban maalmood oo fasax

ah si'aan u aado xaaskeyga wasaarada ayaan ka baxay aniga oo ku wajahan xaaskayga waxa aan mudo la noolaa wiilkayga yarka ahaa oo aad ka iigu ekaa asagoo markaa hadal barad ah waxa aan mooday qeybka mid ah nafteyda oo soconaysa dhulka si'aan la qiyaasi karin ayaan ugu farxay waxa aan ku sigtay in aan duulo sidii shimbirtii jacayl iga hayo cunigaa dartiis waxa aan ku raaxaystay ehelkeyga iyo wadankeyga waxa aan soo booqday eedadey oo da'ah oo aad ii jacel nasiib wanaag markii aan safarkii sadexaad galay ayeey geeriyootay aad ayaan ugu faraxsanaa xilligaas maxaa yeelay safarkii sadexaad aniga oo ku jira ayey geeriyootay waxa aan dhameystay 10kii maalmood oo bil midnoqotay hal saac sidaa oo kale ayey maalmaha wanaagasani u dhamaadaan ayadoo aad moodid saacado, maalmaha xunna waxa ay dhamaadaan ayagoo aad moodo qarniyaal waxa aan xasuustay maalmihii aan ku xanuunsanaa Ciraaq halkii maalin waxa ay ila ahayd sanad waxa aan kulaabtay wasaarada si'aan u ogaado ammarada la isiin doono iyo meesha la igu wajihi doono waxaa xafiiska si'aad ah igu soo dhaweeyay xoghaya waa uu ii gacan qaaday asaga oo ii mujinaya kalgacayl iyo kalsooni buuxda waxa uu yiri wasiirka waxa uu amar igu siiyay sidoo kale waxa ay ii xilsaareen gudiga khaaska ee arrimaha gumaysiga in aan ku tusiyo laba arrimood oo sir ah oona muhiim ah si'aad uga faa'iidaysan lahayd mustaqbalka labadaasi arrimood lama tusiyo dad yar mooyee oo lagu kalsoon yahay.

Gacanta ayuu iqabtay waxa uu igaliyay qolkamid ah qolalka wasaarada waxaana halkaasi ku arkay waxyaabo aan la yaabay oo halkaas yiilay boqol qarni waxaana ku hareereysan 10 nin, nin waxa uu ulabisan yahay sida madaxwaynaha Cusmaaniyiinta waxa uu ku hadlayay luuqada Turkiga iyo Ingiriiska nina waxa uu egyahay sheekha ugu wayn magaalda Istanbuul kan sadexaadna waxa

uu u egyahay boqorkii furus midna waxa uu u eg yahay wasiirkii ee shiiciga ahaa midka shanaadna waxa uu u egyahay shiikha ay u laabtaan Shiicada oo ku sugan Najaf sadexdaan danbane waxa ay ku hadlaan laba luuqadood oo kala ah luuqada Faarisiga iyo Ingiriiska shantaaan nin midkasta oo kamid ah waxaa agfadhiya nin qoraa ah si uu uqoro waxa uu ku hadlayo warbixinnada ka imanaya daafaha caalamka oo ay soo gudbinayaan shaqaalaha gaar ahaan war bixinnada ka imaanaya xagga İstanbuul, faaris iyo najaf waxa ay ku soo dhacaan shantaan nin xoghaya ayaa waxaa uu igu yiri shantaani nin waxa ay matalayaan shan nin oo asalraac ah waxaana u sameeynay nimankasi si aan u ogaanno sida ay u fakarayaan shanta nin oo muslimiinta ah.

Waxa aanu u xil saarnay nimankaa shanta ah sidii ay noo siinlahaayeen warbixinada nagasoo gaaraya **Istanbuul, Tehraan** iyo **Najaf**.

Nimankaasi waxa ay iska matalayaan shanta nin ee muslimiinta ah oo (asalka ah).

Intaa ka dib waxaan waydiino ayey nooga jawaabaan waxa aynu aragnay natiijada kasoo baxday nimankaan fiiradooda boqolkiiba todobaatan boqolkiiba 70 inay waafaqsantahay nimanka asal raaca ah fikirkooda.

Xoghayuha ayaa waxa uu yiri: hadii aad doontid arrintaan tijaabo ayaad ka qaadi kartaa maxaa yeelay waxaad qaabili kartaa caalimka Najaf.

Waxa aan iri meel kasta oo la'ii diro waan ku haboonahay.

Waxa aan dhawr su'uulood waydiiyay matalaha marjica shiicada ee ku sugan maagaalada Najaf.

Waxa aan ku iri mudane manoo banaantahay hadii aaan shiica nahay in aan la dagaalanno xukuumada maadaama ay tahay xukuumaddu xukuumad sunni ah oo qabyaalad badan?

Matalihii waxa uu yiri maya nooma banaana in aan ladagaalno maxaa yeelay waa xukuumad islaami ah

muslimiintuna waa walaalo waxaa noo banaan inaan kula dagaalano amridda wanaaga iyo ka reebidda xumaanta maadaama ay tahay xukuumad cabburisa ummadda muslimiinta ah waxa aan kala hadlaynaa sidii ay shacabka muslimiinta ah cabburinta uga dayn lahayd hadii ay ka daysana innaguna waan daynaynaa.

Waxa aan iri: mudane Yahuuda iyo Nasaaradu ma najaasaa mise ma'ahan?

Waxa uu yiri waa najaaso waxaa waajib ah in laga fogaado.

Waxa aan ku iri maxay ku najaasoobeen?

Waxa uu yiri: waxa ay ku najaasoobeen laba wax yaalood waxaa ay aaminsanyihiin in aan nahay gaalo Nabi Muxamedna *Calayhi Salaam* waa ay beeniyeen sidaa darteed ayay ku najaasoobeen.

Waxa aan ku iri mudane miyaysan nadaafaddu iimaanka ka mid ahayn?

Maxaa (**Sahne Shariif**) [Qabriga Cali hareerihiisa] iyo wadooyinka soo gala aysan nadiif u hayn? xitaa meelaha lagu barto cilmiga aysan nadiif u ahayn).

Waxa uu yiri: maxaad u arki wayday innagu in aan nahay dad nadaafad badan mawaadan arag nadaafadda ka muuqata wadooyinkeena,suuqyadeena iyo iskuuladeena aan wax ku barano ?

Waxa uu yiri shaki kuma jiro in ay nadaafaddu ka mid tahay Iimaanka hase ahaatee maxaan samaynaa shiicadu nadaafadda ma ilaaliyaan.

Waxaad moodaa ninkaa sida uu iigu jawaabayo in uu yahay caalimkii shiiciga ahaa ee ku sugnaa magaalada Najaf waxa aan aad ula yaabay ninku sida uu ninka isugu ekaysiinayo dhab ahaantii waxa aan waydiiyay su'aalahaan shiikh xiligii aan ku sugnaa magaalada Najaf sida uu ninkan iigu jawaabay ayuu iigu jawaabay ninkaan shiikha matalaya

waxa uu ku hadlayay luuqadda Faarasiga, shiikhuna waxa uu ku hadlayay luuqadda Faarasiga.

Xoghayaha ayaa waxa uu yiri hadii aad afarta kale su'aalo waydiin lahayd waxa aad ogaan lahayd sida ay u matalayaan afarta muslimiinta.

Waxa aan ku iri xoghayaha waxaan garanayaa afkaartii shiikha Islaamka maxaa yeelay shiikh Afandi wuxuu ahaa shiikhaygii haddaba waxa aad su'aalo waydiisaa ninka la yiraaho shiikh Matalihii waxa aan ku iri in madaxweynaha la'adeeco ma waajib baa?

Waxa uu yiri haa waa waajib sida Allahu Tacaalaa iyo Rasuulkiisa loo adeecayo ayaa loo adeecayaa.

Waxa aan ku iri maxaa daliil u ah?

Waxa uu yiri miyaadan maqlin Allahu Tacaalaa qawlkiisa (Allahu Tacalaa Iyo Rasuulka Adeeca Iyo Madaxdiina). (Nisaa: 59), waxa aan ku iri hadii uu khaliifku ka mid yahay ulul amriga Allahu Tacaalaa sideebuu noo amrayaa in aan adeecno Yaziid oo banaystay inuu dagaal ku qaado **Madiinatu Al Munawara**, oo dilay Xuseen (radiyallahu canhu) oo ay dhashay gabadhii Rasuulka (Calayhi Salaatu Wassalaam) sidee Allahu Tacaalaa noo amrayaa in aan adeecno Waliid oo ahaa nin khamriga cabba?

Matalihii waxa uu yiri wiilkaygiiyow Yaziid waxa uu ahaa amiirkii muslimiinta xag allana nalagala amray Xuseena in la dilo ma uusan amrin ha rumaynin beenta Shiicada si'aad ah kutubta u akhriso dhab ahaantii Yaziid waa uu gafay waana uu toobad keenay in uu madiino dagaal ku qaado waxaa ku qasbay reer madiino ayaa xad gudbay waxa ayna ka bexeen adeeciddii Amiirka balse wali waxa uu ahaa Faasuq.

Khilaafada waxa lagu adeecayaa wixii ku salaysan shareecada Islaamka su'aalahan qudhayda ayaa waxa aan horay u waydiiyay shiikhayga Afandi, jawaabahaan oo kale

ayuu iigu jawaabay waxaan ku iri xoghayaha maxaa dana oo ku jira matalaadaan?

Waxa uu iyiri waxa aan ogaanaynaa fikirada madaxda iyo culimada musliinta sunniga iyo shiicada ka dib waxa aynu u jeexaynaa sidii aan uga hortagi lahayn arrimohooda siyaasadeed iyo midooda diineed tusaale ahaan markii aad ogaato in cadawgaagu kaaga imaan doono xaga qorrax kasoo baxa waxaad hor dhigaysaa ciidankaaga balse hadii aadan garanayn cadawgaaga halka uu kaa jiro ciidankaaga waxa aad u kala qaybinaysaa jihooyinka oo idil, sidoo kale markii aad ogaatid qofka muslimka ah waxa uu daliilsanayo madhabkiisa iyo diinkiisa waxaa kuu suura galaya sidii aad udiyaarsan lahayd jawaab aad ku raddisid waxa uu daliilsanayo.

Jawaabahaas waxa ay noqonkaraan jawaabo lagu qanco, waxaadna khal khal galinkartaa qofka muslimka ah caqiidadiisa.

Kadibna xoghayuhu waxa uu ii dhiibay Kitaab wayn oo ka kooban kun bog kitaabkaasna waxaa ku qoran doodo iyo kaartooyin dhex maray shanta muslimiinta ah iyo shanta matalayaasha ah doodahaas waxa ay ku saabsan yihiin arrimo milatari, arrimo dhaqaale, arrimo aqooneed iyo mid diineed.

Kitaabkii ayaan gurigaygii u qaatay waxaan kusoo akhriyay muddo saddex asbuuc ah waxa uuna igu amray in aan kitaabka soo celiyo markii aan soo akhristo.

Wax aan la yaabay waxa kitaabka ku qoran cilmi, aqoon iyo qaabka wax loo raadiyo.

Waxaad moodaa in ay tahay dhacdo dhab ah sida ay su'aalaha iyo jawaabaha ay nimankaa isu waydaarsayaan iyo siday isugu beeganyihiin waxaan isleeyahay boqolkiiba 70 wax ka badan waa ay saxan yihiin, in kastoo uu horay iigu yiri xoghayuhu su'aalaha iyo jawaabaha ay is dhaafsanayaan 70% way saxsan yihiin.

Buugaan waxa aan ka kororsaday kalsooni aan ku kalsoonahay awooda dawladayda, waxaa kale oo ogaaday dhab ahaantii dawladdu in ay diyaarisay kaartooyinkii lagu xadidi lahaa awoodii dawladii Cusmaniyiinta wax ka yar hal qarni. Xoghayuhu waxa kale oo uu yiri qolkaas kale waxaa ku jira matalayaashaan oo kale waxayna matalayaan wadaado aan gumaysanno, xoghayaha ayaa waxa aan ku iri nimankaa matalayaasha ah xageebay xogtaan ka helaan?

Waxa uu yiri: shaqaaleheena kala jooga daafaha caalamka ayaa si toosa war bixinta noogu soo gudbiya iyagoo kusoo aadiya matalayaasha.

Waxa uuna yiri: xoghayuhu tani waa sirtii kowaad oo aan ku ogaysiiyo sirta labaadna waxaan kuu soo gudbindoonaa bil kadib markii aad soo dhamaysid Kitaabkan.

Waxa aan soo akhristay Kitaabkii dhamaantii waxaana ka faa'iday aqoon aad u farabadan oo ku saabsan Muxamadiyada waxaa kale oo ogaaday fikradahooda iyo qodobada ay ku liitaan waxaa kale oo aan ogaaday qodobada ay muslimiintu awooda ku leeyihiin iyo sidii looga shaqayn lahaa sidii loo bur burin lahaa looguna badali lahaa qodobo taag daran.

Qodobada ay muslimiintu ay ku liitaan waxaa kamida

1) Khilaafka u dhexeeya Sunniga iyo Shiicada,[18] khilaafka u dhexeeya shacabka iyo madaxda, khilaafka u dhexeeya labada dawladood ee Turkiga iyo Iran, khilaafka u dhexeeya qabiilooyinka, khilaafka u dhexeeya culimada iyo madaxda.[19]

---

[18] Warkani waa khalad aad u xun isagana horay u shegatay in adeecida madaxweynaha ay tahay fardi.

[19] Tanina waa been abuur qiimaha ay siisay dowlada Cusmaniyadu way diiwan gashan tahay waxayna ku faahfaahsan tahay dardarankii Cusmaan Gaazi, saladiintii cismaaniyada oo dhan waxay siiyeen maraatib ama darajooyin sare culumada, markii ay soo dacweeyeen xasidiintu (**Mowlaana Khaalidul Baqdaadi**) oo ay ku soo dacwodeen maxamuud khaankii labaad oo ay ka dalbadeen in sheekha la dilo wuxuu ugu jawabay madaxweynihii dowladeenu culumada ma dhibtu waana caan eraygaasi, waxay kaloo caaan ku ahayeen Cusmaniyiintii inay culumada dagaan iyo mushaar tiro badan siiyaan.

2) Aqoon darrida saamaysay dhammaan musliinta wax yar mooyee.[20] Himad la'aan, aqoon yari iyo wacyi galin la'aan[21]

3) In aduunyo oo dhan laga tago loona jeesado camal falka aakhiro[22]

4) Kali talinimada xaga maamulka ah[23]

5) In la waayo amniga wadooyinka iyo in lajaro xiriirooyinka ilaa wax yar ma'ahane[24] In la tuuro caafimaadka guud ilaa daacuunka iyo cudurrada ay magaalooyinka soo galaan si xiriir ah oo ay laayaan tobanaan kun oo qof si ay u waayaan daryeel caafimaad[25]

6) In ay burburaan magaalooyinka iyo in la waayo wakaaladaha

---

[20] Kumanaan culumadii cusmaaniyiinta ayaa waxay wax ka qoreen diinta sida: cilmiga akhlaaqada iyo imaanka waana lawada yaqaana xataa caamadoodii ayaa garanaysay diintooda iyo say alle u caabudi lahaayeen iyo siday aduun yadooda u dhaqan lahayeen tuulo walban waxaa ku talay masajid jaamac ah iyo iskool ama madariso waxaana lagu daraseen jiray akhrinta iyo qoraalka culuumta diinigaa iyo kuwa maadiga ah baadiyahana waa lagu aqrin jiray quraanka xiligii cusmaniyiinta culumadii iyo awliyadii soo daahirtay aad ayey u badnayeen.

[21] Arintu sida uu sheegayo ma aha, balse niyada muslimiintii cusmaniyinta ahaa aad ayey usareysay waxayna u dagdagayeen jihaadka si ay u garaan darajada shahidnimada salaad walba dabadeed iyo khudbooyinka jimcaha waxay ugu duceenayeen dowlada iyo khaliifka muslimiinta khayr dadka goob joga ah na qalbigooda bay ka oranayeen amiin, magaala jooga kirishtankuna maanu garanayn wax aqris iyo wax qorid cilmina uma aysan lahayn diintooda iyo aduunyadaba waxayna u malenayeen khuraafaadka ay u daldalayaan baadariyaalkooda inay tahay diin waxay la mid ahayeen xoolaha oo kale oo aan lahayn wax dareen ah bal iyagaba ka xumaa xoolaha.

[22] Islaamku ma kala saarayo arimaha diinta iyo aduunyada islaamku wuxuu ku tiriyay cibaadada xaddiska nabiga ayaa wuxu ahaa (u shaqayso aduunyadada sidii adiga oo waligaa noolaanaya aakhiradaadana u shaqayso sidii adiga oo bari dhimanaya) hase ahaatee kitaabka Injiil waxaa uu dhigayaa inaan loo shaqaysan Karin aduunyada.

[23] Madaxda islaamku waxay awoda saarayeen dhaqan galinta shareecada islaamka qofna ma aysan dulminayn sida ay boqorada yurub u dulminayeen shacabka

[24] Waa been iyo bura bugaando wadooyinkaku waxay ahayeen nabad galyo qofkii kasoo taga magalada bosna oo usocda "maka "si nabad galyo ah ayuu ku marayey masaafada udhaxaysa labada magaalo waxaa la safrayey sahay la'aan waxaa uu biyo iyo bad baad ka helayey tulooyinka , tulooyinka ayaa waxa laga siin jiray hadiyado.

[25] Dhamaan gobolada waxaa ay lahaayeen isbitaalo iyo xurumo caafimaad. Nabooliyiinta xitaa cusmaaniyiintu gargaar u fidin jireen, muslimiintu waxay ku dhaqmayeen xadiiskii nabiga (Calayhi salaatu wassalaam) ee ahaa (nadaafadu iimaanka ayeey ka mid tahay).

biyaha[26] Maamulkii in uu waxa ka qaban waayo mucaaradka iyo in la waayo nidaam, kala danbeen sharci, haba ahaadaan kuwa ku faana qur'aanka laakiin kuma dhaqmaan xeerarkooda[27]

7) In uu burburo dhaqaalaha bur bur aad u wayn faqriguna uu galo meelkasta.

8) In lawaayo ciidan nidaamsan iyo in lawaayo hub ku filan[28] in la yaso dumarka xaqoodana la duudsiiyo[29] in la waayo nadaafad iyo daryeel caafimaad oo dhankasta ah[30] waxa uu sheegay kitaabku qodab kasta oo daciifnimada muslimiinta muujinaya in uu khilaafsan yahay sharciga Islaamka sidaas awgeed waa in ay ahaadaan muslimiinta kuwa jaahiliin ah si aysan ugu baraarugin xaqiiqada diintooda.

Kitaabka qur'aanka waxa uu sheegay in uu Islaamku yahay

1) in uu amraya in la midooba lana isku duubnaado lagana fogaado kooxa kooxaysiga maxaa yeelay Allahu Tacaalaa baa qur'aankiisa waxa uu yiri. Aala Cimraan: 103.

2) (Dhamaantiina Xariga Allahu Tacaalaa Wada Qabsadan)

3) Islaamka waxa uu amrayaa in cilmiga laraadsado maxaa yeelay xadiisbaa waxa uu ahaa: (Barashada Cilmiga Waxay Waajib Ku Tahay Rag Iyo Dumarba)

4) Islaamku waxa uu amrayaa in la xafido qur'aanka kariimka ah illaahy baa qur'aanka ku yiri

(Umadaa Hortiin Tagaye Ku Soc Daala Dhulka Oo Fiiriya

---

[26] Been abuurkaa ma mudna in laga jawaabo, xiligii uu qabsaday ingiriisku wadanka dhul beereedyo iyo dhuumo biyaha qaada oo waa warabiya beerahaas oo dhererkoodu yahay 240km oo uu sameeyey suldaankii magalada dalhi Sultaana oo la oran jiray "farruz shaahi" ee geeriyooday 790h 1388m, waxa ay isu badaleen saxaro lama dagaan ah dhismihii cusmaniyiinta ee xiligaas hada ayaa loo aadaa dalxiis ahaan.

[27] Waxaay umaleenayaan cismaaniyintu inay yihiin sida janaraalda ku qatay bilado inay kusoo daadiyaan saxarada najasada ah ee boqoradii faransiiska wabiga"san".

[28] Ma'uusan ogayn ninkii kor u qaday awooda ciidanka oo nidamiyey in uu yahay suldaan "orkhaangaazi" oo xilka qabasaday (726h 1326m) sidookale miyunan ogayn suldaan "yildirimbaysid khan " in uu ku jabiyey Nayboolu ciidankii kirishtanka sannadki 799h 1399m.

[29] Ma'uunan lahayn ingirrisku aqoon ganacsi iyo aqoon xirfadeed iyo mid hubeedba, xaquuqda haweenka waxay cismaaniyiinta ku ahayd tan ugu saraysa ugunu tayada badan, miyeey inkirayaan in Sweden iyo faransiisku kaalmo ka dalbi jireen cusmaniyiinta.?

[30] Luuqyada magaalooyinka waxay ahaayeen kuwa aad u nadiif ah xataa candhuuftu waxay lahayd meelo lagu tufo oo gaar ah.

Kuwii Beeniyay Ciribtoodu Say Noqotay) Aayad: 137 Ee Aala Cimraan

5) waxa uu amrayaa in adunyada la raadsado ilaahay baa qur'aankiisu ku yiri (Waxaa Kamida Kuwa Dhahaya Aloow Aduunyada Wanaag Nagu Sii)Aayada : 201 Ee Al Baqra

6) Islaamku waxa uu amrayaa in la tashado Allahu Tacaalaa qur'aankiisa waxa uu ku yiri (Arinka Way Ka Shoowraan) Aayada: 38ee Shuura

7) Islaamku waxa uu amrayaa in la ilaaliyo caafimaadka iyo jirka xadiis shariif ah ayaa waxa uu leeyahay

(Cilmiyadu Waa Afar Cilmiga Fiqiga Oo Cibaadada Lagu Ilaaliyo Cilmiga Caafimaadka Oo Jirka Lagu Daweeyo Cilmiga Naxwaha Oo Carabka Khaladka Looga Ilaaliyo Cilmiga Xidigaha Oo Zamanka Lagu Ogaado)

8) Islaamku waxa uu amrayaa in lacamiro dhulka, Allahu Tacaalaa qur'ankiisa waxa uu ku yiri (Allah Subxaanahuu Watacaalaa Idinku Idiin Abuuray Dhulka Dushiisa Waxa Ku Sugan Oo Dhan) Aayada 15 Mulk.

9) Islaamku waxa uu amrayaa kala danbeen iyo nimaad, Qura'aanka Kariimka waxa uu noo sheegayaa (Wax walba waa xisaab iyo nidaam). Hijra/19.

10) Waxaa uu amrayaa in la xoojiyo dhaqaalaha xadiis ayaa waxa uu ahaa (Aduunyada Ka Shaqee Sidii Adigoo Waligaa Noolaanaya Aakhiradana U Camal Falo Sidii Adigoo Bari Dhimanaya)

11) waxa uuna amrayaa in laxoojiyo hubka iyo ciidanka Allah Tacaalaa qur'aankiisa ayaa waxa uu ku yiri (Udiyaarsada Gaalada Wixii Aad Awoodaan Oo Hub Iyo Ciidan Ah) Aayada Anfaal/60

12) Waxa uu amrayaa in la ixtiraamo dumarka Allahu Tacaalaa ayaa qu'aankiisa ku sheegay (Haweenku Waxay Leeyihiin Xaqa Lagu Leeyahay Oo Kale Oo Wanaaga) Aayada 228 Al Baqra

13) Islaamku waxa uu amrayaa in lagu dadaalo nadaafada

xadis ayaa waxa uu ahaa (Nadaafadu Iimaankay Ka Midtahay),qodobada ugu waa weyn ee uu ku sheegay kitaabaka uuna amray in la burburiyo waxa ay yihiin.

1- In aysan takoorin xaga qoomiyadaha, deegaanada, luuqadaha iyo midabada

2- Waxa xaaran ka ah ribada zinada, khamrada iyo hilibka doofaarka.

3- Si adeg ayey shaqaalahooda igu sameeyaan daba gal.

4- Waxa ay ixtiraamaan kooxada madaxda ahlu sunna ah eena waa jibtahay in la tixgaliyo amaradiisa sida ay waajibka u tahay in la adeeco Allahu Tacaalaa iyo rasuulkiisa.

5- Jihaadka waa qasab

6- waxa ay u arkaan in ay shiicadu tahay najaas muslimka aysan ka mid ahayn.

7- Waxa ay rumaysan yihiin muslimiimtu in uu islaamku yahay diinta kaliya ee xooga leh.

8- Shiicaduna waxa ay u arkaan in la xurmeeyo ka dhisida kaniisado wadamada islaaamka.

9- Muslimiintu inta badan waxa ay u arkaan in ay waajibtahay in laga saaro yahuuda iyo nasaarada jasiiratul carab.

10- Waxa ay oogaan cibaadadooda (Salaada, Soonka iyo Xajka IWM) sida ugu haboon.

11- Shiicada waxa ay u arkaan in ay waajib tahay in la siiyo (al khumus) oo ah shanmeelood oo meel qaniimada in ay siiyaan.

12- Waxa ay ugu dhaqmaan caqiidada Islaamka si adag.

13- Waxa ay awlaadooda ku tarbiyadeeyaan si wanaagsan sidii aabayaashood iyo awoowayaashooda si aysan suuro gal unoqan wayso in lakala wado waalidka iyo ilmihiis.

14- Haweenayda muslimada ahi waa ay xijaabantahay si ay isku asturto.

15- Waxa ay tukadaan salaadaha maalintii shan jeer iyaga oo jamaaca ku tukanaya.

16- Waxaa aktooda ah qabrigii nabigooda, ahalkiisa iyo

saxaabadiisa markaas ay unoqotay xarun ay kukulmaan kuna kuka la tagaan.

17- Waxaa dhexdooda ku badan kuwa ku nasab sheegta nabigooda waxa ay xasuusanayaan rasuulka markaasi ayay ula muuqanayaan in uu noolayahay rasuulka.

18- Muslimiintu waa ay isu yimaadaan waqtiyada qaar ayaga oo siku wacdinaya sidaa darteed baa waxa ku waynaada naftooda cabsida alle islamarkaana waxa ay jeclaadaan camalka wanaagsan.

19- Muslimiinta waxa waajib ku ah in ay faraan dadka wanaaga kana reebaan xumaha.

20- Muslimiintu waxa ay jecelyihiin guurka si'ay u tarmaan darteed guurkuna waa sunne.

21- Qofkii muslim ah hadii uu tuso qofkale wadada xaqa ah waxa uu helayaa aduunyada oo dhan wax ka kheer badan.

22- Xadiis baa waxa uu ahaa (QOFKII WANAAG JIDEEYA WUXUU LEEYAHAY AJARKIISA IYO CIDII KU RAACADA AJARKOODOO KALE ILAA QIYAAMAHA).

23- Muslimiintu waxa ay qadariyaan qur'aanka iyo axaadiista ku dhaqan kooduna lagu helayo janno iyo ajar wayn, kadibna waxa uu ku dardaarmay kitaabka in lagu badiyo qodobada liita (ka soo horjeeda islaamka) iyo in la qariyo qodobada wanaagsan, in lasheego daliilo muujinayo arintaas, kitaabka waxa uu leeyahay in laga shaqeeyo sidii loo faafin lahaa qodobadan soo socda:

1- In khilaafyada lala beegsado kooxaha iska soo horjeda iyo in lafaafiyo kutubo lidku ah kooxahaasi lacagna lagu bixiyo is baabi'intooda iyo kala fogaantooda.

2- In jahligu lagu baaqi yeelo loona diido in ay furtaan iskoolo lana baabi'iyo kutubtii diiniga ahayd dadka in laga soo leexiya iskooladii diinta in ay ilmahooda ay geeyaan sidoo kale waa In culimadooda la duro [wadadaasina waa wadadii uu ingiriisku ku dhibaataynayay islaamka].

3- 4- In ay ahaadaan ku wa baraarugsanayn iyaga oo loo

qurxinaya jannada iyo in aysan waajib ku ahayn nolasha aduunyada, sidoo kale in loo badiyo xalaqooyinka ku saabsan tasawufka iyo in loo badiyo kutubta amraya in laga saahido aduunyada iyo dhaldhaalkeeda sida kutubka (Ixyaa Culuumu Diin) Qasaali iyo qasiidada (Almasnawi) oo uu alifay (**Mowlaanaa JalaaluDiin Alruumii**) iyo kutubka (**Ibnu Carabi**)[31].

5- In la xoojiyo kalitalisnimada ayada oo loo cadeynayo (in ay yihiin hooskii Allahu Tacaalaa ee dhulka ku sugan) sidoo kale in Abuubakar, Cumar, Cusmaan, Reer Banii Umaya iyo Reer Banii Cabaas dhamaantoodu in xukunka ku heleen xoog iyo seef ayna ku maamuleen kalinimo.

Abuubakar waxa uu xukunka ku qabsaday seeftii Cumar iyo in lagubo guryaha aan hoos imaanin maamulkooda sida gurigii Faaduma Nabi Muxamed[32] Cumar in uu xukunka

---

[31] saahid nimada ay amaaneen kutubta suufiyadu ma'aha in laga tago aduun yada ee wa in lagu mamaananin aduunyada raadinteeda macnuhu waxaa waaye kasabka xalasha ah ee loo adeegsado si waafaqsan shareecada waa cibaado sawaab leh.

[32] Waxaa ku sugan axaadiista nabiga tilmaamo tusaalenaya in abu bakar, cumar,cismaan iyo cali alle raali kaga noqdo dhamaantoode ay yihiin dhaamaantood khaliifiintii nabiga balse lama cadaynin waqtiyada ay xilalka qabanayaan iyo say u kala horeeyaan arintaas wuxu nabigu u daayey in ay asxaabtu iyagu doortaan, ijtihaadka asxaabtu ee dhanka doorashada khaliifada wuxuu ahaa dhowr nooc maadama aysan ahayn khilafadu hanti la dhaxlayo oo lasiinayo dadka qaarabada nabiga ah sidaas dartee ayaa abu bakar wuxu ahaa khaliifkii ugu horeyey ee asxaabtu doorato taas o sababo kala duwan asxaabtu u yeeleen sida inuu ahaa ninkii ugu hor islamay dad badana soo islamiyey iyo nabigu inuu kadhigay imam isaagoo nol uuna ku daba tukaday nabigu uuna ahaa qofkii kaliya ee lasoo hajiray nabiga markii isaga la doortay ayaa rag uu kamid ahaa abu sufyaan ay ku yiraahdeen sayid cali gacantada noo soo tag aan kula bacaytannee hadad doonaysidna waxaanu meel kasta kaga soo buuxinaynaa ciidan fardoolay ah iyo kuwa lug lay ah ma uusan aqbalin arintaas sayid cali wuxuuna yiri (ma waxaad doonaysaan inaad kala furfurtaan muslimiinta inaan soo bixi wayo micnaheedu ma ah inaan doonayo xilee waxaan la qalbi xanuunay waayidii aan wayey nabi muxameed (Calayhi salaatu wassalaam) waana jahwareersanaa) wuxuu yimid imam cali masaajidka wuxuuna la bayac tamay abu bakar dadka hortooda abu bakar markaas ayuu ku yiri (ma anaana doonayn inaan noqdo khaliif waxana igu qasbay daruufta si aysan fidna ugu dhex dhalan aslaanka) sayid calina wuxuu yiri(adaa ku haboon khilaafada) wuxuuna amanay sayid abu bakar sida ku qoran mujaladka labaad ee kitaabka la yiraahdu "al sacaadah al abadiyah " qeybta labaad leenka labaatan iyo saddexaad ayaa lagu qorey. sayid cumar wuxuu sayid cali u sagootiyey gurigiisa isagoo sayid cali oranaya(umadan waxaa ugu fadli badan nabi muxamed ka dib (Calayhi salaatu wassalaam) abu bakar iyo cumar dadka ku kadsoomay been abuurka shiicada waxay sabab u noqdeen xalada tafaraaruqa ee muslimiintu mantay ku sugan yihiin , ingirruskuna wuu buunbuniyaa fidnadaas.

kula weereegay dardaarankii Abuubakar, Cusmaan in uu xukunka kula wareegay Cumar amarkiisa, Cali in uu xukunka ku la wareegay doorasho kacdon, Mucaawiye in uu xukunka kula wareegay seef[33] kadibna waxa dhaxlay reer Banii Umaya, kadibna waxaa kalawareegay reer Bani Cabaas, arrintaas oo dhan waxa ay ku tusinaysaa in uu islaamku yahay kaligii talis.

6- In la joojiya xukunka dilka [qofkii qof dila in aan ladilin] xalka kaliya ee joojinkara dilka iyo foodada waa ciqaabta dilka ah in lawaayo amniga wadooyinka iyo in la xoojiyo kuwa guul dareystay lana siiyo hub laguna qasbo in ay wadaan shaqada tuuganimada iyo laaluush qaadashada.

7- In ay ku sugnaadaan xaaladooda caafimaad daro in lagu dhex faafiyo, in uu Allahu Tacaalaa waxkasta uu qadaray aysan faa'ido layhayn in ladaaweeyo, miyuusan Allahu Tacaalaa quraankiisa ku dhihin (Alle waa kan iquudiya oo iwaraabiya hadaan jiradana iroonaynayay oo idilayay kadiban inoolaynayay) Shucara/79-80-81[34].

8- In ay foodadu baaqi ahaato iyada oo lacadeynaayo in uu islaamka uu yahay diin cibaado uusan laxiiriin arimaha dowlada sidaa darteed malaheen Muxamed iyo khulafada wasiiro, nidaam iyo qawaamiin {sharciyo}[35].

9- In burbirinta dhaqaalaha uu badiyo fasaadka sidaa dartee waa in laburbiriyaa doomaha ganacsiga iyo in lagubo suuq yada sidoo kale waa in laburburiyaa meelaha beeraha

---

[33] Khilaafada mucaawiye waxay sharciyad ku heshay baycadii imam xasan binu cali. **(Hadalkii xaqa ahaa ee gaarsintiisa)**kitaabkaan aad akhrineysaan.

[34] Si uu muslimiinta u khayaanu ingirisku wuxuu aayadaha quraanka iyo axaadista nabiga ku fasirayaa macna khaldan, in la'is daaweeyana waa sune alle ayaana caafimaad ku dhex abuuray dawada nabigeenana wuxuu faray in la'is daaweeyo caafimaadkase alle ayaa haya wax kastase sabab ayuu u yelay wuxuuna nafaray inaan wax kasta sabatooda raadino wuxuuna rasuulkeenu yiri (Calayhi salaatu wassalaam) (cilmiga raadsigisu muslimkasta waajib buu ku yahay qof kasta oo muslim ah) wuxu kaloo yiri (qofka shaqaysanaya alle ayaa jecel).

[35] Cibaadadu ma aha salaada, soonka iyo xajka oo kaliya balse shaqada aduunyada oo aad u niyeysataa inaad amar kale fulinaysid waxay ka mid tahay cibaadada, shaqa kasta oo bulshada nafci u ah waxay leedahay sawaab.

laga waraabiyo waana in lasumeeyo meelaha ay dadku biyaha kadhaansadaan[36].

10- In lamashquuliyo madaxda iyada oo lagu fidneynayo [dumarka, ciyaaraha], khamriga, khamaarka iyo laaluushka, in loolexiyo hantida dowlada danaha gaar ah iyo in lajecleysiiyo shaqaalaha arintaa.

Waxaa kale oo uu ku dardaarmay in lajoogteeyo jawaasiintaa ayna ilaaliso dawlada Ingiriiska.

11- Sidoo kale waxaa uu kudardaarmay kitaabka in lafaafiyo Ribada maxaa yeelay waxa ay burburisaa dhaqaalaha wadanka waa in lagu dhiiro galiyaa muslimiinta in ay joojiyaan ku xukunka qur'aanka, waxaa kale uu kadardaarmay in muslimiinta laga dhaadhiciyo ribada xaraanta in ay tahay (Ribada Laban Laabka Ah).

Allahu Tacaalaa qur'aankiisa waxa uu ku yiri (Hacunina ribada)Al cimran:130 ribada qaybaheda oo dhan xaaraan ma'aha[37].

12- Sidoo kale waxaa waajib inagu ah in aan jarno xiriirka kadhaxeeyo culumada iyo bulshada inteeda kale iyadoo loomarayo in la tuhmiyo culumada iyo in looxiro qayb kamida shaqaalaheena dharka culumada kadibna aysameeyaan dambiyo waa wayn islamarkaana uu shaki ku beermo dad waynaha sida la hubo ragan shaqaalaha ahi waxa ay galeen (jaamacadii Al Azhar, Istanbuul, Najaf iyo Karbala) waxaan aan furi doonaa iskoolaad iyo macaahid lagu liidayo xiriirka kadhexeeya culumada iyo dadweynaha waxaan ku tarbiyadeen doonaa caruur cadaw ku ah muslimiinta waxaanu u aqrin doonaa caruurta muslimiinta in

[36] Bal fiirsha wax shinimada iyo dulmiga uu u diyaarshay muslimiinta ingiriisku isagoo iskutilmaama inuu yahay hogaan bulshada rayidka ah ee caalamka kalmada xaquuqul insaankuna aysan ka dhamanin carabkooda.

[37] Markii wax la'amaahsanayo lama cayino waqtiga bixinta hadii lacayino wuxuu noqonayaa ribo loona shardiyo in la bixiyo isla qadarkaas xanafiyada agtooda, sidoo kale hadii wax dheerada lagu darayo waa ribo dambi leh wallow hal dirhamba ha ahaate lakiin beeca lama mudeeyey waxaa haboon in la xadido waqtigiisa hadii uu waqtigii dhaafo ee lagu daro siyaado waxay lamid noqonaysaa dayntii ribada ahayd.

ay ahaayeen awoowayaashoodii kuwo juhalo ah.

Waxaa kale oo aan ku tar biydeen doonaa caruurta in aay nacaan culumadooda iyo madaxdooda sidoo kale in aan u sheegna xumaantooda iyo inay ku mashquuleen mac macaansiga gabadha iyo aduunyada in aay leexsadeen hantida shacabka.

13- Waxaa suuroowda in lafaafiyo in Islaamku yasay dumarka miyeeysan qur'aanku ku jirin (Ragu ayagaa haya talada dumarka) Ayada Nisaa/34 iyo miyuusan xadiisku dhihin (Dumarku Waa Shar)[38].

---

[38] Rasuulkeenu(calayhi salaam) wuxuu yiri (Marwadii raacada shariicada waxay ka midtahay nicmooyinka jannada midii hawadeeda raacdana waa jarar) shareecadu waxay ku dirqinaysaa aabaha in uu biilaa inantiisa hadii ay gabar ama garoob midkood tahay, hadii uu diidana waa laxirayaa, hadii uu aabuhu dhinto ama faqiiro waxaa laga rabaa hantiilayaalka qaraabadaa in ay bilaan lawaayo qaraabo biisha waan in dawladdu ay biishaa, baahida dumarka muslimiintaa waxaa dusha islaamku ka saaray ragga sidaas awgeed uma baahana in ay shaqayso gabadha muslimaddaa, sidaas darted waxaa dhaxalka oo dhan qaadan lahaa ragga maadaama ay ayaga saarantahay mas'uuliyadda nolasha oo dhan, hase yeeshee shareecadu marlabaad tixgalin ayey siisay dumarka oo waxay tiri haka qaateen dhaxalka ragga barkii, ninku kuma dirqinkaro xaaskiisa in ay ka shaqayso guriga hawshiisa ama ay qabato shaqo dibadeed, haweentu haday doonayso in ay qabato shaqo ka baxsan gurigeeda uuna u idmo ninkeedu way u banaantay in ay shaqaysato ayadoo asturan ragna aan dhexgalayn, waxay shaqaysato ama ay dhaxal u hesho ama meher loosiiyo ama si kale ay u milkiso waa hantideeda cid khasab uga qaadan kartana majirto, xaraa laguma khasbikaro inay nafteeda ama caruurteeda ay ku biisho waayo waxaa lagu leeyahay biilka nafteeda ragga. maantana dalalka Shuucigaa waxay ku dirqinaya dumarka in ay ka shaqeeyaan shaqooyin culculus si ay noolashooda u maareeyaan sida xoolaha oo kale, wadamada kirishtankaa iyo kuwo kale oo islaam ah ayaa maanta ku shaqaysta dumarka ayagoo oranaya waa xur noolashuna waa wadaag taasi waxay kaliftay in uu baaba'o xariirkii qoyska oo maxkamadu ay lahugmaa muranada qoysaska is furaya.oraahda nabigu way u kalaqaybsantaa sadex qaybood, qaybta koowaad: erayadooda iyo macnahooduba alle agtiisay ka soo dageen waxaana layiraahdaa (Qur'aanka kariimkaa), qayba labaad: waa kuwo erayadooda uu yiri nabigu macnahoodana laga soo dajiyay dhanka alle waxaana la yiraahdaa (**Xadiisul qudsi**), qayta sadexaa: waa kuwo erayadooda iyo macanohoodaba uu yiri nabigeena (calayhi salaatu wassalaam) waxaana layiraahdaa (**Xadiisu Shariif**) tusaale ahaan xadiiskaa uu nabigu yiri (haweentii shariicada raacdaahi waxay ka midtahay nicmooyinka jannada tii nafteeda raacdaana waa shar) xadiiskaa waxaa faah faahiyaya Sheekh Muxyadiin Alcarabi oo ku qoray qayba koowaad ee kitaabkiisa (Al-Musaamaraad), Jaajuuska inkiriisku se wuu qariyay qaybta hore ee xadiiska, hadayse haweenka caalamku ogaan lahaayeen qiimaha iyo raaxada iyo xuriyadda dhanka milkiyadda iyo Furiinka iyo xananada ay diinta islaamku siisay way wada islaami lahaayeen waxayna ka wada shaqayn lahaayeen sidii ay diinta islaamka ugu faafinlahaayeen caalamka oo dhan , waanse ka xunnahay ma'aysan gaarin xaqiiqooyinkaan, allahse wuxuu nasiib ugadhiga ciddii barata diinta islaamka wuuna ugu talagalaly dadkoo dhan .

14- Wasakhda iyo qurunku waxay ka dhashaan biyo yarida waa in lagu dadaalaa in laga hor istaago Islaamka biyo badan, dardaarankii ee uu ku qoray kitaabkiisa kuna saabsanaa qodobadii waa waynaa ee uu qariyay waxa ay ahaayeen:

1. In lasoonooleeyo qabyaaladii iyo gobalaaysigii iyo wixii la mida, sidoo kale waxa uu dardaarmay in muslimiinta niyadooda lagu soo jeediyo xadaarooyikii hore, geesiyaashii hore iyo shakhsiyaadkii caan baxay ee Islaamka ka horeeyay sida in lasoo nooleeyo taariikhdii faraacinada Masar majuusiyiintii Iraan Baabiliyiintii Ciraaq iyo kuwa kale oo badan oo ku saabsan xadaaradihii hore sida Atila iyo Jengiz [bahalnimadooda] [waxaa jira kitaab laga sameeyey liis hore].

2. In lafaafiyo afartii arrimood oo ay kala ahaayen khamriga, qamaarka, zinada iyo hilibka doofaarka iyo [in lasameeyo naadiyaal sporti ah si muuqato iyo si qarsoon in loo faafiyo arrimahaas], sidoo kale kitaabka waxa uu dardaarmayaa in lajoogteeyo xiriirka iskaalmeysiga ka dheexeeya Yahuuda, Nasaarada, Majuusiyiinta iyo Saabi'ada ku waasoo ka shaqeynaya arrimahaas, wasaarada gumaysiga waxa ay siisa mushaar aad ufara badan qofkasta oo ka mid ah jawasiistaas oo ka shaqeeya arrintaasi.

Sidaa darted in la sameeyo xisbiyo siyaasadeed iyo naadiyaal isporti ah, xisbiyada siyaasada iyo naadiyaasha ciyaaraha haddii ay akhrin lahaayeen diinta waqti ay isku dagaalaan ma heli lahayn, taasina waxa ay keeneysaa in midkiin uu kan kale ku dhaawaco jornaalka, Jornaalada waxa ay arimahaas ka helaan lacago badan, qofka lagu arko magaciisa jornalka waxa uu noqonayaa mid geesi ah. Arintaan diinta Islaamka iyo axkaamta way ka soo horjeedaa.

Aadaabta diinta way ka baaba'eysaa qofka sameeyo arintaa, meelahaan lagu sameeyo ciyaaraha, lagdinta waxa ay keeni karaan wax aan ku habooneyn diinta maxaa yeelay waxaa isugu yimaado wiilasha iyo gabdhaha taas oo keeni karto in ay ka dhashaan wax yaabo xun. Arintaan waxa ay

bur burineysaa Islaamka.Waxaan sameyneynaa masaajidyo badan, masajidada waxaan u sameyneynaa si dad wax loogu sheego, waxaan sameyneynaa music Islaami ah, qalab la isticmaalo, heeso Islaami ah iyo radiyo ayaan ku qabaneynaa masaajida. Misaajidyada waxaan u isticmaaleynaa sida dabin oo kale si dadka wax loogu sheego.dadka aada masaajidka iyo naagaha xijaabaniyo kuwa dawlada u shaqeeyo, jasuusiinta ayaa waxa ay ka qoraan war bixin, naagaha xijaaban si shaqada looga ceyriyo, dadka diinta ay ka muuqato ee dhigta jaamacada ma qaataan kuwa helana waxaa lagu dhiba in ay helaan shahaadadooda.Xogayaha waxa uu si qarsoodi ah ula socdaa arintaan, Nejli Muxamed ma sheegin ama kuma adkeenin arintaan.

Waxyaabihii aan ka qorey waxaan ku wareejiye maxkamada kontan sano ka hor in aan la furin ayaa laygula dardaarmey. [Dhismahaan sida masaajidka manaradiisa oo kale ma'ahan.Mesha shanta waqti lagu tukado maalin walba ayaa loo yaqanaa masaajid.salada kadib iyo ka horba wacdiga waa banaanyahay.Wacdiga waa caqiidada ahlusunada muslimiinta ah, mid ka mid ah ahlusunada muslimiinta ayaa u akhriyey kitaab isaga oo fiirinaayo dadka waxa uu u sheegey in ay xifdiyaan kitaabka.Kuwa aan mad'habka lahayn sida jaasuuska Ingiriiska kuwaas in loo wacdiyo ama lala hadlo ma'ahan.Masaajida in lagula shiro iyo in lagu wacdiyo ma banaano.Waxa walba oo ay sheegaan waxa ay kala soo baxaan kitaabka qu'raanka kariimka iyo sunada].

3. In la joogteeyo shaki galinta arrinta jihaadka iyo in uu ahaa jihaadka mid waqtiyeesan uuna dhamaaday waqtigiisii.

4. In laga saro fikrad ah in ay najaaso yihiin gaalada nufuusta Shiicada iyo in loo cadeeyo in uu Allahu Tacaalaa qur'ankiisa ku yiri (Cunnada ahlukitaabka waa idiin xalaal cuntadiinuna waa u xalaal)Almaa'id/5, sidoo kale nabiga xaasaskiisa waxaa ka mid ahayd gabar Yahuudiyad ah magaceeduna yahay (Safiya Binyu Xuyay) iyo xaaskale oo iyaduna Nasaaro ahayd oo lagu magacaabo (Mariya) mana

suroobayso in layirhdo nabiga xaasaskiisa ayaa najaaso ah [39]

5. waa in ay muslimiintu rumeeyaan erayga Islaamka uusan ku koob nayn diintooda, qur'aanka waxa uu ku magacaabay diimaha oo idil dadka haysta in ay muslimiin yihiin maxaa yeelay Allahu Tacaalaa ayaa qur'aankiisa ku yiri: (allow igu dil islaanimo)Yuusuf/ 101 marka uu qur'aanku ka hadlayo nabi **Ibraahim** iyo nabi **Ismaaciil** waxa uu yiri: (Allahayow anaga iyo caruurteenaba dad muslimiin ah nagadhig) Al-baqra /128. Nabi **Yacquub** caruurtiisa wuxuu ku yiri (Hadhimanina Adinkoo Muslimiin Ahayn) Al-baqra/ 132 [40]

6. Sideebay nooga xarrimayaan Kaniisadaha Nabiga iyo Khulafadu ma aysan duminin Kaniisadaha, balse waa ay xurmeeyeen Allahu Tacaalaa qur'aankiisa waxa uu ku yiri (Allahu Tacaalaa hadii uu san dadka qaarkood qaarka kale ku celin lahayn waaxaa ladumin lahaa dhamaan goobaha cibaadada) Al-xaj/40.

7. Waxaa waajiba in la shakki galiyo xadiiska oranaya

---

[39] Hooyo Safiyo way islaamtay oo waxba kama jiraan oraahda jaasuusku uu leeyahay yahuudbay ahayd, Maariya oo kasoo jeeda Masar waxay ahayd adoon uu nabigu suriyaysta wayna islaamta oo Sayid Cumar baa janaaso ku tukaday, hase yeeshee Ahlusunna waxay qabtaa in yahuuda iyo masiixiga dumarkooda laguursan karo, oo sida shiicada ma aaminsana in ay najaaso ay yihiin oo tan qur'aanku sheegay waa dhanka caqiidada ee ma'aha dhanka jasadka.

[40] In larumeeyo waxay ay nabiyadu kala yimaadeen dhanka alle waxaa la yirahdaa (iimaan) waxayna u qaybsamaan labo qaybood: 1- iimaan qalbiga ku eg oo leh lixtiir sida alle, aakhiro, rusul, kutub, malaa'ig iwm, qaybtaas nabiyadii lasoodiray iskuma khilaafsanay yahuda, masiixiyga iyo diimaha samaawigaa oo dhan waa ay ka midaysnaayeen. 2- Islaam (Shariico) oo ah amarada iyo nahyiga cibaadooyinka iyo axkaanta muuqata, qaybtaan islaamka way ku kaladuwanaayeen nabiyaalku oo midwalba wuxuu waday shareeco ama islaam uu ku nasakhayo kii ka horeeyay ugu danbayntiina waxaa nasakhtay shareecooyinkii hore Islaamkii uu layimid nabigeena Muxamed (calayhi salaatu wasaal) oo khatima dhamaan nabiyadii iyo shareecooyinkii oo dhan wuuna jirayaa ilaa qiyaamaha, wuxuuna Allahu Tacaalaa ku sheega suuradda Al-Cimran aayadda 19aad, 85aad in yuhuuda iyo nasaarada aan laga aqbalay wax aan islaamka Nabi Muxamed (calayhi salaatu wassalaam) ahay cidii diidana uu cadaabi doono, qofkastana waxaa lafarayay in uu raco islaamka nibiga markaas jira, maanta cibaadada kaniisaduhu wax ba kama jiraa waayoo waqtigoodii waa la soo dhaafay. shekadan waxaad kaheli karta kitaabka Arabi **(Al-anwaar).**sidoo kale waxaadna faahfaahin ka heli kartaa kitaabka (**Sharxulmawaahib**) ee uu Qoray Sheekh Zarqaani.

(Yahuuda ka saara Jaziiradda Carabta) iyo xadiiska kale oo oronaya (Labo diimood kuma wada jiri karaan Jaziiradda Carabta) hadii Xadiisku saxiix ahaan lahaa Nabigu ma guursanlahayn Yahuudiyad iyo Nasraaniyad, mana la xaajoon Nabigu Nasaaro iyo reer Najraan.[41]

8. Waa in laga leexiyo muslimiinta cibaadadooda laguna shakki galiyo faa'iidadeeda[42], in uu Allahu Tacaalaa ka deeqtoon yahay dadka cibaadadooda.Waxaana waajiba in loo diido Xajka iyo in ay kulmaan dhexdooda sida (salaadaha, jimcooyinka), sidoo kale waa in aad loogu diidaa in ay dhisaan masaajid, qubuuraha, iskoolo iyo in ay cammiraan Kacbada.

9. Waxaa waajib ah in la shaki galiyo Shiicada siismada ay siinayaan shan meeloodoow meel qaniimada ay siinayaan shaqaalahooda shan meeloodoow meel waxa uu khaas ku yahay Qaniimada ee wax xiriira lama laha ganacsiga, waxaa shan meeloodoow meel loo waajibiyay Nabiga ama Madaxwaynaha sida ay culimadu tilmaameen xoolaha dadka, guryaha, qasriyada iyo beeraha inaysan ubaahnaan in laga bixiyo shan meeloodoow meel.

10. waxa habboon in la ihaaneeyo xiriirka ka dhexeeya muslimiinta iyo diintooda Islaamka in lagu soo daro caqiidadooda Bidcooyin iyo in lagu tuhmo islaamku in uu yahay Diin dib u dhac ah iyo Diin fawdo ah sidaa darteed waxaa dib u dhacay wadamadii Islaamka waxaana ku batay dhexdooda dhacca iyo boobka xaaladda [waxa ay ahaayeen in ay aas aaseen dawlado waa wayn mar kasta oo xiriirkoodu daciifo waa ay yaraanayeen].

11. Waxaa habboon in lakala geeyo aabbaha iyo ubadkiisa si ay caruurto uga baxaan tarbiyada diiniga ah ee aabayaashoodii ku tarbiyeeyeen sidaa darteed waxay ahaan

[41] Dib ugu noqo bogagii kan ka horeeyay ayagaan ku sharaxnay in uusan qabin Nabigu (Calayhi salaatu wasalaam) haween yaduud ah iyo kuwo Nasaara ah toona.

[42] Cibaadada waxaa loogudanayaa in lafuliyo amarka alle waasax alle umabaahna ee aadanahaa u baahan, ayaguba kaniisadaha bay ka buuxan maxay islaamka ugu horjogaan masaajidda.

doontaa tarbiyadoodu mid ku jirta gacanteena, hadii ay gacanteena soo gashana waxaa ka tir tirmaysaa caqiidadooda iyo in aan ka goyno culimadooda.

12. Waa in lagu qasbo haweeneydu in ay kasoo baxdo gurigeeda iyadoo xujjo looga dhigayo in xijaabku yahay caadooyinkii Cabaasiyiinta, aysan ahay amar Islaami ah gabi ahaanba,sidaa darteed dadku waxa ay ahaayeen kuwo arka haweenkii Nabiga, dumarkuna waxa ay ka qayb qaadanjireen arrimo kasta.Kadib markay kasoo baxdo haweyneydu gurigeeda waxa lagama maarmaan ah in ay dhallinyaradu ku kadsoomaan gabdhahaas si uu uga dhaco fasaad dhexdooda.Arrintaasina waa saamayn aad u xeel dheer ee tir tirida Islaamka. Marka ugu horaysa waa in ay ka soo baxaan dumarka aan muslimiinta ahayn cabaayadaha ay ku asturanyihiin si ay ugu daydaan dumarka muslimiinta ah.[43]

13. Waxaa waajib ah in la bur buriyo salaadaha lagu tukado jameecada iyadoo loo muujinayo in iimaamku uu fasahaaday iyo in la muujiyo xumaantiisa sidii kalena laga dhex abuuro cadaawad iimaamka iyo jameecada.

14. waxaa waajib ah in qabuuraha la bur buriyo iyadoo xujo looga dhigayo in aysan jirin xilligii Nabiga(*Calayhi Salaatu Wassalaam*)iyo in ay tahay bidco sidoo kale waa in dadka laga leexiyo in ay booqdaan qubuuraha iyadoo lagu shaki galinayo sida tan: qubuurtani in ay ku jiraan Nabiga iyo

[43] Haweenku isma asturi jirin intaysan soo dagin aayadda xijaabka nabigayna u imaan jireen waxna ka baran jireen hadii uu qoys booqdana haweenku way lasoo fariisan jireen nabiga aydoon xijaabnayn, waxaa soo dagtay ayaada xijaabka ee suuradda Axsaab sadex sano ee hijrada kadibna waxaa soo dagtay suuradda Al Nuur waxaan haweenkii lafaray in ay is asturaan waxaan laga reebay in ay raga ajnabigaa lafariistaan iyo in ay lasheekaystaan, nabiguna wuxuu amray in haweenku ay waxay u baahanyihiin ka bartaan xaasaskiisa dahiran, gaaladu waxay dhagrayaan muslimiinta umana sheegayaan in markii danbu aayad ay soo dagtay oo ay dumarku is astureen, waxay oranaysaa xaaskii nabiga ee dahirsanayd.
Umu-Salama waxaan lajoognay xaaskii nabiga ee dahirsanayd Maymuuna waxaa guriga soo garaacay **Ibnu-Umimaktuum** markaas buu Nabigu (Calayhi salaato Wasalaam) yiri (iska xijaaba) markaas baan ku iri 'soo ma'aha indhool aan nagaranayn oo aan na'arkayn' waxuu Nabigu (Calayhi Salaatu Wasalaam)

ku jawaabay (adinku ma'indhahaad la'dihiin soo ma'arkaysaan) waxaa xadiiskaan wariyay Imaan Axmed Binu XANBAL, TIRMIDI iyo Abuuda'uud, marka ayadoo la tixraacayo xadiiskaan ayay xaaraan tahay raggu in ay fiirshaan dumarka ajnabiga ka ah sidoo kale in dumarku fiirshaan ragga ajnabiga ka ah, hasayeeshee aimada madaahibta ayagoo fiirinaya axaadiis kale ay waxay yiraahdeen in dumarku ay fiirshaan cawrada ragga waa xaaraan laakiin fiirada jirkooda kale waa karaahiyo, sidaas awgeed maadaama aysan iska ilaalin Karin raga madaxooda iyo waxa lamidka ah ayaa loo rukhseeyay in ay fiiriyaa in ta ka soo hartay xudunta iyo jilbaha inta u dhaxaysa, waxaana xadiiska nabiga lagafahmayaa xaasaskii nabiga iyo asxaabii in ay iska ilaalinayeen rukhsadda oo ay ugu dhaqmayeen diinta si dhab ah. Sidoo kale wuxuu xadiisku cadaynayaa in (Gaalada) doonaya in ay islaamka burburiyaan ayagoo xujaysanaya in aysan asxaabtu is asturi jirin in taysan aayadda xijaabku soo dagin oo ay caa'isho madax qaawanaan jirta, xijaagkuna uu yahay way ay sameeyeen culimada madaahibta oo xagjir ah, warkoodas in uu yahay been. madaahibta afartaa way isku khilaafeen qeexidda cawrada ragga iyo dumarka ee aan lafiirinkarin ama aan laqaawinkarin, qofkasta oo muslim ah waxaa laga rabaa in uu is asturo si waafaqsan madhabkiisa ayagoo cuskanaya axaadiista nabiga ee ku soo aroortay kitaabka (ashicatu lamacaat) ee oranaysa (nin yuunan fiirin nin kale cawradii naagana yaynan fiirin cawrada naag kale) (caliyow fiiro haraacsiin fiiro kale tanhori adigaa leh tandanbase malihid) (caliyow bawdadaada habanayn hana fiirin qofkale bawdadiis mid nool ama mid dhintay) (allaah hanaclado qofka isqaawiya iyo midka fiiriyaba), cawradda la'isku waafaqsanhay dhanka raga waa inta u dhaxaysa xudunta iyo jilbaha cawrada dumarka lajooga ragga ajnabigana jirkooda oo dhan waxaan ka ahayn wajiga iyo calaacalaha tintooduna waa cawro waana xaaram in lafiiriyo xitaa ishtiha la'aan, rasuulku wuxuu yiri (qofkii isku ekeeya qoom ayaguu ka midyahay) xadiiskaan wuxuu tusaalaynayaa in dadka isku ekaynaya dhanka dhaqanka labiska cadawga islaamka in ay kamidyihiin, taas haku cibraqaato qofaka raacraacaya caadada gaalada ee u bixinaya fanka-qurxan fanaaniina u baxshay dadka ku hawlan, waxaa ku qornayd **(Kiimiya Sacaadaad)** "in ay gabdhuhu ubaxaan banaanka ayagoo madax, gacmo, iyo lugo qaawan oo wata dhar ku dhagan oo isqurxiyay isna carfiyay waa xaaraam, waxaana danbiga la wadaagayay iyo cadaabka cid walba oo u ogalaatay sidaas ku baxaan haday tahay aabe, hooyo, nin, walaal, waana lawada cadaabayaa, hadayse tooba keenaa oo ay wanaag sameeyaan Allahu Tacaalaa wuu u dhaafayaa Allahu Tacaalaa wuu jecel yahay dadka u tooba keenah. qofkasta oo muslim ah waxaa ku haboon in uu ogaado in qawlkiisi iyo ficilkiisu uu waafaqsanyahay shareecada islaamka iyo in kale, hadii usan aqoona waa in uu waydiiyaa kana bartaa culimada ahlusunna ama uu akhriyaan kutubtooda, waayoo hadii uusan camalku waafaqsanayn shariicada qofku kama badbaadayo in uu ku dhaco danbi. Xibanaha ay waajibka tahay in lagu asturo salaada iyo dibadeedaba waxaa layiraahdaa (maxalu cawro) qofkii dhaha shareecadu malaha wax cawro layiraahdo wuu gaaloobayaa sida ay madaahibtu isku raaceen, bawdaduna cawro kuna aha madhabka xanbaliga. Haweentu dahmaanteed waa cawro waxaan wajiga iyo gacmaha ka ahayn "calaacalaha" sidaas bayna afarta madhab isku raaceen, marka in ay is qaawiyaan oo ay ku horheesaan ragga hortooda waa danbi wayn yaysanba gaalnimo noqon hadaysan xalaalsan, qofkaan ogaya waa in uu bartaa oo tooba keena oo is asturaa.

Imaamadii wanaag sanaa.

Nabiga waxa lagu aasay meel udhaw qabriga hooyadii, Abuubakar iyo Cumar waxa lagu aasay Baqiic, Cusmaan lama yaqaano mesha uu qabrigiisu ku yaalo, Xuseen madaxiisu waxa uu ku aasan yahay Xanaanee, jirkiisa kalane lama yaqaano meesha uu ku aasan yahay sidaas oo kale waa in lagu sameeyaa qubaaraha kale ee ay qadariyaan muslimiintu.

15. Xabaalaha baqiicna waa in laburburiyaa oo dhulka lala simaa nabiga ehelkiisa waa in laduraa oona lashaki galiyaa ku nasab sheegashada ay nabigu ku nasab sheeganayaan waa in loo xiraa dadka aan ahayn ehelka nabiga cimaamado madoow iyo cimaamado cagaaran sidii ay isugu ekaadaan ayaga iyo ahlu baydka nabiga sidaasna ay noga shakiyaan ayna umala xumeeyaan ahlubaydka nabiga nasabkooda. Sidoo kale waa in laga siibaa cimaamadaha raga diinta madaxyadooda iyo Asharafta si uu ulumo nasabka ahlu baydka nabiga, raga diintuna Kama helayaan dadka wax ixtiraam ah.[44]

---

[44] Wuxuu yiri caalimkii waynaa **Sayid Cabdul Xakiim Al-Arwaasii** oraah uu ku qoray (**Al-Asxaabul Kiraam**) oo uu ku alifay İstanbuul " kabadha Rasuulkeena (Calayhi Salaatu Wasalaam) ee Fadimatu Zahraa iyo Faraceedu ilaa iyo qiyaamo ayagaa ahlu bayda waana waajib maxabadoodu caasiyaalba ha ahaadeene jacaylkooda iyo kaalmahooda qalbiga, jirka iyo maalkaba iyo ixtraamkooda, ilaalinta xuquuqdooda waxay sababaan kaatimo iyo iimaan in lagu dhinto, waxaa ku ooli jirtay magaalada Xamaa ee dalka Suuriya maxkamad u gaar ah asharaafta xiligii cabaasiyiintana waxay ku taalay Masar, waxaa loogu naynaasaa faraca Sayid Xasan (**Shariif**) faaraca Sayid Xusena (**Sayid**), waxaana cimaamadda cad gaar ku ahaa Asharaafta, Cimaamadda cagaaranna Saadaadka, adoonta ay asharaaftu xoraysay waxay u dhigmeen dhanka maraga halkii qof labo markhaati xaakimka hortiisa, xilgii Suldaan Cabdul Majiid Khaan ayaa Rashiid Baashaagii Maasooniga ahaa uu kansalay maxkamadahaas asgoo amar kaqaatay Ingiriiska, xilgaas wixii ka dan beeyay lama kalasaari Karin ashraafta iyo dadka sheeganaya ee been abuurkaa waxana ku faafeen dadkii ben abuurka ahaa caalamkoo dhan, waxaa ku qoran kitaabka (**Fataawii alxadiisiya**) xilgii hore waxaa ladhihi jiray Ahlu-Baydka Asharaaf, tusaale ahaa ' Al-Shariif Al-Cabaasii' 'Al-Shariif Al-zaynilii'
Madaxdii Fadimiyiinta lama oranay asharaf wixii sayid xasan iyo xuseen ku abtirsada waa la'oranayay, wuxuu faray suldaakii Masar ee Turkiga ahaa Ashraf Shacbaan Bin Xuseen sanadkii (773 H 1371 M) in ay xirtaan Sadaadka cimaamad cagaaran si lookala saaro ayaga iyo Asharaafta sidaas baana caado noqotay laakiin malaha saamayn sharci) waxaad faahfaahinta baabkaan ka helikartaa (**Mir'aatulkaa'inaat**), (**Al-Mawahib Al-Laduniyah**) iyo Sharaxa Zarqaani Fasalka Sadexaas Maqsadka todobaad.

16. Waa in labur buriyaa meelaha ay qadariyaan shiicada laguna tuhmaa in ay taha bidco xun iyo baadinimo mana aysan jirin xiligii nabiga.

17. waa in loo sheegaa laguna qasbaa in ay muslimiintu ay yihiin kuwo xor ah qofkastana in uu xor uyahay in uu sameen karo waxa uu rabo aysan waa jib ahayn in la is amro wanaaga lana iska reebo xumaanta iyo in aysan baranin arkaanta Islaamka waana in laga dhaadhiciyaa (in nabi Ciise Calayhi Salaam uu haystay diin gooniya nabi Muusana uu haystay diin gooni ah), wanaaga in la'is amro layskana reebo xumaanta waxa ay gaar ku tahay madax iyo salaadiinta aysan dadka oo idil u banaanyn.

[Islaamka in la barto dadkana la baro waa qasab, waana shaqada ugu horeyso ee qofka muslimka ah].

18. waa in loo diido in ay muslimiintu tarmaan iyada oo loo xadidayo dhalmada isla markaana aan loo ogolaan in uu ninku uusan guursan karin wax ka badan hal naag ah iyo in lagu adkeeyo guurka sida in uusan xaq ulahayn ninka carabka ahi in uu guursado gabar Iranah iyo sidaa lidkeed, sidoo kale waa inuusan guursan gabar Carabiyad ah.

19. Waxaa waajiba in aan la'ogolaanin faafidda Islaamka, waa in la faafiyaa oraahda dhahaysa in uu Islaamku uu khaas ku yahay carabta sidaa darteed Allahu Tacaalaa qur'aanka waxa uu ku yiri: (Quraanku Sharaf buu u yahay adiga iyo qoomkaaga) Zukhruf/44

20. Waa in la ciriiriyaa hay'adaha khayriga ah waa in arimahooda la galiyaa gacanta dawladda si uusan qofku xaq ugu yeelan in uu dhiso masaajidyo, iskuulo iyo wixii la mida sida sadaqada jaariyada ah.

21. Waa in shaki lagaliyaa lanabadalaa waxna lagu daraa qur'aanka lana faafiyaa musxafyo quraan oo been abuur ah oo wax lagu daray waxna laga dhimay ayadoo ladaliilsanayo nabiguba wuu ku darijiray wuuna kadhimijiray, waa in laga

saaraa aayadaha xaqiraya Yahuuda, Nasaarada iyo gaalada kale, iyo aayadaha ka hadlaya jihaadka iyo macruufka oo la'isfaro[45] Qu'raanka waa in loo turjimaa luqadaha kala duwan oo dadka laga celiyaa akhrinta Qu'raanka carabigaa. Sidoo kale waa in laga joojiyaa aadaanka, ducada iyo salaada carabigaa dalalka aan carabta ahayn.waa in axaadiista nabiga lashaki galiyaa oo sida qur'aanka loo khaldaa oo laturjumaan lana duraa.

Aad baan uga helay kitaabkaan waxaana layiraahdaa (**sidee baan ku burburinaa Islaamka**) waxa uu igu yiri xoghayihii markii aan usoo celiyay kitaabkii aan u muujiyay la yaabka kitaabka " ogow in arrintan ay ku koobneyn adiga balse ay jiraan ciidama ugaar ah howshan oo kale ciidamada ay diyaarisay wasaaradu ilaa iyo hada oo shaqadan loo diyaariyay waxa ay ka badan yihiin shan kun oo qof waxa ayna ka fikiraysaa in ay kor dhiso tiradooda ayana gaarsiiso (boqol kun) boqol kun.Maalintii ay gaarto tiradaasi boqol kun waa maalinta aan la wareegi doono muslimiinta oo dhan iyo wadamada Islaamka waxaan u burburinaynaa burburin aad u ba'an, kadibna waxa uu raaciyay xoghayihii isaga oo dhahaya

[45] Ingiriiska alle ma waafajin hawshaas, waayoo Allahu Tacaalaa wuxuu balan qaaday in uu ka xifdinayo qur'aankiisa badbadalid iyo isdaba marin, injiishase alle mabalan qaadin in uu ilaalinayo, sidaas darteed waxaa laqoray injiil labadalay, waxaa ugu horeeyay oo badalay nin yahuudi ah oo la oran jiray (**Bolas**) way joogowday badalidu sanad walba, badalidii iyo khaldidii ugu waynayd waxaa ku sameeyay golihii baadariyaalka ee ka koobnaa 318 baadari waxay ku kulmeen (**İzniik**) sanadkii (325 m) waxaana amarka badalida (khaladida) baxshay boqorkii roomaaka Istanbuul ugu horeeyay ee la oranjiray (**Qostantiin**), sanadkii (931 h) (1524m) waxaa madhab cusub oo layiraahdo (Borotosan) aasaasay baadarigii Jarmalka ahaa ee la oranjiray (Lotormarton), masiixiga raacsan Boobka Fitikaanka waxaa layiraahdaa (Kaatholiik), waxaana in badan taariikhda soo maray in dagaal dhexmaro Kaatholiga iyo Barotostanka waxaana caan ah xasuuqii (Sanbaartelma), (Iskojyaa) iyo gumaadkii maxkamadihii (Ingazisiyon) waa maxkamado kaatholiku lahaa oo qadiim ah, sidoo kale waxaa ka goostay Boobka Fitkaanka baadarigii istanbuul (Mikha'il Kirolariyos) sanadkii (446 h) (1054 m) wuxuuna aasaasay kaniisada (Orthodokiska), ninka layiraahdo Yacquub ee dhintay sanadkii (571m) wuxuu aasaasay firqada layiraahdo (Suryaaniya), Maaroon kii dhintay sanadkii (405m) wuxuu sameeyay firqada Suuriya (Maaroniyada), sanadkii (1872m) waxaa firqa cusub aasaasay Shaarol Roslin kii maraykan ka ahaa kooxdaas oo la'oranjiray (Shuhuudu Yahuu).

waxa aan kuugu bishaaraynaa waqtiga ugu fog oo ay u baahantahy wasaaradu si'ay udhamayso qorshahan waa muddo halqarni ah, hadii aanan gaarin waqtigaas caruurteena ayaa arki doonta maxaa yeelay maxaa ka wanaag badan oraahdii dhahaysay (waxaa beeray dadkale waana cunnay aniguna waan beeraynaa si dadkale ay ucunaan), hadii uu hanto Ingirisku burburinta Islaamka iyo dhaca wadamadooda waxa uu raaligaliyay Kirishtaanka waxa uuna badbaadiyay halaagii socday 12 qarnni.

Waxa uu yiri fa'ido ma aysan soo kordhin dagaaldii ay ku qaadeen Saliibiyiintu wadamada Islaamka sida ciidankii Mongoliyiinta ee uu hogaaminayay Jingis ee weeraray Islaamka.

Waxa uu ahaa mid aan wax xikmad ah iyo diyaar garow midna aan ku dhisnayn, laakiinse hada madaxdeenu waxa ay ujeesatay in ay ka fikiraan sidii ay uburburin lahaayeen Islaamka oona looga burburin lahaa xagga gudaha.

Qorshayaal xeel dheer iyo sabir dheer iyo dhameystir wanaagsan, waxa aan u baahanahay go'aan millatari ugu danbayn markaas oo ay noqonayso burburinta Islaamka ilaa ay ka noqdaan kuwa aan isku keeni karin awoodoodii kadibna waxa uu yiri xoghayihii madaxdeena Istanbuul joogta kuwa ugu waaween xaga xikmada iyo howlkarnimada waxa ay sameeyeen isla qorshahaan oo kale waxaa ayna dhex gal ku sameeyeen ummada Muxamadiyada waxa ayna fureen iskoolo lagu tarbiyeeyo caruurtooda, waxa kale oo ay dhiseen Kaniisado waxa ayna ku faafiyeen dhexdooda khamriga, qamarka iyo xumaha.

Waxa ay dhiseen kooxo kubadda cagta si'ay uga mashquuliyaan dhalinyarada muslimiinta ahi diintoodii waxa ayna isku direen madaxda iyo shacabka sidoo kale guryaha salaadiinta iyo maamulada waxa ay ka buuxiyeen gabdho Masiixiyiin ah si ay u fitneyaan darteed iyo si'ay u daciifto midnimadooda, isku duubnitooda. Waxaa xididahii

[46] Si ay u burburiyaan ingiriisku labadii dowlad ee islaamka ee waawaynaa Hindiya iyo Cusmaaniyaddii, wuxuu dhaqan galayay 11kii qorshe ee ay ugu talagaleen tirtirida islaamka, waxayna sabab u noqdeen aasaasmidda firqooyin fasaadsan oo islaam ah sida (**Wahaabiyada**),(**Qaadiyaaniyada**), (**Jamaacatul Tabliiq**) iyo (**Jamaacalislamiya**) ee ka jirta Hindiya, markaa kadibna Ingiriisku wuxuu ku guulaystay in uu ku qabsado qabsado Hindiya si sahlan uuna dumiyo dawladdii islaamka ee waynayd, culimadii islaamkana xabsi buu wadagaliyay ilaa ay ka dhintaan, suldaankii islaamkana wuu xiray, labadiisi cunugna wuu googooyay, hantidii qaaliga ahaydna iyo kaydadkii muhiimka ahaa ee dawladda ee lakaydinayay qarniyo wuu boobay, waxayna Landan ugu rarteen maraakiib, maanta qabrigaa (**Taajmaxal**) taariikhiga ahaa ee ku yaalay Akraa uuna u dhisay (1041h - 1631m) Boqr Shaah Jihaan xaaskiisii Erjamanda Begum waxaa marsan dhoobo halkil ay marsanaanjirtay maas, zabarjed iyo yaaquud dhamaana waxaa ka fuqsaday Ingiriiska, taasina waxay tusaalaynaysaa waxshi nimada Ingiriiska, hantidii ay xadeena waxay u adeegsadeen burburinta islaamka, sidii gabyaagii uu u yiri " hadii daalimku xoogiisa uu haysto madluumku rabigii buu haystaa " cadaaladii Allahu Tacaalaa ayaa soo ifbaxday, waxayna la kulmeen abaalmarintooda dagaalkii labaad ee aduunka, markii ay ka baqeen in u qabsado Jarmalku ayay waxay hantidii, hantiilayaashoodii, caruurtii waziirada, ragii kaniisadaha ugu waawayneed iyo tobanaan kun oo cadaw islaamka u ahaa ku ku rareen markab wayn ayagoo u cararaya dhanka maraykanka ayay qaraxday markabkii oo uu ku dhexdagay miinooyinkii uu u dhigay badda dhexdeeda (**Graf Von Spee**) , waxaa lamid ah labadii markab ee dagaalka ee uu lahaa Jarmalka ee ku dagay badda Atlantiga, dagaalkii kadibna waxay faraha ka qaadeen dhamaan dawladihii ay isticmaarsan jireen ayadoo ladhaqan galinayo qaraarkii Qaramada Midoobay sidaas bayna ku waayeen hantidii ay ka tacabtay caalamka islaamka Wasaaradda Isticmaarka Ingiriiska sanawaad badan, waxayna ku koomeen jasiiradda Biridan waxayna gaareen hiir latashiilo cuntada, waxaana soo xiganayaa oraahdii taliyihii ciidanka sanadkii 1948dii **Saalix Omrotaq Baasha** martiqaad ingiriiska uu u sameeyay " waxaan wafdi rasmi ah ku ahaa Landan cunto aan ka dhargana kama helijarin markaan soo laabtay oo aan ayaan talyaaniga uga dhargay baasto ".

Senaüllah-i Dehlevi (Rahmatullahi Calayhi - Allaah ha u naxariisto) (**Suratul Ma'idah)** ayada sideedanaad ayada kariimka ah tafriiskeeda oo ah (haddi ay rumeyn lahaayeen Allah subxaana watacaaalaa iyo nabigiisa (Calayhi Salaatu Wasalaam) iyo wixii lagu soo dejieyey kama sheeyeen owliyo lakin in badan o uga mid ah waa faasiqiin. Maxaa yeelay shirkida diinta ma ogala waana in uu qof walba muu jiyaa xushmada ay leedahay (**Cibadada**) sidaa ayey noo shegeysaa diinta.Mushrikiinta iyo yahuuda waxay cadow ku yiin muslimiinta. Muslimiinta ayey dilaan wadankooda iyo masaajidkooda way bur buriyaan. Quraanka kariimka ahna way gubaan.)

Imaam Rabani "rahmatullahi caleyhi" boga saddexaad sida ku qoran baalka waxay noo sheegeysaa (Allah in aan cibaadada wax kale lala wadaajinin, qofkii wax la wadaajiyo cibaadadiisa in uu shirki sameeyey. Diintaan iyo nabigeeda qofka aan heysanin waa mushrik.)

Hada adduunkaan galada ku nool dhamaantood, Nabi Muxamed Calayhi Salaatu Wasalaam kuwa aan rumeynin, waa gaaalo. Kuwaas badankood waxay rumeysanyihiin iyo ay jiraan saddex Illah madama ay sidaa leeyihiin waa gaalo.

Nabi Ciise waa adonka Ilaah iyo nabigiisa kuwa sidaa leh (**Ahlu kitaab**).Dhamaantood waxay cadow ku yihiin Islaamka.Waxa dadka soo weeraro waa Ingiriiska.

Gaalada hada kow iyo oban su,aal ayey ku ilaalinayaan dawladaha muslimiinta oo dhan. 1412 h. = 1992 m. Sanadahaas warbixin ayan ka qaadaney. Bangaladesh culimada ku nool ee muslimiinta ah kuwaas jawaab ay qoreen ayaa waxay uga soo horjeesteen culimada kale.

Istanbul (**Hakikat Kitabevi**) oo ah xarunteena, (**El-Ekazib-Ül-cedide-tül-Hiristiyaniyye**), magac yadan ayaad ka heli karta jawwabta, (**Es-sirat-ül-müstakim**), kitabadaan ayan si wada jir ah ugu dabacney, aduunka oo dhan ayan u dirney.

Allahu Tacaalaa qur'aankiisu kariimka waxa uu ku leeyahay (waxaad arkaysaa dadka ugu neceb islaamka in ay yihin yuhuuda iyo mushrikiinta, waxaana ugu dhaw dhanka jacaylka Nasaarada waayoo waxaa ku jira Baadariyaal iyo Culimo aanan kibrayn) Al-ma'ida:86

Nasaarada maanta joogta dhamaantood waa gaalo diididda ay diideen darteed Nabi Muxamed (*Calayhi Salaatu Wassalaam*) intooda badani waa Kirishtaamiin dhihida ay dhaheen darteed nabi Ciise Calayhi Salaam waa Allahu Tacaalaa wiilkiisa.

Maktabadeena (Maktabatu Al Xaqiiqa) ee Istanbuul ayaa udirtay jawaabihii dunida oo idil iyadoo oo ku qortay kutubka magaciisu yahay (Al-Akaadiib Al-jadiidah Al-khuraasaaniyah).

FASALKII TODOBAAD

Xoghayuhu wuxuu itusay sirtii labaad ee uu ii balan qaaday ee aan aad ugu hilowsanaa kadib markii aan ladhacay sirtii 1'aad, sirta labaadna waxay kakobnayd konto waraaqood oo lagu qoray siyaasado qoto dheer oo loogu talagalay in lagaga taqaluso Islaamka iyo musliminta hal qarni gudahiis ilaa uu Islamka kanoqdo sheeko markii uu ahaa xaqiiqo kadib qodobadaasna waxaa loo diyaariyey inay ku hawl galaan ragga ay udirsayso wasarada gumaysiga inay u isticmaasho arimaha Islamka waxayna kakoobnaayeen toban iyo afar qodob waxayna kadigtay wasaaradu in lafaafiyo sirtaas waxayna amar adag kubixisay in la qariyo oo aysan musliminta ogaan si aysan difaac uga galin qodobadiina waa kuwa soo socda

1- In isbahaysi adag lala yeesho qoysaska Ruusiya si loola wareego gacan kuhaynta gobalada Islamka sida Bukhaara, Tajakistaan, Armiiniya iyo Horasaan iyo waxii laxariiro sidookale in isbahaysiga lasii adkeeyo si looqabsado wadanka Turkiga oo xaduud laleh Ruusiya.

2-Isbahaysi adag in lala yeesho Faransa iyo Ruusiyaba si loo dajiyo kaarto gudaha iyo dibadadba Islamka loogu burburiyo.

3-In laga dhex beero khilaafaad waawayn iyo colaad labada dawladood ee Turkiga iyo Iraan lagana dhex huriyo holacyo colaadeed sida kooxaysi midib takoor IWM, waana in laba shacab oo kasto ama laba qabiil oo kasta oo muslimiinta kawada tirsan ama labadii magaalo oo kasta colaad lagu dhex beero waa in labuunbuniyaa khilaafka madaahiibta Islamka lagana dhigaa mid la iskulayo.

4-Waa in qaybo kamid ah magaalooyinka Islamka gacanta loogaliyaa dad aan Islam ahayn.

a) Waa in magalada madina munawara Yahuuda gacanta loogaliyaa.

b) In magalada Askandaniyah gacanta loogaliyaa Kirishtaanka.

c) In magalada Yasdalsalsershat gacanta loogaliyaa furus.

d) Magalada Camarana saa'ib gacanta loogaliyaa.

e) Kormanshahna lasiiyo Nasiiriyiinta Cali Binu Abii Daalib Allah uyaqaano.

f) Musulna lasiiyo Ziidiya.

g) Qaliijul Farisna lasiiyo Hunuudda.

h) Tarabalisna lasiiyo Duruuz.

i) Kaarsna lasiiyaa Calawiyiinta iyoArmaaniyiinta

j) Masqadhna lasiiyo khawaariijta.

Kooxahaasna waa in lagu xoojiyaa maalgalin hub kaartooyin dagaal iyo khibrada dheeraad ah si'ay u noqdaan qodax kutaagan Islamka kadibna lagu balaariyo wadanka Islamka oo dhan si'ay Islamka u burburiyan.

5-Kaarto in loodago sidii loogu qaybin lahaa labda xukumadood ee Turki iyo Iran xukumada yar yar ee iswada qilaafsan sida ay hadaba Hindiya tahay siday horay u dhihi jireen gumaystuhu {qaybi oo xukun} ama {qaybi aad burburiside}

6-In lagu dhexbeero Islaamka dhaqamo iyo madaahiib baadil ah taasina waxay ubaahan tahay fikrad hoose oo looga dhigo dadyoow kala dhaqamo duwan tusaale ahaan waxaa lagama maarmaan ah in afar diimood lagu beero deegaanka shiicada sida

1) Dad caabudo Xuseen Binu Cali oo Allah uyaqaan inuu Xuseen ahaa

2) Kuwa caabuda Jacfarul Saadiq

3) Kuwa caabuda mahdiga lasugayo

4) Kuwa caabuda Caliyul Ridaa

Kooxda kowaad makaanka u manaasib ka ah in ladajiyo waa Karbala

Kooxda labaadna Isfashaan

Kooxda saddexaadna Samaraa

Kooxda afaraadna Horaasaan

Sidookale waa in laga dhigaa madaahiibta afarta ah ee suniga ah diimo madax banaan oo wax xariir ah uusan kadhaxayn khilaafaad dhiig daadiyana lagu dhex beero sidookale waa in firqo cusub lagu abuuro cariga Najdi laguna dhexduugo madahibta afarta ah waxyaabo baadil ah ilaa ay koox kasta oo iyaga kamid ah ay isu aragto in ay ayaga muslimin yihiin inta kasoo hartayna ay kufaar yihiin in lala dirirana ay waajib tahay

7-Waa in lagu faafiyo fasaad iyo dhaqamo xun xun diinta muslimka dhexdeeda sida: - zinada, liwaadka, khamriga, iyo khamaarka.

Wadada ugu dhaw ee lagu gaari karana waa in la adeegsado dadkii diimaha hore haystay oo wadamadaas kusugan waa in looga helo ciidan wayn arinkaas.

8- waa in muhiimad lasiiyaa sidii loogu beeri lahaa wadamada Islamka madax xun xun iyo hoogamiyayaal dulmi badan loonadajiyo qawaaniin diidayso raacista diinta Islamka si'ay u noqdaan adeega yaasha wasaarada oo ay unoqdaan waddo aan u marno danaheeno wadamada Islamka, qawaaniintaana waa inaan xoogga saarnaa illaa ay kanoqoto raacidda shareecada Islamka danbi cibaadaduna dibdhac haday inoo suuro gasahana madax wayna aan Islam ahayn waa inaan hogaanka u dhiibnaa sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah inaan Islamka dhex gaysanaa shaqsiyaad isu muujiyo sidii ahlu diin kadibna aan kudadaalno sidii ay xukunka wax uga qaban lahayen si'ay u dhaqan galiyaan danaheena[47]

[47] Arintaas way ku guulaysteen Ingiriisku waxaan u suurtagalay in ay xilal sare ka gaarsiiyaan xukunka Cusmaaniyada xibno ka tirsan Maasooniyo sida Mustafaa Rashiid, Cali, Fu'aad, Talcat Baashaa, iyo kuwo asalkoodu yahay Yuhuud, Armeeniyiin, sidoo kale waxay Maasooniyo ka dhigeen culimo looga danbeeyo diinta, sida Cabdullahi Jevdeed, Musaa Kaazim iyoZiyaa Gogkalb iyo Cabduh gii Masar kuwaan waxa ay ahaayeen culimada diinta oo kale.

9- waa in lareebaa luuqadda Carabiga intii suura gal ah lana hor mariyaa luuqadaha kale sida luuqada Faarisiga, Kurdiga iyo Baashtuuga waana in dib loosoo nooleeyaa luuqadihii asliga ahaa ee kuxirnaa ee wadamada Carabta waana in labalaariyaa lahjadaha maxaliga ahee kafarcamo luuqadaha Carabiga waayo taasaa waxay tahay tan kaliya ee lagu tirtiri karo luuqada fasiixa ah ee kitaabka iyo sunada lagu fahmo.

10- waa inaan kuyeelanaa xafiisyada dawlada shaqaale ilaa heer lataliyayaal gaarsiisan si'ay noogu suura gasho inaan lataliyayaasha usiimarino hadafka wasaarada gumaystaha wadada ugu wanaagsan ee an umari karno waa adoomada marka waa inaan adooma kutaba barnaa wasaarada kadibna ku iibinaa suuqa adoomada ee muslimiinta oo an waliba ka gadnaa dadka ugu dhawdhaw madaxda Islamka sida caruurtooda xaasaskooda iyo qaraabadooda si'ay adoomadaas lasoo taba baray inyar inyar igu dhawaadaan madaxda kadibna ay noqdaan hooyooyin kii dhalay madaxdaba iyo koriyayaashoodii oo ay u hareereyaan madaxda sidii jijin gacan kujirta oo kale.

11- Balaarinta hay'adaha tabshiirka oo ladhex galiyo nooc walbo oo bulshada kamid ah gaar ahaan {muxaasibiinta, dhakhaatiirta, muhandisiinta IWM waa in laga dhisaa Kaniisado, iskoolo, isbitaalo, maktabado iyo hay'aad sama fal dhulalka Islamka dhirir iyo balacba malaayiin kutub oo Masiixiyi ah waa in lagu dhex faafiyaa wadamada Islamka looguna qaybiyaa si lacag la'aan ah waa in lagu dadaalaa taarikhda Masiixiyada sidii logarab dhigi lahaa taarikhda Islamka waa inaan ku abuuranaa jawaasiis iyo shaqaale isbitalada iyo goobaha cibaadada ayagoo kushaqaynayo magaca baadariyaal iyo soorooyin muhiimadooduna ay tahay sahlida xiriirka iyo dhaqdhaqaaqa Masiixiyada iyo ogaashaha dhaqdhaqaaqa iyo afkaarta iyo xaaladadaadka musliminta sidookale

waxaa lagamamaarmaan ah nadaaminta ciidamo aqoonyahana Masiixi ah si'ay u fool xumeeyaan taarikhda Islamka uguna dhex beeraan kutubta Islamka waxyaabo baadil ah markay sifiican ubartaan kadib .

12-In lakibriyo dhalinyarada musliminta gabdho iyo wiilalba laagana shaki galiyo diintoda akhlaaqdoodana laga fasahaadiyo dhinaca iskoolaadka buugaagta [goobaha kubadda lagu ciyaaro iyo shaleemooyinka] loona sameeyo saaxiibo aanan muslimiin ahayn oo u diyaariyo arinkaas waxaa kaloo lagama maarmaan ah hay'ado dhalinyaro oo sirdoon u ah Yahuudda iyo Masiixiyada oo lasameeyo si loogu ugaarsado dhalinyada musliminta wada walbo.

13-waa in laga huriyaa dagaalo iyo kacdoono gudaha iyo guryaha musliminta iyo xaduudaha muslimiinta iyo gobolada musliminta dhexdoonada waa in laga sameeyaa dagaalo aan waligood dhamaan si'ay ubaaba'do awooda muslimka ugana gaabiyaan kufakirka horumarka iyo midnimada sidookalana hoos u dhac uu kuyimado dhaqaalahooda dhalinyarada iyo dadka firfircoona ay u baaba' aan fawda iyo kala danbayn la'aana ugu baahdo.

14- waa in la bur buriyaa ilaha daqaalaha oo musliminta oo dhan sida beeraha iyo maciishada, biya xireenadana waa in laburburiyaa wabiyadana waa in la tir tiraa shaqo la'aan iyo baaga muudo Islamka dhexdiisa waa in lagu baahiyaa salaadaha oogistoodana laga cayriyaa loona sameeyaa goobo fiidsi iyo fadhi kudirir cabidda khamrigana dhaqan looga dhigaa, qodobadaan waxay ahaayeen kuwa lafaahfaahiyey [sifiican sida sawiro muuqaalo ayey ku sharxeen. Afar iyo tobankaan waxyaalood waxa bur buriyey dawladii Cusmaaniyiinta. Dawladihii la soo dhisey mamulo cusub ayaa loo magacaabay.Kuwan waxa ay ahayeen gumeysigii kuwa

uu ukala qeybiyey afar iyo toban qeybood].

Xoghayihii wasaarada waan uga mahad celiyay inuu koobi igasiiyey qoraalkii waxaana kusii nagaaday magalada Landan mudda bil ah kadibna waxaa ii yimid amar kasoobaxay wasarada oo la'igu amrayo inaan aado dhinaca Ciraq markale si'aan ugasoo dhamaystiro hawsha Muxamed Cabdul Wahaab Al Najdi, xoghayuhuna waxaa uu i amray inaanan kuxad gudbin xaqiisa wax yarna maxaayeelay cadayma badan oo u kahelay jaajuusyadii kale ayaa waxay cadaynaysay sheekhu inuu yahay shaqsi doqon ah oo aad ugu haboon in loo adeegsado fulinta arimaha wasaradda kadibna waxaa uu igu yiri xoghayihii sheekha si cad ula hadal waayo caamilkeeni Asfahaan joogay aya sifiican ula hadlay una sobandhiagay sirtii waana uu aqbalay sheekhii laakiin waxaa uu shardi kadhigay in laga qariyo arinta xukuumadaha iyo culumada ay suuragal katahay inay soo weeraraan markay ogaadaan afkaartiisa iyo in maal galin kufilan iyo hub lasiiyo iyo inaan uyeelno maamul hooseed yar ugana samayno agagaarka Najdi wasaaraduna way ka aqbashay arimahaas oo dhan xaqiiqadii markii la ii sheegay arinkaas waxaan kusigtay inaan haragayga ka dhexbaxo kadibna xoghaya waxaan ku iri hadaba xageen hawsha kabilaabaa maxaan u diraa sheekha shaqadaydase hada maxay tahay xoghayaha waxaa uu igu yiri wasaarada waxay diyaarisay qodobo si sheekhu ufiiriyo qodobadina wa sidan soosocoto.

1- Gaalaysiinta musliminta oo dhan iyo banaynta dhiigooda, maalkooda,sharafkooda iyo qafaalashadooda oo ayna banaantahay in la'adoonsado ragga iyo dumarkaba.

2- Kacbada in ladumiyo ayadoo lagu sheegayo in ay sanamtahay[48] hadii ay suurowdo dadkana laga celiyo

[48] Sanam waxaa layiraahdaa saqsi ama haykal lacaabudo oo loo sajuudo muslimiintu macaabudaan kacbada ee way u jeedsadaan marka ay alle caabudayaan waxayna akhriyaan faatixada oo oranaysa (Eebow Adiga Oo Qura Baan Ku Caabudayaa Adiga Kaliya Ayaa Kaalmo Ku Waydiisaanyaa)

xajka wadooyinkana loo dhigo burcad qabiileed dadka xajka u socda si'ay ulaayaan maalkoodana uboobaan.

3- In laga shaqeeyo sidii jabhada loogu kicin lahaa khaliifka Islamka dadkana looga horkeeni lahaa arinkaasna, waa in loodiyaariyaa ciidama sidookale waxaa lagama maarmaan ah in lagula dagaalamo asharaafta Xijaaz si kasta oo suura gal ah awoodoodana la baabi'iyo.

4- Qubadaha iyo qubuurahana laburburiyo iyo meelkasta oo musliminta ay waynayyaan oo kutaalo Mako iyo Madiino ama magaalooyin kale ayadoo ladhahaayo waa sanamyo iyo shirki waa in lafududaysto shaqsiyada nabi Muxamed iyo Khulafadiisa iyo afarta iimaan ee madaahiibta.

5-Waa in fawdo iyo argagaxiso lagu dhex abuuro wadamada Islamka.

6- Waa in lafaafiyaa kutubbo qur'aan ah oo wax lagu daro waxna laga nusqaamiyo sida axaadiistaba layeelay.[49]

Xoghayuhu waxaa uu igu yiri markii u iicadeeyey barnaamijkan kadib yuusan ku argagax galin barnaamijkaan wayn maxaa yeelay anaga waajibaadkeenu waa beerista abuur baabi'yo Islamka waxaana dhamaystiri doono jiilalka soosocda waayo Muxamed kii nabiga ahaaba waxaa uu ahaa hal nin oo kaliya waxuuna kusameeyay caalamka isbadal wayn Muxamed Cabdi Wahabka reer Najdina aan kadhigno sidii Muxamed kii nabigiisa ahaa oo kale hana kusameeyo caalamka isbadalka aan doonayno, maalmo kadib waxaan kafasax qaatay wasiirkii iyo xoghayihiisii waxaana macsalameyey ehelkaygii iyo asxaabtaydii markii aan dhaqaaqay anoo siibaxaya canugaygii yaraa waxaa uu yiri

[49] Erayga ah 'axaadiista sharafta ee lagu uruuriyey kitabada muctabarku waxaa laga helaya siyaado iyo nusqaan' waa been abuur aan sal iyo raad lahayn Axadkii ogaada goobta lagu uruuriyay kumanaan axaadiis ah oo ay uruuriyeen kumanaan muxaadisiina ma rumaysto mana qaado been taan oo kale.

baabaa dagdag igu soolaabo markaas ayaa labadii indhood illin soodhaaftay ilintaasna waan kaqarin waayay xataa xaaskaygii markaasay isku kayduubtay xaaskaygii oo ay idhunkatay dhunkashooyin kulul ama aan dhunkaday waana baxay anigoo qasadkaygu yahay dhinaca Basra daal iyo haraad badan kadib goor habeenimo ah ayan gaaray Basra waxana ku dagay guriga Cabdi Ridaa wuu hurday markuu i arkay waxuu iisoo dhaweeyay soodhawayn kulul habeenkii meeshaas ayan seexday waaga markuu baryay waxaa uu ii sheegay Cabdi Ridaa inu katagay Shekh Cabdi Wahaab Basra waxana uu igu dhiibay waraaq kadib markaan akhriyay waraaqdii waxaan ogaaday Sheekha inuu aaday Najdi waxana uu isiiyay ciwanka iyo meesha laga heli karo subaxdiina waan dhaqaajiyay aniga oo u jahaystay dhanka Najdi daal dheer kadib waxaan gaaray Najdi waxana utagay Sheekh Muxamed Cabdi Wahaab oo jooga gurigiisa islamarkaana ay kamuuqato diif aad u daran waxna uma anan sheegin wax yar kadib waxaa ii cadaatay Sheekhu inuu naag guursaday daciifnimaduna ay keentay arinkaasi guurka.

Waxaana kula taliyay inuu furo naagtaasi waana uu iga aqbalay waxan aniga iyo asaga go'aan ku gaarnay dadka inaan ogu sheekayno inaan ahay adoon uu Sheekhu suuqa Basra kasoo gatay oo safar uga maqnaa oo hada soolaabtay sidaas ayana la'ii bartay waxaana Sheekha lajoogay mudda laba sano ah waxaana diyaarinay qaabkii dacwada loosoo ban dhigi lahaa taariikhdu markay ahayd 1143 hijriga oo wafiqsan 1730 miladiga waxaa xoogaystay go'aankii waxuuna helay xoogaa taageero ah dacwadiina inyar inay ayay isoo if baxday aniguna waxaan lagarab taagnaa taageero nafeed iyo mid maalba ragna waan usameeyay markasta oo ay dacwada siyaadana cadawga Sheekha waa uu sii siyaadaayay ilaa u ku hamiyo Sheekhu inuu isagalaabta dacwada laakiinse

aniga aya kucelcelinayay waxana ku oranayey nabi Muxamedba waxan wax kadaran ayuu lakulmaayay tanina waa wadadii sharafta nin walbo o wanag wadana waa in uu lakulmo dhibaato sidaas ayan aniga iyo sheekha ugu jirnay halgan iyo dagaal waxaana usameeyay Sheekha jawaasiis uga soowaranta cadawga oo an mishaar siiyo marwalbo oo uu cadawga iskudayo inuu kacdoon sameeyana waxaa nooga soowarama jawaasiista malin malmaha kamid aha aya waxan ogaanay in Sheekha shirqool ay kudili rabaan cadawga waana an fashilinay Sheekhu waxaa uu ii balan qaaday inuu fulinaayo kaartada (lix geesoodka ah) lakiin waxuu iyiri hadda waxa badan inooma suura galayaan waxuu Sheekhu aad iiga diday duminta Kacbada iyo samaynta qur'aan waxna laga dhimo waxna lagu daro waxuuna yiri hadii nalagu maqlo labasdaas arimood waxaa nalagu sookicinayaa ciidamo aanan wadood uhaynin waxuuna Sheekhu aad uga baqaayay asharaafta Maka iyo xukumadda Istanbuul waana ka aqbalay cudur daarkaas waayo wax awood ciidan ah nooma diyaarsanayn sanadyo kadib waxaa usuuragashay wasaarada inay noosoo xero galiso Muxamed Binu Sacuud oo ahaa amiirkii Darciyee waxayna iisoo direen akhbaar kusaabsan Muxamed Binu Sacuud waxayna wasaaradu igu maratay inay labada Muxamed midna diinta hoogaamiyo midna dawlada Muxamed Cabdi Wahaab, waxa loodoortay hoogaanka diinta Muxamed Binu Sacuudna dawladnimada si'ay ula wareegan dadka oo dhan qalbi iyo qaalaba waayo taarikhda waxay sugtay xukumadii diini ah inay daa'imi ogtahay lagana baqo lagana danbeeyo sidaas ayan kuxoogaysanay Darciyana waxan kadhiganay caasimadii dawladeena Wahaabiyana waxaan kadhiganay diinkeenii cusbaa wasaaraduna waxay ahayd mid siisa xukumadeena cusub maal galin kufilan oo qarsoodi ah xukumaduna

waxay soo iibsatay adooma lagu soo tababaray wasaarada sifiicana uyaqaano Carabiga loona tababaray kudagaalamidda dhulka lama dagaanka ah.

Waxana kakoobnayn aniga iyo adoomada kow iyo toban qof keena waxaan dajinaynay kaartooyinka ay kushaqaynayaan labada Muxamed dhamanteena waxaan guursanay gabdha qaraabadooda ah waxana layaabay haweenka muslimka ah sida ay ragooda utixgaliyaan sidaas ayaa xiriirkeenii isu dhexgalay wuuna sii siyaadaayay marba marka kadanbayso arintiina marba marka kadanbayso way sii siyaadaysay markazkiina wuusii xoogaysanayaa maalinba maalinta kadanbayso, hadaysan masiibo wayn dhicin anagu abuur usuubada inuu siyaado illaa miraha laga gaaro waan abuurnay.

BARAARUJIN

Qofkii akhriya kitabkan oo micnihiisa dhuuxa waxaa uu ogaanayaa Ingiriisku inuu yahay midka ugu daran cadawyada Islamka sidoo kale waxaa uu ogaanayaa wahaabiyada weerarta suniyiinta caalamka inuu aas aasay Ingiriisku oo uu barbaariyey xataa kuwa cilmigi iyo caqliga leh oo wahaabiyada kamid ah naftoodu way kadidaa cadaawadda iyo xumaanta uu Ingiriisku musliminta uqabo.

Kitaabkan waxa uu si xaqiiqa ah usugayaa Ingirisku inuu aas asay wahaabiyada si uu islamka ugudumiyo waxaana aragnaa kuwa aan madhabka an lahayn inay isku dayayaan faafinta wahaabiyada kitaabkan waxaa inkira qaar kamid ah wahaabiyada waxayna kusheegaan qoraalada jaajusnimada Hanfari inay tahay mid khiyaali ah oo aan xaqiiqa ahayn lakiin umaysan sheegin waxa daliilah inkirkooda hasa yeeshee caalimka wayn ee layiraahdo Xabiib Calawi Binu Axmed Binu Xasan Binu Xabiib Cabduliahi Binu Calawi Alxadaad, ayaa waxuu alifay kitaab uu kusugayo daliillo cadcad oo kusaabsan xaqiijinta warka Hanfari waxuuna kumagac aabay kitaabkaas (**Misbaaxul Anaam**) Calal Kitaabaatil Xaqiiqati Addaliilati la yidhaa Muxamed Binu Cabdul Wahaab Camiilil Ingiriis Alladii Acadahaa Macal Jaasuus Hanfari kitaabkaana waxaa ladiyaariyey sanadkii 1216'dii hijriga oo ku aadan 1801 milaadiga waxaana ladaabacay sanadkii markuu ahaa 1416 hijrada kuna aadan 1995 milaadiga waxana daabacay mabdacada Daarul Nashril Xaqiiqiyati ee kutaal magalada Istanbuul ee dalka Turkiga, caalamka oo dhana waa loo qaybiyey Ingiriisku mar walbo oo uu isku dayo duminta Islamka ma awoodo inuu tirtiro muslimiinta xaqiiqada ah ee Ahlu sunna waljamacah lakin iyaga naftooda tirtiraayo xaqa keenay balan qaadayna badbaadintiisa.

QAYBTII LABAAD

Cadawtinimada Ingiriiska ee Islaamka u hayo

Qofkii akhriya qiraalada jaajuusiga ingiriisiga ah ee ku cadayd qaybtii kowaad ee buugaan waxuu macluumaad dheeri ah kahelayaa fikrada ingiriiska ee kusaaabsan colaadda ay muslimiinta uqabaan waxaan kaloo ogaanaynaa sikooban qaabka ay muslimiinta dhibaatada ugu gaystaan uguna dul fuliyaan awaamiirta kasoo fushay wasaarada gumaysiga ee Ingiriiska waa dad kibir badan isla wayn naftooda u arko xurmo inay mudan tahay dadka kalana u arko inay xaqirnaan mudan yihiin.

Ingriisku dadka waxaa uu uqaybiyey saddex qaybood qaybta kowaad oo Allahu Tacaalaa abuuray ayagoo insaan ah waa Ingiriiska qaybta labaad ee reer yurub iyo Ameerkaanka midabka cad ayagana xurma ayay mudan yihiin waxii labadaas kasoo haro waxaa laga abuuray insaan iyo xayawaan waxa u dhaxeeyo, sidaas daraadeed xoriyad madax banaani wadan iyo xurmo midna ma mudna ee waxaa loo abuuray inay Ingiriiska u adeegaan.

Igiriisku lama aysan noolan jirin dadka ay gumaysanayan meel walbo oo ay gumaysanayan waxay kulahayeen goobo ugooni ah sida meelaha lagu shiro meelaha lagu ciyaaro maqaayado meelaha lagu qubaysto bakhaaro u gaar ah dawlada Ingiriiska dadka wadanka udhashayna aynsan soogali karin waxuu oranayaa qoraaga Faransiisaka ah oo layiraahdo Marsele Berniyuu kaasoo kucaan baxay safarada uu ku tagi jiray wadanka Hindiya bilowgii qarnigii labaad buugiisii u ugu magac daray Safarkaygii Hindiya.

Waxuu yiri waxan kula balamay nin caalim ah oo Hindi ah aadna looga yaqaano Yurubta oo xataa

jamacadaha Yurub kagaaray jagada barafasoornimada inaan kukulano gole o gaar ah Ingiriiska Hindiya gumaysto ninkii caalimka ahaa markii uu irida yimid caalimnimadiisa iyo caanimadiisa midna uma aysan xurmayn mana aysan u ogalaan golihii shirka markii aan maqlay arintaa kuma aanan guulaysan inaan soogaliyo goobtii shirka ninkaas caalimka ah.

Waxuu yiri ninkaasi Ingiriisku waxay kula dhaqmaan dadka ay gumaystaan si' aan loola dhaqmin xataa xayawaanka wadanka ugu wayn ee uu Ingriiska gumaysta waxaa uu ahaa wadanka Hidniya kaasoo ay kusameeyeen dhacdadii ugu xumayd ee kadhacda aduunka Gudaha magalada layiraahdo maalin maalmaha kamid ah ayaa waxaa isugu soobaxay magala layirahdo Amritsar dadka aminsan diinta Hinduuga kuwaas oo samaynayey dabaal dag diineed 1919 miladiga ayagoo wadooyinka banaan bax kusamaynayo banaan baxaas oo ay ka aminsanayeen cibaado ayaa waxaa ka hortimid naag wadaad ah oo Ingiriis ah ma aysan xurmayn naagtii kadib naagtii waxay udacwootay general Diir janaralkaas layirahdo Diir waxaa uu amar kubixiyey dadkii oo isgu tagay gurigoodii cibaadada in dab laqabadsiiyo halkaana waxaa kudhimatay 10 daqiiqo gudahood todoba qof dad kun qof kabadana way ku dhaawacmeen intaasi ugama uusan harin waxuu amar kusiiyey dadkii soo haray inay jilbaha iyo gacmaha kusocdaan mudda saddex maalmood ah sida xayawaankii.

Kadib arinkii waxaa uu gaaray Landan xukumadaiina waxay amartay in arinkaa lasoo xaqiijiyo baarayaashii markay soogaareen Hindiya si'ay uxaqiijiyaan arinkaas janaralkii waxaa lawaydiiyey sababta uu ulaayey dadkaan waxuu kujawaabay aniga ayaa dalkaan xukuma

go’ana ku gaaray arinkaas kadibna waxaa lawaydiiyey maxaad dadka u amartay inay kusocdaan jilbaha iyo gacmaha waxaa uu kujawaabay qayb Hiduuga kamid ah ilaahyadooda hortooda way kuguurguurtaan waxaan markaa tusaayey haweenayda Ingiriiska ahi inaysan kasharaf yarayn ilaahyadooda oo ay waajib tahay inay garguurtaan marka ay arkaan naag Ingiriisiyad ah janaralkii waxaa loo aqoonsaday halyey markii hadaladiisaan lagu faafiyey jaraa’idka Ingiriiska waxaa la dhihi jiray janaralku [Diiraa Rakinaldi Adfaardi Haari waxuuna dhashay 1281 Hijriga oo ku aadan 1864 milaadiga waxaana uu dhintay 1346 hijriga kuna aadan 1927 miladiga waxuuna kudhintay magalada layirahdo Inkaltara taariikhda caalamkana waxaa uu galay in uu yahay janaraalkii magalada Amritsar dhiiga kudaadiyey boqortooyda Islamka ee lagu aas aasay dulmiga iyo dadlaynta iyo cadawnimada Islamka nafteeda waxay kumagac awday boqortooya aysan qorax u dhicin waxay yeelatay dawladihii Canada, Koonfur Africa, Newzealand, Fiji iyo jaziiradaha Baasifigga, Papua Tongo, Australia, the Biretish Polojistan, Burma, cadan Somalia, Borneo, Brunei, Sarawak, Hindiya, Pakistan, Bangaladesh, Malysia, Indunusia, Honkong iyo qayb kamid ah wadanka Shiinaha, Qubrus iyo wadanka Maalta 1300 ee Hijriga oo ku aadan 1882 miilaadiga waxay yeesheen Masar, Suudaan, Nayjarnajerya, Kenya Ugadha, Zanbawi, Zanbiya, Malawi, Baahaamaa, Kariinaadaa, Gauyaana, Bsutuswana, Ganbiya, Gana, Siraliyon, Tansaniya, Sakafur dawladahaas dhamaan waxay waayeen diintoodii luuqadoodii dhaqankoodii caacadoodii khayraadkoodii dabiiciga ahaana waxaa gurtay Ingiriiska qarnigii 19 aad aakhirkiisii waxay

gumaysanaayeen aduunka afar meelood meel Hindiya waxay ahayd meesha laga xukuma gumaysiga.] Ingiriiska muhiimadeeduna waxay ahayd dadka Hindiya oo kabadnaa 3 boqol oo milyan Hindiga maanta waxay kabadan yihiin (700 malyuun) khayraadkooda dabiiciga ah ee aan dhamaanayn dagaalkii kowaad oo kaliya waxaa uu kaqaaday wadanka Ingiriiska hal milyaar oo rubbi oo cadaan ah iyo 1.5 milyan oo askar ah dhamaantoodna waxaa uu u adeegsaday burburintii dawladii Cusmaaniyada iyo hagaajintii warshadihii waawaynaa ee Ingiriiska.

Ujeedooyinka ugu waaween ee uu kalahaa ingiriisku wadanka hindiya waxa ay ahaayeen labo sababood waxa uu arkay islaamku in uu si baaxad leh ugu faafayo wadanka hindya uuna si wayn ula baxaya islaamka khayraadka caalamka iyo xukunka muslimiinta oo ka hirgalay wadanka hindiya.

Sababta labaadna waxa ay ahayd ilaha dhaqaalaha ee ugu wayna Ingiriisku kuma ekeen wadanka hindiya oo kaliya waxa uu weerar ku qaday magaloyinka islaamka ee ku yaala wadooyinka soo gala wadanka hindiya waxa uu ka dhexbeeray muslimiinta fitno iyo khilaaf waxa uu kala geeyay labada muslimiinta ah ee walaalaha waxa uu rartay dhamaan kheyraadkii iyo ilihii dhaqaalaha ee wadanka hindiya.

Waxa uu gacanta ku dhigay dhamaan deegaamadii islaamka waxa kale uu dabagal ku sameeyay dhaqdhaqaaqa boqortooyada cusmaaniyiinta si qoto dheer waxa uu weerar siyaasadeed ku qaaday cusmaaniyiinta isaga oo adeegsanaya kaartooyinka siyaasadeed si aysan gacan taageero u siin muslimiinta Hinidiya iyo in uu kala jarjaro wadanka hindiya

arrintaasina waxa ay ka mid ahayd siyaasadihii xumaa ee ingiriiska.

Wadankii ugu horeeyay ee reer yurub cagta soosaara wadanka Hindiya waxa uu ahaa wadanka Bortaqiiska waxa ayna yimaadeen gobalka layirahdo Kalkataa sanadku marka uu ahaa 904h oo waafaqsan 1498m.

Waxa ayna ku mashquuleen ganacsi waxa ayna la wareegeen ganacsiga hindiya waxaa lagu sheegay kitaabkii (kacaankii hindi'ya) iyo Sharaxiisa (Al-yawaaqiid Al-mahriyah) ee uu qoray caalimkii la oranjiray **Maxamed Fadlul Xaqi Xayraabaadii** oo kamid ah mashaa'ikhda ugu waa weyn.

Hindiya waxa uu yiri sheekhaasi Ingiriisku waxa uu ogalaan shiyihii ugu horeysay ka helay nin la oranjiray **Akbar Shaah** in ayka furtaan magalada Kalkataa xarumo ganacsi sanadku marka uu ahaa 1008H oo ku beegan 1600M sidoo kale isla sanadkas boqorka layirahdo Akbar shaah nidaamka shirkada layirahda Sharqu Al Hindi Waxa shirkadaas loo ogalaaday in ay uruuriso ciidamada mutadhawiciinta ee Ingiriiska si buuxdana ay u hubayso iyo in ay qabtaan shaqada milatari iyo ganacsiga ee wadanka Hindiya. Akbar shaah waa nin rumaysan in aydiimaha oo dhan aysiman yihiin waxa uu isku keenay culumo kaladuwan rumaysana diimooyin kaladuwan ujeedadiisuna ay tahay in uu soo saaro diin cusub oona u dhaxaysa diimooyinka oo dhan waxa uuna uu u bixiyay magaca ah (Diin Al Ilaahi) sanadku markuu ahaa 990h oo ku beegan 1582m waxaa yaraatay ahmiyadii loohayay culumada islaamka ee wadanka hindiya gaar ahaan qasrigii shaah waxaa korodhay jacaylka loo qabo diintii akbar shaah ingiriisku waxa uu soogalay wadanka hindiya waxaana uu dhul ka iibsaday kalakata xiligii

(Shaah Al-Caalamkii koowaad)[50] waxaayna keeneen ciidamo ilaaliyo dhulkaas iyaga oo ku badalanaya daaweeyntii ay daawaynayeen boqorkooda.

Waxa uu u ogalaaday boqorka hindiya in ay iibsadaan dhulkii hindiya oodhan sanadku marka uu ahaa 1126h oo waa faqsan 1714m waxayna ku fideen bangaal ilaa hindiyadii dhexe iyo dhulkii raajistaan xiligii shaah {2} kaasoo carshiga qabsaday sanadkii 1174h oo kubeegan 1760m waxaa ka dhacay wadanka Hindiya fidno iyo isdhicid kadibna waxa uu gudagalay boqorka in uu maamulkiisa adkeeyo uuna soosaaro awaamiir uu ku adkeenayo amniga wadanka.

Markii loo adkeesan waayay dulmiga uu ku hayo ingiriisku wadankan hindiya waxaa dhacay kacdoono looga soo horjeedo wadanka hindiya ingiriisku waxa uu ugu jawaabay jawaab adag oona ah in ay ciidamadiisu galeen magaalada dalhi ayna boobeen guryihii iyo tukaamada waxaayna goowraceen dhalinyarada, duqoowdii, dumarkii iyo caruurta ilaa uusan awoodin qofka in uu helo biyo uu cabo boqorkii (**Bahaadaar Shaahii 2**) in uu lasoobaxo ciidamadiisa isla markaana waxaa qiyaamay abaan duulihii ciidamadiisa waxa uuna yiri abaan duulihii ingiriisku wax danbi ah malahan waayo waxaan necbanahay kacdoonka iyo waxa abaabulayba.

Ingiriisku waxa uu bilaabay in uu laayo dadka u socda magaalada dalhi uuna suray meedadkooda wadooyinkan si ay dadku u cabsadaan waxaa laga casilay xilkii boqorkii Bahaadar Shaahii labaad sanadku markuu ahaa 1275h oo ku beegan 1858m isagoo lagu tuhmayo in uu abaabulay kacdoonka iyo in uu laayay dad reer yurub ah

[50] shaah caalam awal binu calamgiir waxaa uu dhintay sanadkii 1124h 1712m

waxaa lagu xukumay xabsi daa'in.

Sanadku markuu ahaa 1294h oo ku beegan 1877m waxa uu iclaamiyay Ingiriiska intii lagu guda jiray dagaaladii cusmaaniyiinta iyo Rushka in ay Hindiya tahay doowlad raacsan boqortooyda Ingiriiska.

Ingiriisku ma uu san kafurin iskoolo cusub wadanka Hindiya waxaayna xireen iskoolaadkii lagu baranayay diinta islaamka waxaayna laayeen culumadii islaamka iyo ardaydii waxayna u yeelayaan in uu soobaxo jiil cusub oona kajaahil ah diinta Islaamka sidoo kale waxa uu diiday in laqoro lana faafiyo kutubtii carabiga ku qornaa waxa ayna aas aaseen 165 iskool iyo macaahid ah 80 kamid ahna uu gaar u yahay dumarka waxaayna kadhigeen ardaydii kuwo cadaw ku ah diintii aabayaashood waxa uuna awood siiyay mubashiriinta in ay faafiyaan masiixiyada wadanka hindiya dhexdiisa waxa uu xusay Waliimis Baraayn oo ahaa wasiirkii hore ee arimaha dibida ee wadanka Mareekanka in ay xukuumadii Ingiriisku ahayd xukuumad dulmi iyo ad adeeg badan waxa uu ku sheega dhamadka kitaabkiisa (Alsydratu al ingiriisiytu calal hindi).

Ingiriisku wuxuu sheegtay in uu hormar gaarsiiyay shacabka hindiya run ahaantii waxa uu malaayiin qof u diray qubuuraha waxaana uu aas aasay xukuumad dhacda oo burburisa shacabka hindiya xaalada muslimiinta reer hindiya waxa ay ahayd kuwo dhibaata kala kulma gumaysiga ingriiska waxa ay bilaabeen raga is kaleh warshadaha ingiriiska in ay adeegsadaan shaqaalayaal hindiya ayagoo ku badalanaya kuwa afrikaankaa waxaa laga soo rari jiray hindiya iyadoo lakeenayo koonfurta afrika kumanaan muslimiin hindiya waxaan lagu magacaabi jiray {Quuli} xaaladoona waxaay ahaayd mid

aad u liidata waxaa lagu labalamay in ay shaqeeyaan shan sano oo xiriir ah uusan qofna katagi karin shaqada inta lagu guda jiro xiligaas mana guursan karo inta xiligaas waxaana lagu garaaci jiray jeedal.

Siyaasada Ingiriiska ee wadamada islaamka waxa ay ku dhisneed (Qaybi oo xukun oo baabi'I diintooda).

Waxa ay aas aaseen cadawga ahlusunaha kuwo xanbaarsan magaca islaamka dhahayana jihaadku waajib ma ahan xalaaleesanaya waxyaabaha uu islaamku xarimay badalayana arkaanta diinta islaamka waxayna ku caanbexeen kooxda layiraahdo (**Alqaadiyaaniya**) kooxdaas oo la'aas aasay sanadku marka uu ahaa 1296h oo ku beegan 1879m waxaana aas aasyay **Gulaam Axmad Alqaadiyaani** kaasoo sheega jihaadku in uusan waajib ku aheen seefta laakiin aytahay in la'isku nasteexeeyo.

Gulaam Axmad waxa uu dhintay sanadku markuu ahaa 1326h oo kubeegan 1908m ingiriiskuna waxaay damiirkiisa ku gateen maal badan waxa uuna sheegtay in uu yahay mid diinta cusboonaysiinaya ugu dan beentiina waxa uu sheegtay in uu yahay nabi uuna layimaaday diin cusub waxa uuna yiri qofka aan irumeenin waa uu gaaloobay afkaartiisu waxaay ku faaftay Bunjaab iyo Bombaay ayadoo lamagac baxday Axmadiya Muslimiinta suniga ahi waxa ay leeyihiin jihaadku waa waajib in gaalada lagula dagaalamo hub iyo wixii lamid ah.

Ingiriisku waxa uu magacaabay dad badan oo qaadanaya awaamiirtiisa fulinaya qorshayaashiisa ilaalinaya danihiisa gaarka ah ee xaga maamulka.

Dhamaadkii dagaalkii labaad waxa uu wadankaasi noqday heesihiisa wadaniga ah iyo calamadooda kuwo

xor u ah laakiin xor uma aysan ahayn diintooda ingiriiskuna waxa uu aha mid kadanbeeya ilhaanooyin loogaysanaya Turkiga iyo wadamada islaamka saddex qarni ee ugu danbeeysay.

Waxa ay burburiyeen doowladii cusmaaniyiinta waxayna ka as aaseen dhulkii cusmaaniyiinta labaatan iyo saddex dawladood sababta arintaasna waxa ay ahaayd muslimiintii oo awoodi waayay in ay sameeyaan doowlad awood badan.

Ingiriisku Waxa uu laayay culumadii ahlu sunada dhabta ahayd waxa uuna baabi iyay kutubtii diiniga ahayd waxa ayna soo saareen dad jaahiliin ah waxaa kamid ahaa

(Jamalu-diin Afgaani) waxa uu dhashay sanadkii 1254h oo kubeegan 1838m waxa uuna ku dhashay afgaanistaan waxa uu aqristay oo uu bartay kutubtii Falsafada waxa uu jaajuus uga noqday doowladii ruushka wadanka afgaanistaan waxa uu usafray wadanka masar waxaa ku dhalatay fikradii aheed in uu afganbi sameeyo iyo in uu hagaajiyo diinta waxa uu lasaaxiibay muftigii masar ee la oran jiray **Maxamed Cabdi Wahaab** waxa uu yiri maxamed waa waajib in lahagaajiyo diinta waxa ayna aas aaseen koox layiraahdo Almaasuuniyiin waxa ay codsi u qoreen baariis iyo landhan in lakaalmeeyo kooxdaas

Maxamed Cabdi Wahab uu kamid yahay raga ugu caansan ee qiyaanay **Jamalu-diin Afgaani** kaasoo doonayay in uu islaamka xaga hoose kadumiyo Maxamed Cabdu waxa uu dhashay sanadkii 1265h oo kubeegan 1849m waxuuna kudhashay Daltah ee magaalada Masar waxa uuna dhintay sanadkii 1323h oo ku beegan 1905m.

Kitaabka Ibnu Taymi ee ay ku jireen qaldaadka iyo jasuuskii Ingiriiska ee Hemfer ee been abuurka ahaa (**Kuwaas ayaa wahaabiyiin)** lagu magacaabaa.

Culimada (**Ahlu sunaha**) ee muslimiinta, kitaabadii Ibnu Taymi ayaa lagu qorey fikrado ka duwan kuwa ay qoreen culimada kale. Kitaabadan marki la qorey, mid ka mid ah culimada **Somalida Sheikh Cabduraxman Cabdullahi bin Muxamed Xari** ayaa qorey kitaab lagu magacaabo (**Al maqaalato Suniye fii Kashfi Dalaalati Ahmed Ibnu Teymi**). Nafsad ahaantiisa Sheekhan waxa uu ku dhashay Xarar sanadka marka uu ahaa [1920M], kitaabkan waxaa lagu daabacay Beyruut [1994M], kitaabkaan Ibnu Taymi fikirkiisa ayuu radiyey, kitaabo kale oo badan ayey culimada ka qoreen.

Cadawga islaamka gaar ahaan ingiriiska waxaay kadanbeeyeen dib udhaca muslimiinta xaga cilmiga iyo fanka iyo horumarka intiisa kale.

Sidoo kale waxay caqaladeeyen ganacsigoodii iyo warshadahoodii si ay u burburiyaan akhlaaqdoodii wanagsaneyd ayna ugu faafiyaan jirooyin sida khamriga iyo sinada

Waxay dowlada Cusmaniyada u dirtay wakhtigii u danbeeyey arday yurub si ay usoo bartaan waxna u soo faa'ideysataan waxaa la khiyaanay ardaydii qaarkood waxayna ku biireen kooxdii Maasuniyiin waxaaana la soo baray sidii ay u burburin lahayeen islaamka iyo boqortooyadii Cusmaaniyiinta waxaana ka mid ahaa ragaas **Mustafa Rashiid Baasha** waxayna u diyaariyeen kuna tarbiyeyeen cadow tinimada islaamka.

Marka u dareemay suldaan **Maxamuud Khaan** ihaanada iyo khiyaanada maasooniyiinta waxaa u amray in la daldalo Mustafa Rashiid lakiinse waxaa u dhintay

inta aan la fulin amarkaa.

Mustafa iyo kooxdiisii waxay ku soo laabteen İstanbuul kadib markii u dhintay suldaan Maxamuud waxay ay dhibaato u geysteen muslimiinta sanadku makii uu ahaa 1255h oo ku beegan 1839m suldaan **Cabdi Al-Majiid Khaan** waxaa u ahaa mid da'diisa ay aheeyd 18 sano khibrad uma uusan laheyn arimaha doowlada, arintaas waxay dhib weeyn ku noqotay tariikhdii doowladii Cusmaaniyiinta sababna u nooqtay bubburitankeedii.

Suldaan (mukhlis) nin qalbigiisa fiican ah waxaa u la yimid kuwii jaahiliinta ahaa oo la oron jiray Maasuuniyiinta mana ogeyn kuwo burburinaya islaamka mana dareensaneyn waxayna la wareegeyn maamulkii boqortooyadii Cusmaniyiinta waxayna dileen boqorkii waxana carqaladeyen shaqooyinkii wadanka loo hayey kadibna dalkii waxaa ku biloowday afganbi is daba joog ah.

Ninkii ugu weeynaa ee ka dooday khiyaanada wadanka lagu hayo waxaa uu ahaa Alaha u anaxariistee suldaan **Cabdil Xamiid Khaan** labaad waxayna u bixiyeen magaca ah suldaan Al-Axmar waxaana uu ahaa Alaha u naxariistee boqortooyadii xaga dhaqalaha waxana u furay iskoolaad iyo jamacado wadankiina wa u camiray waxaana uu furay kuliyadii caafimaadka taasoo an horey loogu arag yurub waxaa kaloo u furay culuumta siyaasiga sanadkii 1293H oo ku beegan 1876.

Sanadkii 1297hwaxaa u aas aasay kuliyadii xaquuqda iyo kuliyadii xisaabta sanadkii 1301h waxaa u furay iskoolkii injineerinimada e dugsiga sare waxaana u qeeyb hoose ka siiyey dumarka.

Yuhuuduna waxay doonayeen in ay sameystaan

doowlad ay yuhuudu leedahay kana sameystaan dhulka ay falastiini leedahay iyagoona isku haleeynaya ilaalinta uu ingriisku ilaalinayo Suldaan **Cabdil Xamiid Khaan** waxaa u ogaaday arintii waxaana u amray in aan laga iibinin dhulka falastiin yuhuuda waxaana booqasho ugu yimid madax weynihii Sahnuuniyiinta, Tiyoot, Rahar Tazal, Xaa'khaam waxayna u yimaadeen suldaan Cabdi Xamiid Khaan iyagoo u bandhigaya in uu yuhuuda ka iibiyo dhulka yuhuuda waxaana uu ugu jawaabay suldaanku Alaha u naxariistee "Hadii ay aduunyado dhan ay ii timaado ayna iiso ban dhigaan hantida aduunyada kor saaran oo dhan ma anan siiyeen taako dhulka falastiiniyinta, Sababtoo ah wadankaas wa wadanka ay awoowayasheena ay ku furteen dhiigooda waxaana awoodeena ah in an ilaalino ilaa iyo maanta".

Waxay isku waafaqeen yuhuuda iyo reer yurub sanadku markuu ahaa 1327h kuna beegan 1909m in ay ka casilaan suldaan Cabdi Xamiid madaxtinimada ayna muslimiinta uga tagaan sida agoonta oo kale.

Kuwa lagu khiyaanay iskoolaadka lagu faafiyo diinta masiixiga lagana sameeyey boqortooyada dhexdeeda waxay u is tageen in ay kacdoon ku kiciyaan doowladii Cusmaniyiinta iyo in ay ku faafiyaan sirdoon kuwaaso laga soo magacabay iskoolaadka ayagoo lagu magacabay macalimiin waxaana la siiyey hub iyo maal waxayna ku fidiyeen fidno meel kasta waxayna abuureen kooxo ka soo hor jeeda doowlada.

Waxayna isku waafaqeen Ingiriisku in ay Cusmaniyiintu dhadhamin wax raaxa ah waligood ka dibna waa ay ka shaleytoodeen waayi taanka ay waayeen khilaafadii uosmaniyiinta.

Intaa kadib waxaa dhalatay dowlad isra'ili ah uuna

sameyey ingiriisku wargeesyaduna waxa ay qoreen xasuuqa ay israa'iliintu u geesanaayeen falastiniyiinta.

Waxaa u yiri sayid Axmed Cabdi Al-Majiid oo ahaa wasiirka arimaha dibada e masar sanadku marku ahaa 1990m "Masar waxa ay nooleyd wakhtigii ay ugu raaxada iyo xasiloonida badneyd xiligii cusmaniyiinta.

Mubashiriintu waxa ay qeeybiyeen sanadku marka u ahaa 1893m ayna u qeeybiyeen Armaniyiintu, saddex milyan oo kutubka Ingiilka ah iyo afar milyan oo kutubo khaas ku ah masiixiyiinta sidaa darteed qof kasta oo Armeeni ah waxaa ku so aaday todoba kutub.

Rumeeynta in la rumeeyo mubashiriintu in ay maalkaas u bixiyeen u shaqeeyn ay u shaqeynayeen diintooda arinkaasi oo la rumeeyaa waa doqonimo maxaa yeelay mubashiriintu diintu waxay u aheeyd ganacsi bixinta ay bixinayaan maalka waxay ku burburinyaan islaamka xididada uga siibayaan dowladii Cusmaniyiinta iyagoo faafinayo dacaayada ah in Turkigu goowracayo armaaniyiinta

Isla sanadahaas dhexdooda muwaadiniintii Awraam waxay ku kacan sayreen doowladii Cusmaaniyiinta waxa ay kaalmo waydiisteen ciidankii awooda badnaa ee Ingiriiska kadibna waxa ayduulaan ku soo qaadeen dhulalkii muslimiinta waxa ayna laayeen kumanaan muslimiin ah oo ay ku jiraan caruur iyo dumar si arxan dari ah waxaa la cirib tiray dulmiga oona diiday sanadkuna markuu ahaa 1313h oo kubeega 1895m ciidamo ay hogaaminayso haweeney layiraahdo adham baasha guushaasina ma aysan lahayn giriiga kaliya balse ingiriisku waa uu laqabay, waayo waa uu ku booriyay saddex cunsur ee asaasiga u ah waxaay kala yihiin (Boqorka, Golaha Baarlamaanka iyo Kaniisada)

Waxa uu ahaa golaha baarlamaan iyo qasriga madax tooyada mid ku dhex yaala kaniisada dhexdeeda sanadku markuu ahaa 918h oo ku beegan 1512m kadib gubitaankii waynaa dhacayna sanadku markuu ahaa 1512m waxa uu boqortooyada uguurtay Qasri Boojakiinkahaam golaha baarlamaanka waxa uu ku baaqinoqday kaniisada

War kasoobaxay jariirada istaanbooliya 7 maarso 1990kii waxa ay faafisay booliskii iskood laan in uu yiri landan ma aha magaalo amni ah waxayna noqotay magaalo aad uqatar badan gaar ahaan dumar hadba warbixinta ay soo gudbiyaan booliska Ingiriiska laban kii bilood ee ugu danbeeyay in ay korodhay danbiyada waaweey noocyadooda kaladuwan oona ugu sareeysa sinada gogol dhaafka ah sharciyada caalamka iyo diimaha udagsanba waxa ay tahay in uu xiriir ka dhexeen karo ninka iyo haweenada laakiinse sharciga Ingiriisku waxa uu qabaa in uu xiiriir kadhexeen karo labo rag ah.

(BBC) waxa ay sheegtay in dumarka aan maxkamada aan kasoo mehersan tiradoodu waxa ay gaaraaysaa shan milyan.

Ingiriisku waa dalka ugu badan kafogaanshaha cadaalada xaga qaybinta dhulka ilaa iyo maanta 80% dhulkii ingiriiska waxa uu gacanta ugu jiraa kooxo tuuga ah oo dhulalka dhaca arintaasina waa xaqiiqo jirta

Waxay xustay jariirad Turki laga leeyahay sanadku markuu ahaa 31/5/1992 {shilalka isdilka ah in uu ku batay ingiriiska sababa dhaqaalo awgood 100,000 oo muwaadiniin ingiriis ah waxa ay isku dayaan in ay isdilaan sanad kasta waxaa sugnaata 4500 in ay xaaladooda ku dhamaatay in ay geeryoodaan 62% waa dhalin yaro} arintaasi waxaay ahayd taqriir ay faafisay wargees caafimaad ayagoo sooxiganaya dhaqaatiirta

isbitaalka Ekisfoor.

Ayrlaan Ingiriiska waxa ay ku noqotay musiibo hadii uu ilaahay yiraahdo waxaan arki doonaa kudhicida ay ku dhacaan godka qiyaano ee ay u qodeen qayrkooda

Waxaan ku khatimeenaa qayta labaad ee kitaabkeena hadal uu yiri **Sayid Cabdi Xakiim Al Arwaasi** *"rahmatullahi caleyh"* kasoo si aad ah uyaqaana hagardaamooyinka ingiriiska waxa uu yiri cadawga ugu wayn islaamka waa Ingiriis hadii aan ku shabahno islaamka geed gaalada hadii ay jaanis u hesho waa ay jarayaan geedkaa muslimiinta waxa ay u noqonayaan cadawgooda war baraaruga geedu maalin bay cagaaranaysaa oo ay miro dhalaysaa laakiin Ingiriisku ma ahan sidaas waayo geeda waa ay waraa binayaan wayna barbaarinayaan muslimiintuna geedaas waa ay jecelyihiin

Allahu Tacaalaa ayaa waxa aan waydiisanaynaa in uu ka ilaaliyo islaamka iyo muslimiinta sharka iyo halaaga sidoo kale in uu ka ilaaliyo madaxda doowlada iyo culumada islaamamka iyo dhamaan muslimiinta sharta mubashiriinta hagardaamooyin Ingiriska iyo wasaqdooda laguna ilhaamiyo kafeejinaanta qiyaanadooda iyo kafogaanta shaqadooda.

QAYBTA SADDEXAAD

(**Khulaasatu Al Kalaam**)

Sheykh Yuusuf Nabhaani *"rahmatullahi caleyh"* Waxa Uu Risaaladiisa Ku Sheegay Sidatan[51]

(Waxa mahadleh illaaha hanuuniya qofkii uu doono, qofkii uu doonana dhumiya aqbala qofkii ka barya in uu kabadbaado baadi oo uu gaaro liibaan joogta ah)

Nabad galyo iyo naxariis ha ahaato Nabigeena Muxamed oo ah sayidka nabiyada iyo kuwa dhahiran ehelkiisa iyo asxaabtiisana naxariis dushooda ha'ahaato intaa ka dib tani waa risaalo aad uyar cilmigeeduna uu aad ufarabadan yahay waxa akhrista oo ka fa'iidaysta qofkasta oo caqli leh garsoorena ah, risaaladatan waxa akhrista qofkii uu Allahu Tacaalaa la doono in uu ku hanuuniyo wadada toosan ee xaqa ah, jidkaasi oo ah jidkii ay mareen kuwii loo barwaaqeeyay dushooda oo aan ladhuminin waxa aan ku magacaabay risaaladan (**Khulasatu Al Kalaam Fii Tarjiixi Diini Al Islaam**)

Warkii oo kooban hadaad doonaysaan inaad ka badbaadaan cadaab daa'im ah aadna liibaantaan liibaan daa,im ah arintaas hadaad kubixiso waqtigaada dhamaantiis oo awoodaada oo dhan kubixiso markaad kaligaa tahay iyo markaad socotaba oo aad cid walbo ukaalmaysato si aad u gaarto arinkaas wayn oo aad raacdo wadada aad ooga badbaadi lahayd cadaabka daa'imka ah kuna gaari lahayd nimcada aan dhamaaneyn, arintaas waxay ahaan lahayd mid aad u yar marka loofiiriyo muhiimada wayn ee aad gaartay, waxaadna lamid noqon lahayd qof hal xabo oo bacaad ah bixiyey kuna helay aduunyada boqortooyadeeda dhamaad iyo biloowga iskaba daaye arinkaas ayaa kasiiwayn xaqiiqada arinka dhab looma taaban karo laakiin caqliloow ishaaro

[51] Sh. Yuusuf Binu İsmaaciil Al Nabhaani Allahu Tacaalaa ha u naxariisteeh wauxuu ahaa madaxa maxkamada xaquuqda ee Beyruut wuxuu dhintay 1350h 1932m

ayaa kufilan hada waxaan kuufurayaa albaab aad uga gasho sida aad uga fakiri lahayd arinkaas muhiimka ah oo wax kamuhiimsan aysan jirin.

Waxaan kuleeyahay, waxaad ogaataa insaanka lagasoo bilaabo dhalashadiisa iyo dhimashadiisa inta udhaxayso inuu kaqaalib noqonaayo jacaylka, caadooyonka uu ka caado dhigto mana awooda inuu dhaqankiisa katago ilaa inuu isku dhibo mooyee.Markuu dhasho waxuu jeclaadaa naas nuugidda naas kagoyntana waxaa lalamaraa dhib badan kadib waxaa uu jecladaa gurigooda, xafadooda magaaladooda iyo wadankooda inuu katagaana waa kudhib. Markuu waynaado waxuu jeclaadaa tukaankiisa, suuqiisiisa, xirfadiisa iyo fankiisa, sidookale waxaa uu jecladaa qoyskiisa, dadkiisa qaraabadiisa, jinsiyadiisa, luuqadiisa, diintiisa uu kubarbaaray inuu faaruqa wax kamid ah kuwaasna naftiisa waa kudhib dadku waxay uqaybsamaan firqooyin iyo jamaacaad kala duwan arinkaasna waa arin cad oo aan la inkiri Karin hadaad arinakaa ogaato waxaad yaqiin ahaan u ogaanaysaa dadka dhaqamadooda jacaylka ay uqabaan iyo kudhaganaanta ay caadadooda kudhagan yihiin daliil uma aha inay caadadaas fiican tahay ee waxaa laga yaabaa caadadii oo xun qofka inuu jecel yahay wax walboo qofka uu ku barbaaro mudda badana uu kusoo dhexjiro kudhaqankeeda ha xumaadaan hase fiicnaadaane wuu jeclaanayaa si uu uga fuqana way adkaanaysaa haday arinka sidaa yahay ruuxa caqliga leh waxaa kuwaajib ah inuu barbaaro diimaha oo dhan illaa ay uga cadaato midda xaqa ah oo markaa uu raaco diintaada oo baadil ah oo lagu dhaganaado waxay dhaxalsiisaa halaag abad ah baaba daa,im ah markay nafta kabaxdana qofku.

Waxaa uu kumutaystaa cadaab daa,im ah ooh al ilmilicsi oo kamid ah ay ku iloowsiinayso wax walbo oo barwaaqo aad soomartay hadaba qof walboow naftaada halaag uma

rabtid ee waxaad lamid tahay qof hurda oo wax soojeeda u eg waxaadna ku sarqasantahay moogaanta khamradeedii hadaad hadaba ileedahay maxaan sameeyaa oo aan ku ogaan karaa diinta xaqqa ah aan raacee ileen naftaydii way diidantahay ilaa waxii ay kusoo barbaartay inay jeceshahay mooyaane diin walboo jirtana diinteediibaa uga macaane waxaan kugu jawaabayaa marka hore ogoow diin magaciisa waa hogaansamid waa adoonka oo u hogaansamo wixii rabigiis ujideeyey nabiyaduna usheegeen oo ah sidii dadku ay ula dhaqmi lahaayeen rabigood oo cibaada ah ama ay ula dhaqmi lahaayeen makhluuqa kale oo ay maslaxada kujirto hadaba ruux walboo caqli lahoow marka hore naftaada kadhig midaan diinba kujirin kadibna diimaha oo dhan fiir fiiri adoo garsoor kudheehan diin walbana fiiri waxa ay ka aaminsantahay rabigii abuuray iyo sifaadka Allahu Tacaalaa iyo axkaanta cibaadadiisa iyo axkaanta maqluuqaadka ee ay maslaxada ay kujirto sida dadka diintaas haysto uwada dhaqmaan Allahu Tacaalaa waxaa uu kusiiyey caqli aad kukala garato samaha iyo xumaha.

Waxii aad xumaan u aragto tuur gabi ahaanba waayo Allahu Tacaalaa diin xun masoo dajin waxii aad wanaag u aragtana dhab usii fiiri akhbaartiisana cilmi ka korarso xaaladiisa iyo qaabka uu soo ifbaxayna ogoow sifaadka nabiga diintaas loosoo dhiibayna baro sha'niga asxaabtiisa iyo umadiisa iyo kuwa diintiisa adiga kusoo gaarsiiyey baro hadii diinkaas ku cajab galiyo oo aad aragto inuu kawanaagsan yahay diintii aad kusoo barbaartay raac caqligaagana xaakim kadhigo kuna qanac diintaas hadaad kabaqayso inaad kuceeboowda khilaafka aad diintaas khilaaftay iyo tolki aad kusoo dhex barbaartay oo ay kula colay tamaan isufiiri dhibaatada kaaso gaarayso iyo dheefta aad kahelayso hadaad raacdo diinkii xaqqa ahaa dadkoo dhana ay kula colaytamaan dabadeedna aad heshe nimcadii

daa'imka ahayd aadna ka badbaado cadaabkii daa'imka ahaa.

Marka loofiiriyo dhibaatada kusoo gaartay iyo dhibka aad kafakatay waxay lamid noqonaysa dhulka iyo cirka oo quraanjo la dhinac dhigay dheefta aduunya ee kudhaaftay marka loofiiriyo dheefta aakhiro ee aad heli kartana waxay lamid noqonaysa adigoo aysan waligaaba wax kudhaafin nimcadaad heshay way kawayntahay samada iyo arladaba hadii aad arinkaa Allahu Tacaalaa kuwaafajiyo kuguna hanuuniyo caqlina aad leedahay iyo garasho waxaan shaki lahayn inaad raacayso diinta islamka rumaynaysidna nabigii nabiyada lagu qatimay sayidkeena muxamed caleyhi salatu wassalaam rumayntiisana waxay kadhigan tahay adoo anbiyadii iyo rusushii oo dhan rumeeyey iyo wax alla wixii ay layimaadeen oo sharci iyo diin ah shakina kuma jiro inay kugu culustahay hadii uu Allahu Tacaalaa tawfiiqda kuwaafajin waayo waxaad kusoo barbaartay nacaybka rasuulkaas suuban iyo nicitaanka diinkiisa cad ayadoo ay kujiidayso casabiyad iyo xamiyadii jaahiliyada oo ay kugu soo barbaariyeen ikhwaankii shiyaadiinta oo ah aabo yaasha macalinmiinta saxiibadaadii xun xumaa adeecadihii talafisiyoonkii iyo madaxdii waxaana layiri waxii yaraanta lagubartaa waxay lamid tahay dhagax wax lagu qoro in latirtiro wax dhagax lagu qorayna dhib badan ayaa lagamaraa waxayna ubaahantahay dhaqankaagii iyo diinkaagii oo aad khilaaftaa jihaad wayn o aad naftaada lagasho iyo diinta aad raacayso oo aad xujooyin cad cad u hesho hadaba aniga waxaan kugu kaalmaynayaa xujooyinkii cadcadaa ee diinka xaqqa ahaa hadaad waanada yeeleeyso warkaygana qaadanayso hadaba dhagayso waxa aan kuleeyahay qof walboow waxaad ogtahay raacitaanka diimaha laraacayo in laga leeyahay liibaan abad ah lagana badbaado ahlu naarnimo abad ah diinta Allahu Tacaalaa uu adoomadiisa kukalifay oo anbiyada iyo nabiyadiisa

usoodiray meel walbo oo laga helo diinta Allahu Tacaalaa raacideeda ayaa lagu gaaraa liibaanta ladoonaayo dantuna ma ahan inuu kutacasubo diimihii uu asaga kusoo barbaaray siday doonaan ha ahaadaane rasuul walbo oo laga helo sharuudii nabinimada oo lagahelo sifooyinkii inuu Allahu Tacaalaa khalqigiisa usoo diray si uu diinta rabbi ugu cadeeyo waxaa waajib ah inaad raacdo diintiisana aad raacdo waana diintii Allahu Tacaalaa ee raacitaankeeda lagu gaari lahaa liibaan abad ah khilaafideedana lagu mudan lahaa ciqaab abad ah diintaas haday doonto haba khilaafto hawada naftaada iyo dhaqanka aabahaa iyo hooyadaa hadaba fiirii diimihii 3 da ahaa 1 diinta islamka 2 diintii kirishtanka 3 diintii yahuudda, hadad si garsoornima ah u fiiriso diimahaas waxaa shaki la,aan ah inaad raacayso diinta muslimka asbaaba dhawr ah darted.

1- Waxaad helaysaa axkaamta diinta islamaka ee ku taxquulda daatada Allahu Tacaalaa iyo sifaadkiisa kaamilnimo dhamaystiran iyo nasahnima dhamaystiran waxaad kaloo helaysaa axkaamta kale ee ku taxluuqda cibaadadiisana inay tahay mid sugan oo sahlan oo mushkilad iyo dhibaato.

Waxaad kaloo helaysaa axkaantiisa kutaxluqda mucaalada makhluuqa inay tahay cadaalad iyo garsoor shareecadiisana ay waasac tahay waxaan shaki lahayn Allahu Tacaalaa inuu usoodajiyay khalqigiisa si ay asaga u aqoonsadaan una caabudaan diimihii kale waxay manta marayaan heer caqliga saliimka ah uu diido axkaantooda ku taxluuqda iyo sifaadkiisa oo aysan banaanayn in Allahu Tacaalaa loorumeeyo waxaabaha ay aaminsan yihiin waayo mabanaano Allahu Tacaalaa inuu soo dajiyo kaamilnimadiisa.

2- Sababta 2 aad waxaanu fiirinaynaa sadexii nabi ee layimid waa sayidkeenii Muxamed calayhi salatu wassalaam

waxaa kahoreeyey sayidkeenii Ciise waxaa kasii horeeyey sayidkeenii muusaa hadaan akhbaartoodii iyo arinkoodii si hoose ufiirino waxay taariikhyahana isku waafiqeen sayidkeena muxamed ah inuu ahaa midkii ugu caqli badnaa uguna cilmiga badnaa uguna kulminta badnaa sifaadka fadliga uguna aqoonta badnaa umuuraha aduunka iyo akhiradaba ayadoo lala qabo inuu ahaa mid aan waxno qorin waxna akhrin kuna soo dhexkoray dad jaahil ah asaga ayaa mudan raacis ninkii asaga raacana labada nabi oo kale wuu raacay wuuna rumeeyey iyo nabiyadii kale oo dhan.

3- Sababta sadaxaad waxaad ogtahay sayidkeenii Muxamed *Calayhi Salaatu Wassalaam* inay isku waafaqeen taariikhyahanadii aduunka oo dhan jisiyaday doonaan halahadeene diintay donayaan ha haysteene in uu yahay midka ugu caqliga badan ugana fadliga badan uguna kulminta badan sifooyinka kaamilnimada isla markaa hadaan fiirino mucjisaadkoodii iyo daliilkii nabi nimadooda waxaan helaynaa sayidkeena muxamed ah inuu yahay midka ugu badan xaga daliilka iyo mucjisaadka uguna xooga badan xaga xujada hadii ka isugeeyo mucjisadii anbiyadii oo dhan loona fiiriyo mucjisadii nabigeena magaarayaan 10 meelood meesheed anbiyadii kale oo dhan mucjisadeedii way go'day laakiin qaar kamid ah mucjisadii nabigeena wali waa daa,im illaa qiyaamahana way joogaysa midda ugu wayn waa quranka waxaana kamid ah karaamaadka oowliyada umadiisa saacada qiyaamaha calaamaadkeeda hadaba nabigaas mucjisadiisa ay badan tahay xujadisana ay xoog badan tahay baa mudan in laraaco raacidiisuna waxay keenaysaa rumaynta nabiyadii oo dhan hadaan fiirino wadooyinka ay soomareen.

4- Saddexdaas diimood oo lagu ay dadka kusoo gaartay waxaanu ogaanaynaa wadada uu nagusoo gaaray hadaan muslimiintii nahay quraanka iyo diinta islama iyo

mucjisaadka sayidkeena Muxamed ah iyo daliilka nabinimadiisa in ay tahay midda ugu an saxnimada badan uguna xooga badan uguna toosnaanta badan markii loo eego wadada ay yahuuda kusoo gaartay diintii nabi Muuse ama ay nasaarada ay kusoo gaartay diintii nabi ciise iyo mucjisaadkoodii arinkaas waa iska cadyahay.

Lakiin xoogaa aan kuu kordhiyee wadada ay nagu soo gaartay diinteena islaamka iyo mucjisaadka nabigeena muxamed aad ayay u fara badan tahay waqtiga nabigeena waa nuu dhawaa marka loo eego nabiyada kale midda kale dad badan ayaa kasoo wariyey dad badan oo lagu kalsoon yahay kutub badana waa lagu diiwaaliyey sidaas ayaa waxaa ku xasilay yaqiin aysan yaqiini kadanbayn qof walbo oo garsoor lehna.

Waxuu yaqiinsanaaa diinteena muslimka ah inay tahay diintii uu layimid sayidkeena muxamed ah kalana yimid xagga rabigeena mucjisadkiisa iyo waxyaabaha tusaalaynaayo nabinimadiisa inay u dhacday si xaqiiqa ah.

Sida ay wariyeen asxaab tiisa iyo dadkii kadanbeeyey laguna qoray kutubta kuna faaftay aduunka waxay ogtahay cid walbo oo ay taariikhda xustay in nabigeena lasoo diray asgooo 40 jir ah uuna geeriyooday asgoo 63 jira ah.

Risalada rabigiis ahna uu gaasriisay ummada mudda labaatan iyo saddex sano ah intuusan dhimana ay jaziiratul carab oo dhan raacday diintiisana arlada ku faaftay dacwadiisana mashriq iyo maqriba ay gaartay asxaabtiisana ay noqotay wax badan 150 kun maxaa yeelay waxaa laxajiyey xajkii ugu danbeeyey 120 kun oo asxaabi xajkaas dabadiisna nabiga waxaa uu noolaa sideetan maalmood xajkaa dhexdiisa ayaa Allahu Tacaalaa waxaa kusoo dajiyey aayada dhahayso (**Maantaan diinkiinii idiin dhamaystiray, waxan idinka raali ahay diinta Islaamka**).

Kumanaankaas faraha badane ee asxabtiisa ah

dhamantood waxay ahaayen kuwa lagu yaqaan run iyo toosnaa in badan oo kamid ah waxay ahaayeen caalimiintii koonka ayagaana sooraray diintiisii iyo mucjisaadkiisiiba waxayna ukala qaaden jahooyinka aduunka kumaanku waxay gaarsiiyeen boqolaal kun waxayna kuwariyeen taariikhda iyo mucjisaadka sanad xariira ilaa nabi muxamed axaadiis tiina waxay uqaybiyeen saxiix iyo xasan iyo kuwa kale beena way kadhawreen waxay yahuudu kudhex qarisayna way ka tureen aadbayna usugeen.

Waxaa kaloo kamid ah waxyaabaha ansixinaayo wadada ay nagu soo gaartay diinta sayidkeena maxamed ah iyo mucjisaadku kalinimada waxyaabaha lagu ogaaday o ay kamid tahay kalinimada Allahu Tacaalaa iyo inuu Allahu Tacaalaa kusifoobay kaamilnimo dhamaanteed kana nasahanyahay nusqaan dhamaanteen iyo risaalada sayidkeena muxamed ah c*alayhi salaatu wassalaam* runsheegnimadiisa aminimadiisa iyo inuu yahay sayidkii nabiyada iyo mursaliintaba mucjisaad fara badan inay kasoofuleen oo caadada khilaafsan isasoo bixinta xisaabta siraadka janada naarta salaadda faralnimadeeda duhur, casar, cishaa mid walba inuu afar rakcadood yahay subaxana laba yahay maqribkana saddex yahay soonku uu faral ayahay xajku uu faral ayahay naaguhu inay jirkooda baneeyaan ay xaaraam tahay liwaadka sinada iyo khamrada ay xaaraam yihiin ruux aan wayso qabin ama jinaabo qabo ama xayl qabo uusan tukan Karin axkaamtaas oo dhan

Waxaa isku waafaqay islaamka oo dhan caalimoda iyo jaahilkoodaba wadadii ay diinta islamka nagu soo gaartay wataas nin walboo kirishtaan ah ama yahuud ah hadii uu garsooraayo shaki kama galaayo inay wadada islamka ay kaxoog badan tahay waddada ay ayaga diinta kusoo gaartay waayo wadooyinkoodu malaha inta aan soo sheegnay oo dhan maxaa yeelay nabigeena iyo nabi ciise waxaa u

dhaxeeyay mudda kabadan lix boqol oo sano maxaa yeelay dhalashadii nabi Ciise iyo hijiryadii nabigeena waxaa u dhaxaysay 621 sano[52] mudadaasna dhulka oo dhan jahlibaa camimay marka maysan sahlanaan Karin in akhbaar saxiix ah ay soo gaarto mudadii danbe ayadoon waxbo laga badalin hadana sayidkeenii Ciisa ahaa muddadisa maysan dheerayn maxaa yeelay Allahu Tacaalaa waxaa uu samada u kor yeelay asagoo 33 sano jiro islamarkaana diintiisa maysan xoogaysan asxaab fara badana muusan lahayn waxii rumeeyey oo dhan waxay ahaayen 12 nin oo ugaarto la daciifiyo ah.

Asaguna waxaa uu ahaa mid laga adkaaday oo aysan usuura galin in risaalada ilahay nabad galyo iyo dagaan kuguto waayo yahuud ayaa ladagaalamaysay markii nabi Ciise lakoryeelay dabadeed mudda dheer ayaa kitaabkii injiil lasoo aruuriyey asagoo ruwaayado kala duwan kusugan dad badan oo jaahilin ahna gacanta u galay xaalad layaab leh ayuuna ku yimid kitaabkii wuuna is wada khilaafay si'aad hada arkaysana qayb qayb waafiqsan maleh sidaa daraadeed madaxdoodii ayaa isu yimid waxna way kudareen waxna way kanusqaamiyeen waxyaalo ayay kitaabkii kuqoreen diinta looga baxaayo dadkiina kuwaajibiyeen inay diin kadhigtaan waxaasna nabi ciise lagama warin axad xawaariyiintiisii kamid ah lama soo warin sidaa daraadeed khilaafaad baa dhexdoodii kabatay waxayna u qaybsameen kooxo kala duwan sabin walbana kirishtaanka waxay usii kala baxayaan madahiib cusub waxna way kudaraan kitaabkoda waxna wa ay katiraan mar walbo wadada uu kuugaaray diintii ciise kirishtankana waa sidaas sidoo kale hadii aan kahadalno wadadii ay muuse kusoo gaartay diintiisa iyo mucjisaadkiisa horta hadaan ka hadalno dhinaca sanadka.

[52] waa sida ay qaban Culimada Islaamka inta u dhaxeyso labada nabi waa 1000 sano.

Waxaa u dhaxeeyey dhalashadii nabi muuse iyo hijiryadii nabi muxamed *Calayhi salaatu wassalaam* 2348 sano waxaana soomaray aduunka casriyadii jaahiliyada yahuudana Allahu Tacaalaa waxaa uu kusaladay marar fara badan cadaw aad u halaagi jiray sida bukhtu nasar oo kaqixiyey baytul maqdas una qaxiyey ardul baabil ilaa laga waayo sidii loolaynaayay wax yaqaano kitaabkii tawreed mardanbe ayaa waxa ay heleen nin layiraahdo danyeel ninkaas ayayna ka qorteen kitaabkii tawreed ahaa muddaba mudadii kadanbayso kitaabka waxaa lagu samaynayey wax kudarid iyo kadhimid ilaa baadil iyo waxaan banaanayn laga buuxiyo.

Laakiin anaga lagasoo bilaabo xiligii nabigeena (*calayhi salaatu wassalaam*) dadka waxaa usiyaadaayey cilmi iyo hormar jaahiliyana nama soomarin sidii umadahii hore oo kale shakina kuma sugna saddexdaan diimood haduu fiir fiiriyo cadaaladna uu yahay tawfiiqdana rabi waafajiyo inuu diinta islamka raacayo hadad doonayso nabigeena *Calayhi salaatu wassalaam* mucjisaadkiisa inaad ogaato iyo daliilshiisa inaad ogaato si aad u ogaatid waxa uu Allahu Tacaalaa siiyay nabiyaasha oo dhan in ay yihiin wax yar markii loo eego waxa uu Allahu Tacaalaa nabigeena siiyey maxaa yeelay waa sayidkoodii waa kii ugu danbeeyay (calayhi salaatu wassaalam) waxaad uga bogan kartaa kitaabkayga aan kumagac aabay (xujatalaahi calal caalimiina fii mucjizaatil sayidal mursaliina calayhi salaatu wasalaam)

Intaas ayaan uga baxnay khulaasatul kalam kii sheikh Yusuful Nabhani.

Waxaa lagu xusay kitaabka (alqawl althabti firadi calaa dacaawi barotistaandi) wuxuu yiri sheekh (Calamee Raxmatullah)[53] in lawaayay laba kitaab ee tawreed iyo injiil oo asalka ahaa intaan nabigeena lasoo bixin kahor kuwa hada yaalaana waa 2 kitaab oo lagu keenay riwaayado isugu jiro

[53] Raxmatulahi alhindiyi waxa uu dhintay sanidii 1306h 1889m gudaha magalada makah Allahu Tacaalaa sharaf iyo karaamo ha u siyaadiyee

run iyo been mana oran karno 2 dii kitaab ayaa xiligii nabigeena soogaaray kadib ayaa taxriif lagu sameeyay maxaa yeelay tawriid iyo injiil wa kitaabadii Allahu Tacaalaa u waxyooday nabi muuse iyo nabi ciise kutubta hada ayaalo ee lagu sheego tawraad iyo injiil mahan tawreed iyo injiishii uu kutaabkeena quranka ah sheegay wixii uu kabeeniyo waan beeninaynaa wixii uu rumeeyana waan rumaynaynaa wixii uu ka aamusayna waan ka aamusaynaa wax sanad ah oo cadna looma heli karo injiisha 4ta ah inay tahay kalaamka Allahu Tacaalaa waxuuna yiri sheekhu anaga oo goobtii muranka joogno wadanka hindiya ayaan marar badan waxaan kadalbanay inay tixraac nookeenaan kutubtoodiina waan baarnay wax tixraac ah kaamanan helin waliba qayskii faranji la oran jiray waxaa uu ku cudur daartay goobtii doda waxuuna noosheegay inusan heli Karin wax tixraac ah masiibooyin waawayn oo ku dhacay qarniyadii hore laga soo bilaabo qarnigii masiixiyada ilaa lagasoo gaaro 313 sano ninka hiruun layiraahdo waxaa uu cadeyey badalid inuu kudhacay mujaladka 2 aad ee tafsiirkiisa culamadooda waxaa kamid ah ay cuskadaan taariikhyahan ka Muushin[54] sidaas oo kale ayuuna yiri kitaabkiisa taarikhda ah ee ladaabacay 1332H 1913M qaybtiisa kowaad warqadiisa 65 aad waxaa kale oo kamid ah culumadooda ay cuskadaan Laardis sidaas oo kale ayuuna asagana kuyiri tafsiirkiisa qaybtiisa shanaad warqada 124, culumadooda ay cuskadaan waxa kamid ah Jayruum[55] waxaa u yiri ninkaas markii aan doonay injiilka axdiga jadiidka ah inaan turjumo qaybtii agtayda taalay waxan kahelay iskhilaaf fara badan, culumda

[54] Baadarigii Jarmalka ahaa ee la'oranjiray mushin Juun Lornis Fon waxaa uu ahaa tariikhyahan waxaa uu ku dhashay magaalada Labjak sannadkii 1694m wuxuu uu ku geeriyoday magaalada Kufitaandan sannadkii 1174h 1755m kutubtisana waxaa ugu caan sana (Tariikhda Injiisa Muqadaskaa)

[55] Jiirom Romasant wuxuu joogay sadex sano magaalada Istanbuul wuxuuna aaday Roomaa sanadkii 382 waxaana laga dhigay xoghayaha boobka wuxuuna u tarjumay kitaabka Injil Laatiin maalinta sodonaadka sanad walba waxaa loo qabtaa sanad guuro rasmi ah kitaabkiisii baana hadda rasmi u ah kaniisadaha.

ay cuskadaan waxa kamid ah Adam Kalaark[56]asna waxaa uu sheegay turjimada luuqada laatiinka lagu turjimay ee uu turjimay ninka la yiraahdo jayruum inuu khilaaf badan kajiro, waxaa kale oo kamid ah culumada ay cuskadaan Waarid Kaatholik[57]waxaa uu kuyiri warqada toban iyo sideedaad kitabkiisa ladaabacay sanadkii 1841 sidaa daraadeed culumadoodii waxay qirtay nabi ciise inuusan waxbo qorin oo uussan injiil qalin kuqorin shay qoran gabi ahaanba inuusan katagin oo kusaabsan hadaladiisa axadna uusan kukalifin inuu aruuriyo oraahyadiisii cidna uusan umiirin shareecdisii laakiin waxa ahayd sheekadiisa iyo wacyigiisa mid laga dhagaysto lakin aan laga qorin intuu joogay iyo markii lakoryeelay intaba markii lakoryeelay kadib ayaa taageerayaashiisii waxay galeen dood badan iyo dagaal badan oo ay kudifaacayaan diintooda mana aysan kufakirin inay qoraan caqidada asalka dinkooda marakaa ayaa waxaa diikooda kadhashay is khilaaf fara badan kooxa kooxa ayay ukala baxeen koox walbana injiil; gaar ah ayay samaysatay ilaa ay kagaaraan konton injiil kabadan sida laga fahmayo yurubuyiinta iyo adiib iyo qadiis shayriim iwm kadib markii nabi ciise la koryeelay kadib waxay isku wafaqeen 4 injiil.

1- Waxaa layiraahdaa Injulul Mataa waxuuna kayimid xawariyiintii 12 ka ahaa waxaana lagu qoray luuqada Suryaaniga waxaana lagu qoray dhula falastiin marii nabi ciise lakoryeelay kadib laba iyo toban sano qaybtii asalka ahaydna way luntay sida ay ayaga sheegayaana turjimidii yuunaanka ayaa hartay.

2- Waxaa weeye Injiilul Marqas,waxaana lagu faafiyey injiilkiisa luuqada yuunaaniga magalada Rooma markii nabi Ciise lakoryeelay 30 sano kadib.

---

[56] Aadam Kalarik 1179-1249 h (1760-1832 m) wuxuu ahaa wacid Injiil oo u dhashay dalka Ayrlandi kutubtiisana waxaa ugu caansan (Tafsiirka Kitaabka Muqadaskaa)

[57] Waarid Wiyam Jorje 1228-1300 h (1812-1882 m) baadarigii kaatholiga ahaa ee ingiriiska ee caanka ahaa waxaa ugu caansan kutubtiisa (Yuulka Kaniisadda Masiixiga).

3- Waa injiilul Luuqaa asaguna waxaa uu kayimid 70 kii masiixna muusan arag injiilkiisuna waxaa lagu faafiyey magaalada Askandariyah markii nabi ciise lakoryeelay kadib 28 sano.

4- Waa Injiilul Yuxanaa asaguna waxaa uu kayimid xawaariyiintii laba iyo tobanka ahaa waxana lagu faafiyey injiilkiisa magaalada Afsiis luuqada yuunaaniga luuqadaaso uu bartay asagoo waayeel ah markii nabi ciise la koryeelay 38 ama 75 naso Kadib, hadaba afartaas injiil ninkii akhriyaa waxaa uu garanayaa inaysan ahayn injiilkii Allahu Tacaalaa xagiisa laga soodajiyey waayo waa ay isburunayan wayna iska hor imaanysaa waxa ay shegayaan markaad aragto sida ay iskaga hor imaanayaan waxaad ogaanaysaa inay tahay hadalo iyo sheekooyin aan laga maqal nabi ciise iyo asxaabtiisa midnaba waxaa kamid ah sheekada sawirka daldalaada iyo dilka iyo madoobaashada qoraxda iyo isbadalida midabka dayaxa iyo dilaacitaanka haykalka, amuurtaan sida ay sheegayaan waxay dhacday nabi ciise kadib waxayna u dhacday dilkiisii kadib hadana hadalkiisii ayay kadhigayan . Ninka layiraahdo Luuqaa iyo Marqas xawariyiinta kamid ma ahayn waxay Injiishooda ka wariyeen dad kale oo nabi ciise lajoogay waxayna ku qoreen dadkale wararkood sidaas darteed lama xujaysan karo.

Luuqaa wuxuu ku qirtay injiishiisa bilowgeed in uu san lakulmin nabi ciise uusanna u khidmayn ee uu ka qoray kitaabkiisa wacdigii ay jeedinjiree khaadimiintii Kalimada (Masiix), kitaabkiisa mardanbe ayaa maga Injiil waxaa u bixiyay ninkii tarjumay.kitaabka (Alqowlu Al-Thabta) waxaa alifay Sayid Cabdi Qadir Al-Askandarani sanadkii 1341h-1923m wuxuuna u jawaabayay kitaabka (Al-Aqaawiil Al-Qur’aaniyah) oo uu alifay Baadariga Barotastanka xaxaana lagu daabacay maktabada Al-xaqiiqa ee istanbuul sanadkii 1990m horayna waxaa loogu faafiyay

masar isagoo carabi ah.

Waxaa lagu sheegay kitaabka (Iidaaxul-Maram) ee luuqada Turkiga[58] kubaxaayay waxaa uu yiri kitaabka injiil; asalkiisa waxa uu ahaa luuqada cimraaniga waxaana tirtiray yahuudii markii ay raben inay dilaan waxaana uu aha nuskha ijnil kamid ah inaan laqorin saddex sano gudahood masaaradana waxay inkiraayeen injiilkii asalka ahaa afar kitaab ee lagu magacaabo injilna lagama dhex helo hal ayad ah uu cibaado tusaalaynayso kaliya waxaa kuqoran dood u dhaxayso ayaga iyo yahuuda haday leeyihiin waxaan kucibaadaysanaynaa tawraad maxay ufartoomi layihiin amaradii muhiimka ahaa ee tawreed sida waynaynta malinka sabtida ah malmo cayiman oo lasoomo ayada oo lataagan yahay oo laducaysto doofaarka hilibkiisa oo an cunin katagitaanka arimahaas wax cadayn ah uguma sugno injiiladooda qurankeena kariimka ah waxaa ku dhexsugan cadaymo cibaadaadka oo dhan akhlaaqda suuban xuquuqda ganacsiga beeraha iyo xalinta mushkilaadka ruuxda iyo jasadka sugaanyahanadii gaaladu way awoodi waayeen hal aayad oo kitaabkeena lamid ah mudda kabadan 1400 sano ayagoo aad isugu dayey kariwaaga ay kariwaayeena waxaa uu daliil u yahay in uu quraanka yahay kalaamkii Allahu Tacaalaa makhluuqna uusan asagoo kale keni Karin mucjisaadkii kale ee nabiga way ka go'een ilaa quranka moyee laakin quranka xili walbo iyo meel walbo waxaa uu uga iftiimayaan sidii qoraxda oo kale wuxuuna dawanayaa cudur kasta wuxuuna Allahu Tacaalaa kusoo dajiyey quraankisa karimka ah xabiibkiisii suubanaa si ay adoomada ugu liibaanaan.

Allahu Tacaalaa na waxaa uu ubalan qaaday kitaabkaas

[58] Waxaa alifay kitaabka (Iidaaxul Maraam) Cabdullaahi Cabdi Binu Destan Musdafaa Al-Manaasdirii wuxuuna dhintay sanadkii 1303 (1885) kitaabkaan waxaa lagu daabacay Istanbuul sanadkii 1288 (1871)

inuu ka xifdinaayo wax doorin ah naxariistiisa aan dhamaanayd darteed balan qaadkaasna umuusan balan qaadin kutubadii hore quranka Allahu Tacaalaa waxaa uu kusoo dajiyey xabiibkiisa muxamed ah asagoo ugu soo dhiibay malakul jabriil waxuuna usoo dagaayay qayb qayb mudda labaatan iyo saddex sano ah waxaana aruuriyey quranka khaliifka kowaad abuu bakarul sidiiq waxuuna noqday kitaab wayn oo lagu magacaabo musxaf waxaana isku waafiqay kii nabigeeda isku waafiqay saddex boqol sodon iyo saddex kun oo asxaabi nabigeena Muxamed ah quraanka asxaabtiisa waa uu fasirtay culumadiina waxay qoreen waxay kamaqleen asxaabta suuban waxaana la alifay kumanaan kitaab tafaasiir ah caalamka oo dhan ayaana lagu baahiyey kutubta quraanka ee aduunka dhan taalo wax dhibic ah ama xaraf ah iskuma qilaafsano.

Kitaabada oo dhan waxay isku waafaqsan yihiin kali ahaanshaha Allahu Tacaalaa iyo isa sobixinka qiyaamaha waxaa uu sheegayaa taariikhyahanka layirahdo Shamsudin Saami afaandi sanadka marii uu ahaa 1316 hj oo waafiqsa 1898 waxa uu kuyiri kitaabkiisa **Khaamusul Aclaam** nabiga diinta islaamka waa Muxamed Calayhi Salaatu Wassalaam aabihiin waxaa layiraahdaa cabdulaahi awoowgiina waxaana layiraahdaa cabdi mudalib binu haashim bine cabdi munaaf bine qusayb bine kilab waxuuna dhashay labaatan bishii 4aad sanadkii 571 miilaadiga oo wafaqsan habeenkii laba iyo tobnaad ee bisha rabicul awal subaxdii aroortii maalin isniin ah ayuu kudhashay makka al mukarama hooyadiina waxaa layiraahdaa amina bintu wahab binu cabdi munaaf binu suhrah binu kalab nabiga aabihii cabdulaahi waxaa uu usafray safar ganacsi xaga sham soo laabashadiisii ayuuna kugeeriyooday guriga naabiqa oo madiina daris al ah dadiisana waxay ahayd labaatan iyo shan sano jir

wiilkisana muusan arag nabigeena shan sano ayaa waxaa uu joogay xalimatul sacdiya agteeda qabiilada reer binu sacadna waxay ahaayeen kuwa carabta ugu codka fasiixsan sidaa daraadeed nabigeenu kuhadli jiray luuqad midda ugu fasiixsan maruu nabigeena lix sano jiro hooyadiis amina ayaa abtiyaashiis xagooda uqaaday dhinaca madiinatul munawara halkaas ayayna ku geeriyootay.

Waxaana sooqaatay ummu ayman oo keentay makka una dhiibtay awoowgiis cabdi mudalib sanadkii sideedaad waxaa la oofsaday awoowgiis waxaana uu kusoowareegay nabiga aderkiis abuu daalib markii toban iyo laba jir ahaan aderrkii waxaa uu oola safray dhanka sham safar ganacsi sidookale asaga oo toban iyo todoba jir ah waxa ulasafray dhinaca yeman adeerkii subayr waxuu usafray asagoo labaatan iyo shan jir ah dhinaca sham asagoo wado badeeco ay leedahay khadiijatul kubraa radiyalaahu canhaa waxaa uu nabiga can ku ahaa caqli adab dabeecad amano laba bilood kadibna waxaa uu guursaday khadiijatul kubraa afartan jir markii uu ahaana waxaa u yimid jabriil qof rumeeyana waxaa u horeeyey sayida khadiija dhinaca ragana sayid abuu bakar dhinaca caruurtana sayid cali iyo zayd ibnu caaritha alaha karaali noqdee dhamaantood dadka inuu diinta ugu yeero si guud ahaan ayaa lagu amray.

Markuu jiray afartan iyo saddex sano mushrikuuntu markay aad u dhibeen ayaa Allahu Tacaalaa waxaa uu ufsaxay inuu u hijirooda madiinatul muna wanawarah asagoo konton iyo saddex sano jir ah maalintii 8 aad ee bisha rabiicul awal ee ku aadan bisha Sebtember labatankeeda sanadka 622 miladiga malin isniin ah

Khilaafadii Cumar bishii Muxaram kowdeeda (Bishii Hijriga) sanadkaan bilowgiisa ee 623 Miilaadiga sanadkaan bilowgiisa (Dagaalkii Badar) ayuu waxaa uu yimid tuulada

Quba ee u dhaw madiinatul munawaraa markii jihaadka la amrayna sanadkii labaad ee hijriga waxaa dhacay duulaankii waynaa ee badar waxaana lagu laayay 950 nin oo mushrikiinta kamid ah waxaana lagu qafaashay afartan iyo afar mushrikiinta kamid ah sanadkii saddexaadna waxaa dhacay duulaankii uxud tirada mushrikiinta waxay ahaayeen saddex kun halka ay muslimiinta ka ahaayeen 700 boqol halkaa waxaa kushahiiday 75 saxaabi sanadkaas waxaa soodagay aayaadkii xijaabka naagaha sanadkii afaraadna waxaa dhacay dulaankii loyaqaanay khandaq ama axzaab sanadkii shanaadna waxaa dhacay duulaankii loo yaqaanay banii musdaliq sanadkii lixaadna waxaa dhacay duulaankii looyaqaanay khaybar isla sanadkaas waxaa dhacay beecadii ridwaan ee xudeebiyah.

Sanadkii todobaadna waxuu nabiga waraaqo udiray qayskii rooma iyo kisrihii furus asagoo islanimo ugu yeeraayo sanadkii sideedaad waxaa dhacay duulaankii mutah ee lala galay ciidamkii roomanka ee uu hoogaaminayey hiraqle waxana lafurtay makka al mukarama isla sanadkaas waxa dhacay duulaankii xunayn sanadkii sagaalaadna waxaa dhacay duulaankii tabuuka sanadkii tobnaadna nabiga waxaa uu xajiyey xajatul widaac sanadkii kow iyo tobnaadna waxa nabiga kudhacay jiradii qandhada oo haysay toban iyo saddex maalmood kadibna waxa uu kugeeriyooday gurigiisii masjidka kudhawaa maalin isniin ah bisha rabiicul awalna aytoban iyo todoba tahay cumriga nabigana waxaa uu ahaa 63 naso.

Nabiga waxaa uu ahaa nin furfuran hadal macan wajigiisa barako iyo nuur ay kamuuqato qof walbo oo arkana uu jeclaanayo dabeecad wanaagsan dul qaad badan Samir badan sayida khadiija nabiga waxay u dhashay laba wiil iyo afar gabdhood maariyatul qibdhiyah waxay u

dhashay hal wiil sayida faduma ma ahane intii kale nabiga hortiisa ayaa la oofsaday halkaa waxa ku dhamaadhay kitaabkii qaamuusul aclaam.

İmaamul Qazaali wuxuu kusheegayaa kitaabkiisa kiimiyaa'u asacaadah, Allahu Tacaalaa waxaa uu adoomadiisa usoo diray nabiyaal asaga oo usoo marinayo Allahu Tacaalaa adoomadiisa waxaa uu usheegay wadooyinka xun xun ee ku hoogaaminaayo masiibooyinka, Allahu Tacaalaa nabiyadiisa kii ugu khayrka badnaa uguna dambeeyey waxaa uu ahaa nabi Muxamed Calayhi Salaatu Wasalaam waxaa uu ahaa dadka oo dhan nabigooda waxaa uu ahaa aniga aduunka oo dhan waxaa uu ahaa nabiga wadamada aduunka oo dhan waxaana uu u ahaa caalamka naxariis dadkoo dhana waxaa kuwaajib ah inay raacaan oo rumyeeyaan meelkas oo ay joogaan qofkii rumeeyaa oo raacaa waxaa uu gaaray liibaanta aakhiro iyo midda aduunkaba waxaa hoogay oo ba,ay wixii aan raacin oo an rumayn waxayna leeyihiin cadaab xanuujiyo oo hoojiyo.

GABAGABO

Diin waxaa layiraahdaa axkaam uu Allahu Tacaalaa kusoo dajiyey anbiyadiisa dushoda si uu dadka ubaro waxii Allahu Tacaalaa raali galinayo iyo acmaasha in lala yimaadaa ay waajib tahay si loogu gaaro aduun iyo aakhiraba liibaanta diin lama yiraahdo waxyaabaha khiyaalka ah ee ay maan gaabyadu ay caqliyadoodu ay kasawireen si uu Allahu Tacaalaa raali uga noqda waxaa kuwaajib ah inuu muslimo qofkii aan musliminna waxaa lagu magac aabaa gaal.

Qofka muslimka ah waxaa laga rabaa Allahu Tacaalaa inuu rumeeyo caabudo shareecadana kuraaco qawl iyo ficilba cibaadadana uu layimaado dar Allahu Tacaalaa shareecana waxaa layiraahdaa wixii uu Allahu Tacaalaa amray iyo wixii uu reebay laguna cadeeyey quraanka kariimka ah iyo axaadiista sharafta leh laguma barto kutubta fiqiga ah shareecada oo labartana waa ku faradul cayn qof walba oo muslim ah qiritaanka iyo rumaynta erayga tawxiidka waxaa lagu tilmaamaa iimaan qofkii rumeeyana waxaa looyaqaanaa mu'min erayga tawxiidkana waa (**Ash'hadu An Laa Ilaaha Illalaah Wa Ashhadu Anna Muxamadan Cabduhu Warasuluhu**) Micnaheeduna waa ilah mooyee cid kale oo cibaado mudan majirto rasuulkiisa muxamed ahna inuu rasuulna yahay nabina yahay axaadiistiisa oo dhana ay waxyi yihiin amarada in lasameeyaa ay wajibka yihiin waxaa layiraahdaa faral waxyaabaha la mamnuucayna waxaa layirahdaa xaaraam marka la iskudaro labadaasna waxaa layiraahdaa shareeco.

Qofkii muslimo waxaa ku waajib ah inuu barto cilmiga islamka qofki yiraahdo barashada diinta waajib mahan waa gaal qofkii gaalnimo kudhintana waa lacadaabayaa sidaas ayay quraanka iyo xadiistaba cadeeyeen qofkii islamnimada kabaxo waxaa lagu magac aabaa murtad qofkii rumeeyaa quranka iyo xadiista saxiixa ah waxaa

layiraahdaa ahlu sunnah qofkii rumaysan waxa uu layimid kitaabka quranka iyo axaadiista sharafta leh ee aanan raacin culumada wadadoodii waxaa layiraahdaa mad hab laawe kuwa tafsiirka khaldan aaminsana waxaa layiraahdaa ahlu bidcah kuwa aayadaha quranka iyo axaadiista cadcad micna khaldan kusafiro waxaa lagu magacaabaa mulxid muslimba ha isumaleeyee muslim ma ahan waa gaal ahlu bidcada gaalo mahan laakin waxa lacadaabaa cadaab xanuun badan qofka isu muujiyo muslimnimo asagoon muslim ahayn micna khaldana kufasiro culumta asagoo muslimiinta khiyaamaayo zindiiq culumada ahlu sunah waxay isku khilaafeen fahanka qaybo kamid ah faraca shareecada waxayna noqdeen afarta mad hab.

1-Xanafiyah
2- Malikiyah
3-Shaficiyah
4-Xanbaliyah

Afartaas mad hab xaga caaqiidada way kamidaysan yihiin lakiin waxay kukala qaybsan yihiin macalka faraca ah ee cibaadada qaarkoodna qaarka kale ayay walalo u yihiin muslimkii doonaana waxaa uu dooranayaa mad habkii uu doono asagaas ayuuna raacayaa acmaashiisa oo dhan waxaa uu laraacayaa mad habkiii uu doortay qaybsanaashaha ay muslimiinta qaybsan yihiina waa raxmad Allahu Tacaalaa xagiisa nooga timid maxaa yeelay waxii mad hab kuculus midkale ayay kufudud yihiin.

Kitaabka **Sacaadatul Abadiyah** waxaa kusugnaa salaadu inay tahay cibaadada midda ugu muhiimsan waxaana lagu ogaanayaa ruuxa tukada islamnimadiisa ruuxii aan tukana islamnimadiisa shaki ayaa kujiro ruuxa salaada ixtiraamayo lakin wahsi uga tagayo waa ladilayaa sida ay qabaan madhabka maalik shaafici iyo xanbali lakin

madhabka xanafi waxaa uu qabaa in laxabiso ilaa uu katukado waxaana la amrayaa inuu deg deg usoo qaleeyo waxaa kusugtaa kitaabka **Durul Muntaqii** liculaa u diin alxaskafi iyo kitaabka **Raddul Muxtaar** libnu caabudiin raxmatulaah caleehimaa iyo kitaabu salad oo ay faafisay maktabada xaqiiqa ee Istanbuuul salaadaha afarta ah oo lagatago cudur la'aan iyo ayagoon waqtigooda lagu gudanin waa laba danbi oo waa wayn oo kala duwan waxaa waajib ku ah qof inuu salaadda soo qaleeyo waxaa kale oo waajib ku ah inuu soo xajiyo ama uu towbad keeno kugudasha la'aantii uu waqtigeeda kugudan.

Ruuxaan salada soo qalayn toobadiisa lama aqbalo waxaa kuwaajib ah intuu raatiba tukan lahaa inuu qalaha iska bixiyo maxaa yeelay qof qalo lagu leeyahay suuna lagama aqbalo axwaashaasna waxaa lagu xusay kitaabkeena (**Sacaadatul Abadiyah**) salaadii kutagto cudur daar danbi mahan laakiinse dag dag in lagu qaleeyo ayaa waajib ku ah afarta mad haba qofkii faral cudur daar kutagay lagu leeyahay ma ubanaano inuu sunooyin oogo sida uu qabo maalik xanbali iyo shaafihi xanafina waxa uu qabaa inay banana tahay axkaamtaasna ayada oo faahfaahsan waxaad kaheli kartaa (**Durrul Mukhtaar**) iyo kitaabka (**Radul Muxtaar**) iyo kitaabka (**Durrul Muntaqaa**) iyo (**Sharxul Daxdaawii) (Maraaqil Falaax**) iyo (**Al-jawhara**).

KALİMO TENZIH (Erayo Nazahan)

(Subxaanallah wabi xamdulillah, subxanallah cadiim). Erayaashan waa weyn hadii aad akhriso subaxdii iyo maqribkii boqol mar danbigaada waa la dhaafaa. Danbi kale haddii uu galo waa loo dhaafaa. Ducadan **(Macnaheeda)** waxaa ka helaysaa boga nambarkiisu yahay 307 iyo 308 ayey ku qorantahay. Tani waxay sababeysaa in dhibaatooyinka oo dhan ay meesha ka baxaan.

Nabigeena Muxamed (calayhi salaatu wassaalam) wuxuu yiri, **(Ilaah subxanahu Watacaalaa qofkii uu jeclaado waxa uu bartaa diinta iyo dadka kalena waa baraa. Diinteena Islaamka waxaan ka baranaa culimadeena afkooda).**

Xaqiiqada culimada ahlu suna waxaan ka baran karnaa kitaabyaashooda iyo kutubadan faafintooda waa in aan ka shaqeynaa.Cilmiga, camalka iyo ikhlaaska dadka saaxiibka la ah (**Waa culimada Islaamka**). Haddii sadexdaan midkood uu kaa nusqaamo waxaa noqoneysaa qof diintiisu xuntahay.

Calimka Islamka mar walba waxa ay albaabadiisa u furanyihiin sida uu ku caawin lahaa dadka. Dadka xun waxay kuu jiidaan dhanka xun waxayna saaxiib la yihiin sheydaanka.[1]

Haddii aad badiso ducada danbi dhaafka waxaa kaa yaraanaayo dhibka oo dhan wuuna kaa yaraanaa.

---

[1] Ikhlaas aan camal laheyn barashadiisu faa' ido ma leh. **(Hadika)** bogga 1. farqada 366 iyo 367 iyo **(Mektubat)** bogga 1. 36, 40, 59, aad iyo 157 aad ayaad ka fiirin kartaa.